TREES OF SOMALIA

(IN SOMALI)

-Bill: please scan -

Dear .Michael Madaney

As you may well aware, I have transalted and edited the "Treea of Somalia" book by Desmond Mahony from English into Somali. I have enclosed herewith a copy of the new document.

As rseult of the tragic civil war in Somalia at the present it is proving very difficult to actively pursue the publication of this document. I therefore decided to photocopy the final version of the book, and send them to Somalia.
I hope that the new book will be useful to the community in this difficult time.

Finally, if you would like to comment about the document, and its contents, or if you know someone who needs acopy of the book, please write to me at the address below:

Mohmoud Omer Ibrahim
26 Whistler Gardens,
Edgware,
Middlesex,
HA8 5TT.

# ASTAAMAHA, FAA'IIDOOYINKA IYO XANAANNADA DHIRTA SOOMAALIYEED

**WAXAA QOREY OO TARJUMEY:**

**MAXAMUUD CUMAR SH. IBRAAHIM**

**L O N D O N**
**May , 1992**

## TUSMADDA BUUGGA;

Mahadcelin.................................................. ii

Gogoldhig................................................... iii

**Cutubka 1 aad:** **Warbixin Ku Saabsan Xaaladda Dhirta Soomaaliyeed**.............................. 1

**Cutubka 2 aad:** **Sharaxaad Ku Saabsan Cimiladda Soomaaliya**................................ 4

**Cutubka 3 aad:** **Astaamaha, Faa'idooyinka, iyo Xanaanadda qaar ka mid ah Geedaha Soomaaliya ka baxa**.................................... 9

**Cutubka 4 aad:** **Sharaxaada qaar ka mid ah ereyada Buuggani ku jira**......................... 209

Tusayaasha:

Tusaha 1 aad: Qeybaha Cimiladda Soomaaliya............. 5

Tusaha 2 aad: Liiska geedaha Soomaaliya ka baxa qarkood, iyo cimiladda ku haboon bixitaankooda..... 7

Tusaha 3 aad: Liiska geedaha Soomaaliya dibeda ka soo galay iyo cimiladda ku haboon bixitaankooda............................ 7

Tusaha 4 aad: Liiska Geedaha miraha la cunno leh, iyo ku haboon bixitaankooda.................... 8

Khariidaddo:

Khariidada 1 aad: Goboladda iyo Degmooyinka Soomaaliya......................... 2

Khariidadda 2 aad: Qaybaha Cimiladda Soomaaliya...... 5

Mahadcelin:

Ugu horeyntii waxaan mahad u jeedinayaa dhamaan dadkii iyo hay'adihii gacanta iga siiyey tarjumida iyo dib u qorida buuggani. Dadkaas oo fara badan, waxaan si gaar ah mahad ugu celinyaa Desmond Mahony oo talo iga siiyey isla markaan igu dhiirigaliyey tarjumida buugga " Trees of Somalia".

Waxaan mahad gaar ah u jeedinyaa hay'ada samafalka " Oxfam", oo iga caawisey xagga dhaqaalaha mudaddii aan hawsha buuggani waday, iyo Roger nuamann oo si hagar la'aan ah gacan iiga siiyey hawsha buuggani.

Waxaa kale oo aan halkan mahad ugu celinayaa Ibraahim Cilmi Faarax, Cabdilaahi Muuse "Bookh", Cabdi Ciise, Macheal Madany, John Leefe, Axmed Xasan Coofle, Camilla Toulmin, iyo Maxamed Xaamud oo siyaabo kala duwan iiga kaalmeeyey hawsha buuggani.

Ugu dambeyntii waxaa aan mahad celin u gudbinyaa Machadka Wolverhampton Polytechnic, gaar ahaan " Agricultural Education and Training Unit", iyo "International Intitute For Environmental Developments", oo si deeqsinimo ah iigu ogolaadey inaan isticmaalo qalabkooda, sida Cambuterka.

Gogoldhig:

Hay'ado badan oo caalami ah ayaa Soomaaliya yimid 10-15kii sanno ee u dambeeyey, si ay uga caawiyaan hawlaha la xidhiidha horumarinta deegaanka, sida la dagaalanka nabaadguurka, dhireynta, iyo qaar kale. Hay'adahas oo hawlo la xidhiidha dhirta ka wadday goobo badan oo ka tirsan Soomaaliya, waxaa sida badan u shaqeeya khubaro shisheeya ah. Arrintani waxay dhalisey in warbixin kasta oo lagu qoro hawlaha ay wadaan lagu qoro af-shisheeye, badankoodana lagu keydiyo xarumaha hay'adahaas ama xafiisyadda dawladda qaarkood.

Dadka ka wadda hawlaha dhirta gobolada iyo degmooyinka Soomaaliya waxaa dhacda sida badan, ineysan u helin fursad ay ku darsaan warbixinta laga qoray mashaariicda dhireynta, Sababata oo ah, dad yar ayaa laga yaabaa iney akhriyi karaan qorina karaan afka-shisheeye ee ay warbiximahaas ku qoran yihiin.

Sannadkii 1990, waxaa la daabacay buug ka saabsan astaamaha, faa'idooyinka, iyo xanaanadda qaar ka mid ah geedaha Soomaaliya ka baxa, buuggaas waa kii ugu horeeyey ee noociisa ah, soona koobaya guud ahaan aqoonta la xidhiidha geedahaas. Waxaa lagama maarmaan noqotey in buuggaas oo ku qoran af-ingriis loo badalo af-Soomaali, isla markaana lagu darro wixii warar ah ee ku saabsan dhirta Soomaaliyeed si dadka Soomaaliyeed uga faa'ideystaan.

Ujeedadda iyo Habka Loo Qorey Buugga:

Waxaa buuggani loogu talo galay iney ka faa'ideystaan, dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa ka shaqeeya hawlaha la xidhiidha dhirta. Maamulayaasha beeraha dhirkobcinta ayaa ka mid ah dadka buuggani ku isticmaali kara shaqada ay hayaan, maadaam uu warbixin cilmiyeysan ka siinayo geedaha ku qoran. Beeraleyda, Fidiyayaasha, Farsamo yaqaanadda dhirta iyo daaqa ayaa ka mid ah dadka buuggani ka faa'ideysan kara.

Ardeyda xarumaha waxbarashadda, gaar ahaan kuwa dhirta, iyo daaqa ayaa buuggani waxtar u yeelanayaa, siiba waxaa uu saldhig u noqon karaa daraasadda la xidhiidha dhirta ee ay sameynayaan, taas oo muddo ka dib keeni karta iney kordhiyaan waxyaabo badan oo waxtar leh, oo buuggani ka maqan.

Waxaa leysku dayey in buuggani lagu qoro luqad jilicsan oo akhristayaasha buuggani badankoodu fahmi karaan, hase ahaatee waxaa jira in dhibaato lagala kulmey sidii loo heli lahaa ereyo Af-Soomaali ah oo ku haboon ereyadda afka qalaad ku qoran.

Dhawr Cutub ayuu ka kooban yahay buuggani, cutub walbana waxaa uu u sii kala baxaa dhawr cinwaan, taas oo ujeedadda ka dambeysa tahay in akhriska buuggani fududaado. Afar cutub ayuu buuggani ka koobana yahay, cutubka koowaad waxaa uu ka waranaya xaaladda dhirta Soomaaliya maanta ku sugantahay. Cutubka labaad, cimiladda Soomaaliya ayuu tafaasiil ka bixinayaa. Cutubka Saddexaad, waxaa ka bilowda sharaxaada geedaha buuggani ku qoran. Iskugeyn ilaa 50 ged ayaa buuggani ku qoran, kuwaas oo iskugu jira qaar Soomaaliya dabiici uga baxa iyo qaar waddanka dibeda ka soo galay.
Ugu dambeyntii, cutubka afraad waxaa lagu sharxayaa qaar ka mid ereyadda buuggani ku qoran.

## Magacyadda Geedaha:

Waxaa jira in magacyo kala duwan geedaha qaarkood looga yaqaan gobolada iyo degmooyinka Soomaaliya, sidaas daraadeed, si loo yareeyo dhaliisha halkaas ka iman karta, geed walba magaca loo arkey in akhristayaasha badankoodu aqoonsan karaan ayaa cinwaan looga dhigey, isla markaana waxaa lagu daba qoray magacyadda kale ee looga yaqaan Soomaaliya.

## Cimiladda Ku Haboon Bixitaanka Geedaha:

Maadaama, ay dhirtu cimilo kala duwan u baahan tahay waxaa buuggani tilmaamayaa cimiladda kala duwan ee geedahu ka bixi karaan. Waxaa si gaar ah looga waramey muhimadda ay roobka iyo heerkulka qorraxdu ay leeyihiin, waayo bixitaanka geedaha qeyb weyn ayey ka qaataan.

## Isticmaalka Geedaha:

Geed kasta waxyaabaha ugu muhiimsan ee waddanka gudihiisa iyo dibediisa looga isticmaalo ayaa lagaga waramey buuggani. Waxaa laga reebey oo aan buugani lagu qorin faa'idooyinka ama waxyaabaha geedaha loo isticmaalo ee aan sidaas muhiim u aheyn.

Waxyaabaha geedaha Soomaaliya ka baxa loo isticmaalo wey fara badan yihiin, hase yeeshee waxaa ayaan darro ah, in ilaa maanta aan si wanaagsan loo soo ururin oo aan la habeyn waxyaabaha geed walba ay dadku u isticmaalaan.

Kobcinta iyo Xanaanadda Dhirta:

Geedaha buuggani ku qoran qaarkood waxaa laga hayaa warar kaamil ah oo ku saabsan, xilliyada ay haboon tahay in iniinyahooda la soo guro, mudadda la keydin karo, meelaha ugu haboon in lagu beero, xanaanadda ay u baahan yihiin iyo waxyaabo kale.
Laakiin, waxaa jira geedo kale oo badan ilaa maant aan la hayn cimiladda ku haboon in lagu beero, siyaabaha loo kobcin karo iyo qaar kale. Taas oo ah hawl sugeysa aqoonyahanada Soomaaliyeed.

Maxamuud Cumar Sh. Ibraahim.

May 1992.

# CUTUBKA 1 aad: Warbixin Ku Saabsan Xaaladda Dhirta ee Soomaaliya.

Dadka Soomaaliyeed, sida dadyew badan oo ku dhaqan waddamada soo koraya ayey ku tiirsan yihiin khayraadka dhulka, sida dhirta oo kale. Dhirtu faa'idooyin aan la soo koobi karin ayey u leedahay dadka Soomaaliyeed. Daaqa, Xaabada, iyo dhuxusha ayaa ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee dhirta waddanka laga helo.

Sanadahan dambe waxaa lagu qiyaasaa in 80% tamarta waddanka laga isticmaalo ka timaad dhirta, taas oo isugu jirta xaabada iyo dhuxushaba. Xoolaha Soomaaliya ku dhaqan waxaa lagu qiyaasaa 35 milyan, waxayna dhamaantood ku nool yihiin dhirta waddanka ka baxda, xoolahaas oo qeyb libaax ka qaata kor u qaadida dhaqaalaha dalka.

Waxaa sannadihii ugu dambeeyey Soomaaliya soo food saaray dhibaatooyin la xidhiidha deegaanka, kuwaas oo ay dhaliyeen gumaadida dhirta lago hayo. Baa'binta kaymihii dabiiciga ahaa iyo guud ahaan dhirtu waxay dhalisey in xaabadii iyo dhuxushiiba gabaabsi ku noqdaan goobo badan oo Soomaaliya ka tirsan.
Waxaa iyadauna korodhey baahidii loo qabay qoryaha lagu dhisto aqalada, sannadkii 1980kii waxaa lagu qiyaasaa in ilaa 144,000 m oo qoryo ah loo isticmaalay dhismaha guryaha, ay ka midka yihiin aqal Soomaaligu.


Haddii aan si dhakhso ah, waxa looga qaban dhibaatooyinka lagu hayo dhirta iyo deegaanka Soomaaliya, waxaa la saadaaliyey in khatar weyn soo food saari doonto dadka, taas oo halis galin karata nolosha dadka iyo xoolahaba.
Dhibaatooyinka la soo gudboonaan kara dadka waxaa ka mid kuwan hoos ku qoran.

- Baahida loo qabo waxyaabaha dhirta laga helo, gaar ahaan xaabada iyo dhuxushu wey sii badaneysaa, taas oo ay ugu wacan tahay tirada dadka oo badaneysa iyo dhirtii oo gabaabsi ku noqoneysa meelo badan oo ka tirsan dalka. arrintani, waxay dhalisey in ayaa qiimaha dhuxusha iyo xaabaduba u sii kordhaan.

- Haddii gumaadida iyo baa'binta kaymaha dabiicigu sii socoto, waxaa hoos u dhacaya guud ahaan nafaqadii dhulka ku jirtey, taas oo hoos u rideysa awoodii uu dhulku wax ku soo saari lahaa, hadday noqoto dalagyadda beeraha, iyo dhirta kalaba.

- Haddii uu dhulka nabaadguur ku dhaco, waxay ugu dambeynta keeneysaa in dadku ka guuraan.

Khariidadda 1 aad: Goboladda iyo Degmooyinka Dalka



Marka laga reebo dhul yar oo kooban , guud ahaan cimilada Soomaaliya kuma haboona beerista geedaha, dhul balaaran ayaa dhireyn lagu sameeyey 10kii sanno ee u dambeeyey, hase ahaatee laguma guuleysan mashaariicdaas dhireynta sababta oo ah cimilada Soomaaliya oo ah, mid roobka ka da'aa yar yahay, qorraxduna kulushahay. Waxaa lagu qiyaasaa in 2% dhulka Soomaaliya ku haboon yihiin beeritaanka dhirta.

Maadaama dhirta Soomaaliya lagu beeraa dabooli karin baahida dadku u qabaan waxyaabaha ay dhirta ka helaan waxaa lagama maarmaan ah, in dhirta sida dabiiciga uga baxayso la siiyo tixgalin gaar ah. Haddii dhirta Waddanka ka baxda laga ilaaliyo jaritaanka iyo daaqsinta xoolaha xilliga ay baxayaan, isla markaan si dheeli tiran loo maamulo, waxaa aan shaki ku jirrin in dhibaatada jirta maanta la hakin karo.

Maadaama cimilada Soomaaliya aysan ku habooneyn mashaariic dhireyn oo balaaran sidaan hore u soo sheegney, waxaa loo baahan yahay in dhirta la isticmaalo iyada oo aan loo geysan dhaawac deegaanka dalka guud ahaan. Waa i dhirta lagu dhiirigaliyaa iney si dabiici ah u soo baxdo, waayo kharash badana uma baahna, meelaha qaarkoodna waa habka kaliya ee dhirta soo celin karo.

# CUTUBKA LABAAD: Sharaxaad Ku Saabsan Cimiladda Soomaliya.

Ujeedadda cutubkani waa in uu akhristayaasha buuggani siiyo tafaasiil guud oo ku saabsan cimiladda Soomaaliya. Soomaaliya waxay ka mid tahay waddamada ku yaal Kuleylayaasha, sidaas daraadeed qorraxdu wey kulushahay, roobka ka da'aana ma badna. Laakiin cimiladda Soomaaliya isku wadda mid maaha ee wey kala duduwan tahay.

Waxaa la soo ururiyey wararka ku saabsan cimiladda Soomaaliya, gaar ahaan 50kii sanno ee u dambeeyey, si loo ogaado sida roobka iyo kulka qorraxdu ugu kala badan yihiin gobolada iyo degmooyinka Soomaaliya.

Qaabka dhulka, roobka, heerkulka qorraxda, iyo waxyaabo kale ayaa qeyb weyn ka qaata sida dhirtu uga baxdo Soomaaliya. Tusaale ahaan, buuraleyda ku dhererersan waqooyiga Soomaaliya waxay heshaa roob ka badan inta ka da'da qeybaha kale ee Soomaaliya.


Guud ahaan roobka Soomaaliya ka da'aa waa yar yahay, waxana lagu qiyaasaa 150-600mm sannadkii. Roobku waxaa uu ku badan yahay gobolada koonfureed, marka laga reebo buuraha silsila "Golis" ee waqooyiga Soomaaliya. Celcelis ahaan, kulka qorraxdu waxaa uu u dhexeeyaa 18C°-30C°, hase ahaatee waxaa jira qaar ka mid ah degmooyinka dalka sida Berbera iyo Luuq oo mararka qaarkood kulkoodu gaadho 45C°.

Qeybinta Cimiladda Soomaaliya:

Si dadka iyo hay'adaha ku hawlan dhireyntu u helaan aragti guud oo ku saabsan cimiladda dalka, iyo sida bixitaanka geeduhu ugu kala haboon yahay ayey lagama maarmaan noqotey in la helo khariidad tilmaameysa guud ahaan cimiladda Soomaaliya.

Haddaba iyada oo la isticmaalayo wararkii ku saabsanaa roobka iyo kulka qorraxda ee la ururiyey 50kii sanno ee u dambeysey ayey suurogal noqotey in khariidad tuseysa cimiladda guud ee dalka in la sameeyo. Ilaa 5 soon ama qaybood ayaa loo qeybiyey cimiladda Soomaaliya, iyada oo la isticmaalayo inta uu dhulku badda ka sareeyo, roobka, iyo kulka qorraxda, sida ku cad khariidadda 2 aad.

Kharidadda 2 aad: Qeybaha Cimiladda Dalka.



Tusaha 1 aad, waxaa uu si qotadheer u tilmaamayaa astaamaha ay qeybaha (Zones) cimilooyinka caanka ku yihiin.

**Tusaha 1 aad:**Qeybaha Cimiladda Somaaliya.

| Sumada Qeybta (Zone) | Astaamaha Gaarka ah | Dhererka Dhulka (m) | Roobka (mm) | Kulka Qorrax |
|---|---|---|---|---|
| A | Dhul Qalleyl ah | 0 - 1500 | <250 | >22 |
| B | Dhul Hosaad Qalleyl ah | <700 | 250 -400 | >22 |
| C | Dhul Sare/ Qalleyl ah | >500 | 250 -400 | <24 |
| D | Dhul Hosaad Qoyaan ah | <700 | >400 | >22 |
| E | Dhul Sare/ Qoyaan ah | >500 | >400 | <24 |

Somaaliya waxaa bixtaanka dhirta qeyb weyn ka qaata xaddiga roobka iyo heerkulka qorraxda ay gaadho. Sidaas daraadeed, beeritaanka geedaha waxaa sida badan lagu guuleystaa marka lagu beero, qeybaha dalka leh roobka ku filan yahay, isla markaana kulka qorraxdu yartahay.

Madaama dhirta buuggani ka waramayo isugu jiraan , qaarwaddanka dabiici ku ah iyo kuwo dibada laga soo galiyey, waxaa aan shaki ku jirin, iney kala duwan tahay cimiladda ay u baahan yihiin si ay u baxaan. Tusayaasha ( 2,3,4,) waxay tilmaamayaan cimiladda ku haboon bixitaanka geedaha buuggani ku qoran. Sida ka muuqata tusayasha , waxaa cad in geedaha badankoodu iney ka bixi karaan dhawr cimilo oo kala duwan, laakiin geedaha qaarkood oo geed miroodyadu ka mid yihiin ayaa ka baxa ookaliya cimiloyinka roobku ku badan yahay oo kaliya.

**Tusaha 2 aad: Magacyadda Geedaha Waddanka Dabiiciga Uga Baxa iyo Cimiladda ku Haboon Bixitaankooda.**

| Magac | | | Qeybaha Cimiladda (ZONES) |
|---|---|---|---|
| Caday | : | Salvadora persica | A,B,D, |
| Cadaad | : | Acacia senegal | A,B,D, |
| Dayib | : | Juniperus excelsa | E, |
| Dhamas | : | Conocarpus laucifolius | B,C,D, |
| Dhuur | : | Tamarix aphylla | A,B,D, |
| Fulaay | : | Acacia seyal | |
| Galool | : | Acacia bussie | A,B,C,D,E, |
| Garbi | : | Acacia albida | B,C,D,E, |
| Garas | : | Dobera glabra | B,D, |
| Gob | : | Ziziphus mauritiana | A,B,D, |
| Hareeri | : | Terminalia prunioides | B,D, |
| Hohob | : | Grewia mollis | |
| Maraa | : | Acacia senegal | A,B,D, |
| Mareer | : | Cordia sinensis | B, |
| Raqay | : | Tamarix indica | C,E, |
| Qoon | : | Hyphaene compressa | A,B,D, |
| Qudhac | : | Acacia tortilis | A,B,C,D,E, |
| Quud | : | Balanites aegyptiaca | D, |
| Tiin | : | Opuntia vulgaria | |
| Timir | : | Phoenix dactylifera | A,B,D, |
| * Xarar | : | Terminalia spinosa | B,C,D,E, |
| Yaaq | : | Adansonia digitata | |
| Yegaar | : | Boswellia frerena | C,E, |
| Dhiddin | :- | Commiphora myrrh | |
| Yicib | :- | Cordeauxia edulis | |

**Tusaha 3 aad: Magacyadda Geedaha Waddanka Dibada uga Yimid, iyo Qeybaha Cimiladda (Zones) ay Ka Baxaan.**

| Magaca | | | Qeybaha Cimiladda (Zones) |
|---|---|---|---|
| Baxarasaaf | : | Eucalyptus camaldulensis | B,C,D,E, |
| Boordi | : | Cassia siamea | D, |
| | : | Albizzia lebbek | D, |
| Danno | : | Euphorbia tirucalli | |
| Geed Hindi | : | Azadirchta indica | B,C,D, |
| Geed Walaayo | : | Parkinsonia aculeata | B,C,D,E, |
| Mahogany | : | Khaya senegelensis | D,E, |
| Miraa-miri | : | Schinus Molle | E, |
| | : | Prosopis cineraria | E, |
| | : | Prosopis chilensis | B,D, |
| | : | Prosopis Juliflora | A,B,C,D,E, |
| | : | Sesbania grandiflora | A,B.D, |
| Shawri | : | Casuarina equisitifolia | |
| Lukiina | : | Leucaena Lencocephala | |
| Booc | : | Calatropis procera | |

**Tusaha 4 aad: Geed Miroodka Dalka ka Baxa iyo Qeybaha Cimiladda (Zones) ayka Baxaan.**

| Magaca | | | Qeybaha Cimiladda (Zones) |
|---|---|---|---|
| Babbay | : | Corica papaya | |
| Bibbo | : | Anacardium occidentale | E, |
| Bambeelmo | : | Citrus paradisi | A,B,C,D,E, |
| Beydaan | : | Terminalia catapa | A,B,D, |
| Cambe | : | Manifera indica | A,B,C,D.E, |
| Canuuni Weyn | : | Annona muricata | A,B,C,D,E, |
| Canuuni Yare | : | Annona Squamosa | C,E, |
| Liin | : | Citrus aurantifolia | A,B,C,D,E, |
| Seytuun | : | Psidium guajara | A,B,C,D,E, |
| Qumbe | : | Cocos nucifera | A,B,D, |

Babbaay ( *Corica papaya* )

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Babbaaygu waxaa uu ka mid yahay geed miraha la cunno leh, dadkuna aad ayey u jecel yihiin mirahiisa macaan. Waxaa aad loogu tallaalaa beeraha waaweynba iyo kuwa yaryarba, guryaha dhexdooda, iyo agagaarkooda. Waxaana sida badan lagu tallaalaa meelaha leh biyo ku filan.

Waddamada uu geedkani sida dabiiciga ah uga baxo waxaa ka mid aha Koosta-rika iyo Megsiko.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Babbaaygu waxaa uu leeyahay caleemo qoyan sannadkii oo dhan, Qori dhismo gali kara ama loo isticmaali karo xaabo ma laha geedkani. Waxaa uu soo bixiyaa ubaxa ugu horeeya 6 bilood marka uu jiro. Hase ahaatee haddii roob yaraani jirto ubax ma bixiyo.

Dheddig iyo lab ayey geedaha Babbaaygu kala leeyihiin, sidaad daraaded geed kasta oo Babbaay ahi ma soo saaro miro la cunno.

Xidido gaagaaban ayuu leeyahay, si fudud ayaana dhaawac loogu geysan karaa jirrida geedkani

BABBAY CORICA PAPAYA



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Dhulka biyaha badan leh ayuu babbaygu si fiican uga baxaa. Roobka uu ku baxo waxaa lagu qiyaasaa 1200mm sannadkii. Heerkulka gaadhaya Ilaa 20C ayaa ku haboon bixitaanka geedkani.

Buuraha kuma haboona in geedkani lagu beero, sidaad daradeed dhulka fidsan ayaa lagu tallaalaa.

Dhulka godan ee biyuhu fadhiisatan xilliga roobu da'o geedkani si wacan ugama baxo. Waraabin joogto ah ayuu geedkan u baahan yahay si uu ugu baxo si fiican, gaar ahaan meelaha roobka ku daa'aa yaryahay.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Babbaaygu waxaa uu ka mid yahay geedaha khudaarta ee waddanka ka baxa kuwa ugu muhiimsan. Beeraleydu waxay ka helaan dakhli marka ay iibiyan miraha geedkani, kaas oo kaba dhaqaalahooda.

Muddo gaadheysa sannad ayuu Babbaaygu u baahan yahay inuu ku soo bixiyo miro la cuno oo bisil. Nafaqo aad jidhka bini'aadamka ugu wanaagsan ayaa laga helaa.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Miruhu markey bislaadaan waa in la jaraa, marka ujeedadu tahay in iniinyo laga dhex guro miraha, waa in miraha aan aadka u cusleyn la guraa, haddii kale raritaankooda ayaa adkaaneysa.

Marka miraha geedka la cunno waa in iniinyaha geedkani la ururiyaa, oo la keydiyaa. Si iniinyaha loo qalajiyo waa in la dhigaa qorraxda.

Iniinyaha geedkani waxaa la keydin karaa muddo gaadheysa ilaa 3 sannadood. Halkii (1kg) oo iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan ila 76,300 xabbo.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA KU JIRO.:

Siyaabaha loo kobcin karo waxaa ka mid ah, iniinyaha oo si toos ah loogu beero meeshii la doonayey inuu geedku ka baxo. Bac ayaa mararka qaarkood iniinyaha geedka lagu beeraa, ka dibna waxaa lagu xanaaneeya beerta dhirkobcinta, intaan lagu beerin dhulkii loo diyaariyey. Ciida bacda lagu gurayaa waa iney noqotaa mid u badan bacaad,. Dhererka iyo dhumuda bacda lagu beerayo iniinyuhu waa 15 * 20 cm markey fidsan tahay.

Marka la beerayo wa in iniinyaha lagu ridaa ilaa 1cm oo aan aad bacda inteeda hoose loo galin. 1-4 usbuuc gudahooda ayaa iniinyuhu ku soo baxaan, marka la beero ka dib. Hadday dhacdo in dhawr geed ka so baxaan bac kaliya waa in lagu wareejiyaa bac kale 1 usbuuc ka dib marka ay soo baxaan. Waraabin joogto ah ayey u baahan yihiin dhirtu inta ay ku sugan tahay beerta dhirkobcinta, gaar ahaan labo jeer maalintii.

Marka ay geeduhu diyaar u noqdaan in lagu tallaalo meeshii la rabay wa in la hubiyaa in ciida lagu talaalayaa tahay mid gudbin karta biyaha. Waxaa dhirta leysku jirsiiyaa qiyaastii saddex talaabo (3 * 3 mitir) marka la tallaalayo.

Hadday dhacdo in nafaqadda ciida lagu beerayaa tahay mid hooseysa waa in nafaqeeyaa.

Magaca: Bambeelmo ( Citrus paradisi )

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

"

Geedka bambeelmadu waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh, dadkuna aad ayey u jecel yihiin cabitaanka laga miiro miraha geedkani.


Geedkani waxaa uu aad uga baxaa Koonfura Soomaaliya, gaar ahaan beeraha u dhaw labada webi Jubba iyo Shabeelle, beerahaas badankoodu aad ayey u waaweyn yihiin,
miraha ugu badana beerahani ayaa laga soo guraa.
Waxaa kale oo geedo fara badan lagu beerey degmooyinka ku yaal waqooyigga Soomaaliya sida Hargeysa, Boorama, iyo Boosaaso.

Geedka bambeelmadu waxaa uu si dabiici aha uga baxaa Waddamada ku yaal kuleylayaasha, sida koonfur Bari Aasiya iyo jasiiradaha ku yaal galbeedka Hindiya.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedka bambeelmadu waxaa uu leeyahay caleemo qoyan sannadkii oo dhan, mana laha geedkani qoddax.
Geedakani dhererkiisu waxaa uu sida badan u dhexeeyaa 10-15 mitir, dhumacdiisuna ilaa 25 cm ayaa lagu qiyaasaa.
Qolofta saaran jirrida geedkani midabkeedu waa madow, iyo cawlaan isku dhafan qasan. Ubax midabkiisu yahay cadaan ayuu leeyahay geedkan bambeelmadu.
Geedkani Xidido dhaadheer, aadna u badan ayuu leeyahay. Miraha ugu horeeya wuxuu geedku bixiyaa marka uu jiro 3-5 sanno, waxaan miraha ugu horeeya ku bislaadan 8-12 bilood.

BAMBEELMO CITRUS PARADISI



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Geedka bambeelmadu waxaa uu ka mid yahay geedaha u baahan biyaha badan marka ay baxayaan. Waxaa la wariyey in geedkani u adkeysan karo biyo yarida ama biyo la'aanta muddo aan badneyn. Waxaa lagu qiyaasaa roobka uu u baahan yahay geedkani si uu u baxo ilaa 800mm sannadkii.

Geedka bambeelmadu waxaa uu si fiican ugu baxaa heer kulka u dhexeeya 20C-25C .

Geedka bambeelmadu banaannada iyo buurahaba wuu ka baxaa , gaar ahaan buuraha dhererkoodu gaadho ilaa 1000 mitir.
Geedkani dhulalka qoyan ayuu si fiican uga baxaa. ama waa in si joogto ah loo waraabiyaa.

.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Sidaan hore u soo sheegney, geedka bambeelmadu waxaa uu ka mid yahay geedaha bixiya miraha dadku canaan, gaar ahaan miraha geedkani waxay ka mid yihiin kuwa ugu tayada badan, sidaas daraadeed dad aad u tiro badan ayaa cunna mirahiisa. Bambeelmadu ka mid tahay geedaha dakhliga soo galiya beeyaleyda Soomaaliyeeda, waxay u iib geeyaan miraha magalooyinka waaweyn ee Muqdishu ka midka tahay.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Geedkani marka la rabo in iniinyahiiso la beero, waxaa haboon in iniinyaha ama abuurka laga soo guro geedaha dhererka iyo dhumucdaba leh, isla markaana u muuqda iney caafimaad qabaan. Si iniinyaha waaweyn iyo kuwa yar loo kala saaro waa in lagu ridaa biyo.

Geedkani iniinyahiisa waxaa la keydin karaa ugu badnaan labo todobaad, mudaddaas wax dhaawac ahi ma gaadhaa iniinyaha, gaar ahaan haddii lagu keydiyo meel ciid qoyan leh, oo kulkeeduna u dhexeeyo 5C-10C. Marka iniinyaha la beerayo uma baahna in diirka saaran la jilciyo sida geedaha kale qaarkood.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANNADA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIR-COBCINTA UU KU JIRO:

Geedka bambeelmadu habab kala duwan ayaa loo kobcin karaa, waxaa ka mid ah, kuwan hoos ku qoran.

a) Marka hore geedkani iniinyahiisa waxaa lagu beero bac, marka iniinyaha bacda lagu ridayo, waxaa loo baahan yahay in ilaa saddex xabbo lagu rido bac walba.

Dhirta waxaa lagu xanaaneeyaa beerta dhir-kobcinta muddo gaadheysa ilaa 12 bilood. Saddex ilaa afar todobaad ka dib ayaa iniiyahii la beerey soo baxaan.

Hadday dhacdo in ciida lagu tallaalayo geedkani nafaqadu ku yar tahay waxaa loo baahan yahay in lagu daro ciida nafaqo.
Ciida aan aheyn dhoobada ama bacaadka kaliya ee isugu jirta labadaba ayaa bixitaanka geedkani ku haboon.

Marka geedaha la beerayo Waxaa fiican in la kala fogeeyaa, waxaa leysku jirsiiyaa sagaal tallaabo ama in ka sareysa, si aaney geeduhu biyaha iyo macdanta kale ee dhirta u baahan tahay ugu tartamin. God dhererkisu iyo balaciisu ku dhawyahay labo taako ( 40cm * 40Ccm ), ayaa loo qodaa geedaha marka dhulka lagu tallaalayo.

Waxaa la sheegey in xasharaadka dhaawac u geysan karaan geedkani xididadiisa.

Magaca: Baxarasaaf *(Eucalyptus camaldulensis)*

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:

Baxarasaafku wuxuu ka yahay geedaha waddanka dibeda ka soo galay waxaana uu leeyahay dhawr nooc.

Geedka baxarasaafka baxaa oo laga beerey badhtamaha magaalooyin ku yaal waqooyiga Soomaaliya sida Hargeysa, Burco iyo degmooyin kale. Geedkani, Sida geedka Shawrigaoo kale ayaa sannadihii ugu dembeeyey aad loogu beerey bacaadka u dhaw Shallambood iyo Marka, iyo goobo kale oo ka tirsan dalka sida Kismaayo, Baraawe.

Geedka baxarsaafku waxaa uu si dabiici ah uga baxaa Austraaliya.

## 4. ASTAAMAHA GEEDKA:

Geedka baxarasaafku waxaa uu ka mid yahay, geedaha leh caleemaha qoyan sannadkii oo dhan. Geedkani Dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 30 mitir, gaar ahaan marka uu ka baxayo cimiladda ku haboon bixitaankiisa. Qolofta saaran jirrida geedkani waa mid siman , midabkeeduna yahay cawlaan. Laamaha geedkani waa fudud yihiin, hareeraha ayeya u fidaan. Caleemo is weydaarsan ayuu leeyahay baxarasaafku.

Geedka baxarasaafka wuxuu leeyahay Ubaxa midabkiisu yahay cadaan. Geedkani iniinyahiisu waxay u laaleeg yihiin digirta oo kale ayuu bixiyaa geedkani.

Xididdo aad u dhaadheer oo dhulka hoos u gala ayaa ka mid ah calaamaddaha geedkani. Qoriga geedkan waa culus yahay, sidaas daradeed wuxuu ka mid yahay geedaha qoryahooda lagu dhisto aqalada. Aboorka iyo xasharaadka kale ee dhibaatada u geysta qoryaha aqalada lagu dhistaa, si sahlan dhaawac uguma geysan karaan qoriga geedkani, waayo wuu adag yahay.


BAXARASAAF

EUCALYPTUS CAMALDULENSIS


Miraha (mariin)



Qaabka Geedka



Ubaxa (cadaan)




Laamaha



Caleenta (cagaar-cawlaan)



Iniinyo



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Baxarasaafku waa geed abaareed u adkeysta roob la'aanta, kana baxa meelaha uu roobku ku yaryahay. Geedkani Roobka uu u baahan yahay inuu si fiican uga baxo waxaa lagu qiyaasaa inta u dhaxeysa 250mm-1250mm sannadkii.

Geedkani waxaa uu ka baxaa dhulalka banaan iyo buurahaba, gaar ahaan kuwa dhererkoodu gaadho ilaa 1500 mitir.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Geedka baxarasaafka waxyaabo aad u fara badan ayaa Soomaaliya iyo waddamada kaleba looga looga isticmaalaa, kuwaas oo ay ka mid tahay kuwan hoos ku qoran:

**Xaabada:** Dad badan ayaa qoriga geedkani xaabo ka dhigta.
**Dhuxusha:** Waddamada aadka uu geedkani uga baxo, waxaa ay ka sameeyaan geedkani qorigiisa dhuxul, waana faa'idooyinka ugu waaweyn ee geedkan.
**Dhismaha:** Geedkani udubkiis ayaa dadku ku dhistaan guryaha ayaa lagu dhistaa.
**Hadhka:** Sobobta ugu weyn ee geedkani magaalooyinkla loogu beero waa in dadka iyo xoolahuba hadhsadaan.

Beeraleyda ku dhaqan agagaarka labada webi Shabeelle iyo Jubba ayaa geedkani ku tallaaley nawaaxiga beeraha iyo guryaha ay ku nool yihiinba, si uu geedkan uga celiyo dabaylaha qalalan oo dhaawac u geysan kara dalagyada beeraha. Inkasta oo aan ilaa immika la hubin meesha ay ka yimaadeen iniinyihii ugu horeeyeyey, si loo hubiyo nooca ku haboon bixitaanka cimilada Soomaaliya, ayaa iniinyaha geedkani lagu beerey bacaadka Shallambood dhawrkii sanno ee u dambeeyey, si fiican ayaa geedihii la beerey ilaa immimka u baxayaan.

**5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):**

Marka la doonayo in la beero iniinyaha geedkani, waa in marka hore iniinyaha (abuurka) laga soo ururiyaa geedaha caafimaadka qaba, waxaa lagu aqoonsan karaa geedahaas dhererkooda iyo dhumucda jirridooda.

Geedka baxarasaafku Labadii ama saddexdii sannadba mar ayuu soo saaraa iniinyo. Si iniinyaha qalfoofka saaran looga saaro, waxaa haboon in lagu qalajiyo qorraxda, ka dib markey qalalaan ayaa la ruxaa, si ay iniinyuhu uga daa'taan qalfoofka ay ku jiraan. Waxaa lagu qiyaasaa in halkii (1kg) ee iniinyaha geedkani ku jiraan inta u dhaxeysa 700,000 - 800,000 oo xabbo.

Iniinyaha baxarasaafku waxaa lagu keydin karaa meel qalalan, isla markaana qabow. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in hawaduna ka xidhantahay. Waxaa la keydin karaa iniinyaha geedkan ilaa dhawr sanno , iyada oo aan wax dhibaato ahi gaadhin.

**5.1 BEERIDA IYO XANAANNADA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIR-COBCINTA UU KU JIRO:**

Siyaabo kala duwan ayaa geedkani loo beeraa loona xanaaneeyaa.

a) Ugu horeyntii waxaa suurogal ah in la gooyo geedkani isaga oo aan sidaas u weyneyn laguna beero meel kale.

b) Sida badan waxaa lagu beeraa iniinyaha bac, waxaana lagu xanaaneeyaa muddo 4 bilood ah beerta dhir cobcinta, ka hor intaan lagu talaalin meeshii loogu talo galay. Sida badan waxaa iniinyuhu ku soo baxaan 4-15 maalmood gudahood. Boqolkiiba ilaa 55-90 ayaa iniinyaha la beero soo baxo. Waxaa dhererka geedkan gaadhaa 2.5- 5>

Baxarasaafku waxaa uu ka bixi karaa ciida aan nafaqadda ku jirta aan sidaas u badneyn, iyo ciida dhagaxyadu ku jiraan.
Marka la talaalayo waxaa leysu jirsiiyaa labo talaabo (2 * 2m) Hase ahaatee, meelaha ay xaabadu ku yartahay loona beerayo geedkani qorigiisa in la shito, waxaa haboon in la kala fogeeyo, leyskuna jirsiiyo afar talaabo.

Dhawrkii sanno ee u dambeeyey dood ayaa ka socotaa in baxarasaafku isticmaalo biyo badan iyo in kale, taasi oo dhibaato u geysan karta dalagyadda beeraha haddii leysku dhafo geedkani iyo dalagyadda beeraha.
Xasharaadka Aboorku ka mid yahay ayaa dhaawac u geysata geedkani inta uu yar yahay.

Magaca: Beydaan (Terminalia catapa).

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka Beydaanku waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh, dadkuna aad ayey u jecel yihiin mirahiisa.
Beydaanku waxaa lagu beerey gurayaha dhexdooda, gaar ahaan Muqdisho, iyo tuulooyinka koonfur bari ka xigga . Janaalle ayey ku yaalaan geedo aad u da iyo xajmi weyn oo beydaan ahi.

Waddmada uu sida dabiiciga ah uga baxo, gedkani waxaa ka mid ah Malaysiya, iyo jasiiradaha Adaman. Beydaanka waxaa la soo galiyey Hidiya iyo dalalka kale e ku yaal kuleylayaasha. Agagaarka xeebaha ayaa aad weliba logu talaalay.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Beydaanku waxaa uu ka mid yahay geedaha ay caleemuhu ka daa'tan xilliga jiilaalka ah ee roob la'aantu jirto. Dhererkiisu waxaa lagu qiyasey inuu gaadho 10-15 mitir, hase yeeshee waxaa la sheegey in mararka qaarkod uu 25 mitir dhererkiisu gaadho.

Midabka qolofta saran jirridu waa cawlaaniyo madow isu dhafan. Qoddax ma laha Beydaanku, wuxuuna leeyahay ubaxa mar kastaba. Ubaxiisuna wuxuu leeyahay ur aad u ?..
Caleemo aad u balbalaaran oo uu geedkani leeyahay ayaa sobob u ah in uu Beydaanku yeesho hoos aad u weyn oo dadku u ayaan.

Qorigga geedkan waa adag yahay, isla markaana culus yahay, hase yeeshee aboorku wuu dhaawici karaa.

BEYDAAN    TERMINALIA CATAPA


Miraha (huruud-doog-mariin)



Qaabka Geedka



Ubaxa (cadaan-doog)



Laamaha



Caleenta (doog-casaan)



Iniinyo



### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Beydaanku waa geed u adkeysta abaaraha, isla markaana jecel dhulka kulul. Roob badan ayuu u baahan yahay geedkani si uu u baxo. Waxaa lagu qiyasey roobka uu baahan yahay ilaa 1000 mm sannadkii. Dhul hoosaadka ayuu si fiican uga baxaa marka la ag dhigo buuraha.
Waraabin joogtoi ah ayuu u baahan yahay haddii kale waa in dhulka lagu talaalay lahaadaa biyo dhulka xaggiisa sare u dhaw.

### 2. ISTICMAALKA GEEDKA:

Faa'iidooyin badan ayuu geekani leeyahay , waxaana ka mid ah kwan an hoos kaga sheekeyney.
**Cunto:** Beydaanku sida geedo badan oo khudaar ah ee waddkanka ka baxa.waxaa uu dadka siiyaa miro ay dadku quutaan.
**Xaabada:**Laamaha geedkani waxaa ay dadka qaarkiis ka dhigtaan xaaabo ay shitaan
**Hadhka:**Hoos aad u weyn ayuu geedkani leeyahay, taas oo keentey in magaalooyinka iyo tuulooyinkaba lagu talaalo.

Bilicda degaanada lagu talaaley geedkani aad ayuu u kordhiyaa. Waxaa kale o dadka qaarkood ka sameeyaan daawooyin ay cudurada kaga hor tagaan. Qoryaha Beydaanka aqalada ayaa lagu dhistaa. Bacaadka ayaa lag talaalay , si uu uga hakiyo bacaadka socda oo dhibaato ku haya degaanka

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Ininyaha geedkani waa in laga soo hoos guraa geedaha waaweyn hoostooda. 1kg ee iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasey iney ku jiraan 150-860 xabbo. Qalfoofka saaran iniinyaha in laga saro lagama marmaan ma aha., laakiin haddii laga saaro iniinyaha qolofta saaran, marka la bero ayey dhakhso u soo baxaan. Iniinyaha beydaanka waxaa la keydin karaa ilaa muddo dhan 6 billood.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIR-KOBCINTA KU JIRO:

Marka iniinyaha la abuuro waxay ku soo baxaan 3-5 billood gudahood. Boqolkiibana 30-70 ayaa iniinyaha la beero soo baxada. Guud ahaan geedka Beydaanka inta uu yaryahay waxaa haboon in lagu xanaaneeyo beerta dhirkobcinta. Marka ay dhamaato muddadii lagu xanaaneynayey dhirta, waxaa ka dib lagu talaalaa meeshii loogu talo galay. Wakhtiga la talaalayo waxaa dhererka geeduhu ilaa 25 cm ayuu gaadhaa.

Beyddanka waa in lagu tallaalaa ciida u badan bacaadka. Waxaa kale oo u geedkani u adkeysan karaa ciidaha kalaba.
Cayayaan ay Ayaxa ku jiraan ayaa dhawac u geysata geedkani, iyag aoo cuna caleemaha geedkani. Waxaa intaas raaca in Aboorkuna uu cuno qoriga geedkan taas oo dhibaato iyaduana u geysta geedkan. Si uu Beydaanku ugu baxo si wanaasan waa in lagala dagaalamaa cayayaankaas aynu soo sheegney.
Miraha geedkani waxay ku bislaadaan 5-6 billoood. Beyddanku waa geed ka bixi kara cimilda Somaaliya, gaar ahaan waxaa lagu talaali karaa tuulooyinka iyo degaanka dadka si aya uga helaan hadh,isla markaana ugaga gabadaan kulka qorraxda.

Magaca: Bibbo (Anacardium occidentale)

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:

Geed miroodkan waxaa lagu beerey bacaadka Shallambood, iyo degmooyinka yaka midka yihiin Jalalaqsiiyo Baraawe. Ilaa iyo haddana weli lama iney si deg-dega u bexeen iyo inkale.

Waddamada uu geedkani sida dabiiciga ah uga baxo waxaa kamid ah Braasiil, Kolombiya, Costa-rika, Ekwadoor, Guatamaala, Guyana, Hodures, Nigaraguwa, Panama, Peru, Surinaam, Fenesuwella, Iyo jasiirada ku yaal waqooyiga Hindiya. Geedkan waxaa kale oo lagu talaalay melo badan oo ka tirsan qaarada Afrika.


## 2. ASTAAMAHA GEEDKA:

Bibbigu waa geed leh caleemo qoyan sannadkii oo dhan. Dhererkiisu waxaa uu u dhexeeyaa 5-15 mitir. Udub dhumucdiisu gaadho 60cm ayuu leeeyahay. Qolofdta saaran jirridu waa adagtahay. Laamo aad u culculis oo qalqaloocan ayuu geedkani bixiyaa. Caleent walba meel gaar ah ayey ka taagan tahay.
Ubaxiisu waa yar yahay, waxaana geedkan bixiyaa miro la cuno , waxayna ku bislaadan 2-3 billod. Iniinyaha uu geedkani bixiyo oo u eg kalida oo kale waa sun oo lama cuni karo ilaa la dubo mooyee.
Xiddido dhaadheer ayuu geedkani afarta jiho u bixiyaa, mararka qaarkoodna dhumucda jirridaba waa ka weynaadaa. Qoriga geedkani waxa dhibaato ah cayayaanku uma geysan karaan.

BIBBO

ANACARDIUM OCCIDENTALE


Miraha (doog-cagaar-casa an)




Qaabka Geedka



Caleenta (cadaan -huruud)



Laamaha.



Caleenta (cagaar)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Geedkan waxaa uu ka mid yahay geedaha u adkeysta roob la'aanta, wuu ka bixi karaa meelaha uu roobku ku yar yahay. Waxaa uu roob la'aan u adkeysan karaa muddo gaadheysa ilaa 4-6 billood. Roobka uu u baahan yahay waxaa lagu qiyaasey 500-1600 mm sannadkii. Cimilada kulul ayuu si gaar ah ugu baxaa, khaas ahaan inta u dhaxeysa 27c-33c. Buuraha dhererkoodu gaadho ilaa ilaa 1000 mitir iyo dhulka hooseeya labadaba geedkani wuu ka bixi karaa.

## 2. ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxayaabaha loo isticmalo geedkani wey badan yihiin , waxaana ka mid ah kuwan aan hoos ku sheegney.
**Cunto:** Madaama geedkan uu ka mid yahay geed miroodyadda dalka lagu beerey, waxaa aan shaki ku jirrin in cunto ay dadku ka dhigtaan miraha uu bixiyo.
**Xaabada:** Waddamada qaarkood xaabada la shito waxay ka soo urursadaan geedkan.
**Dhuxusha:** Somaaliya dhuxusha la shito waxaa dhamaanteed laga sameeyaa geedaha waddaka ku aha dabiiciga, laakiin dalalka uu geedkani ka baxo qaarkood ayaa dhuxul ka sameeya geedkani.
**Daaqa:** Xooluhu daaqa ay quutaan ayey caleenta gedkan ka helaan.

Faa'iidooyinka kale ee geedkan waxaa ka mid ah in markey caleemihiisu dhulka ku daa'taan ay kor u qaadaan nafaqadda ciida ku joita, taas oo keenta in si dalagyadda beeraha e lagu beero si fiican u baxaan, sidaad oo kale waxay dabeylaha ka celiyaan guryaha iyo beeraha.
Waxaa kale oo uu quxiyaa bilicda magaalooyinka lagu talaalo geedkani. Waxaa dadaka qaarkood ka sameeyaan daawoyin lagu bogsiiyo cuduradda ku dhaca dadka.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Miraha geedka waa in laga ururiyaa markey diyaarka noqdaan.Si iniinyaha looga saaro qolofta saaran waa in la dhigaa qorraxda muddo 2-3 maalmood ah.
Iniinyaha geedkan waa la keydin karaa ilaa sannad haddi lagu keydiyo meel qalalan lagana xidho dabeylaha.

Si diirka iniinyaha saaran loo jilciyo, horena ug baxaan marka la beero waa in muddo 24 saac ah lagu dhex ridaa biyo. Waxaa mudan in la xasuusanaado in aaney haba yaraatee aaney aheyn muhiin in diirka saaran iniinyaha mar waliba la jilciyo.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANNDA GEEDKA MUDDADA BEERTA DHIR-KOBCINTA KU JIRO.

Siyaabo fara badan ayaa geedkani lo kobcin karaa, waxaa ka mid ah in Iniinyaha geedka si toos loogu abuuri karo meeshii loogu talo galay. Geeduhu intey yaryar yihiin haddii la gooyo waxaa lagu tallaali karaa meeshii kale ee la doono. Madaama ay xiddidada geedkani si fudud dhaawac u gadhi karo marka ay ku jiraan safarka waxaa haboon in xiddidada geedkani banaanka iney u soo baxaan laga ilaaliyo.
Waxaa sida badan iniinyaha geedkani lagu beeraa bac, taas oo lagu xanaaneeyo in muddo ah. Iniinyuhu isagoo qalfoofka ku jiro ayaa lagu dhex ridaa bac, ilaa 3 cm ayaa xagga hoose ee bacda ku jira. Sida badan iniinyuhu waxay ku soo baxaan 4-7 usbuuc, boqolkiina 60-70 ayaa iniinyaha la beero soo baxa. Waa in waraabiyaa dhirtu intey ku jirto berta dhir kobcinta. Waxaa la raraa oo lagu talaalaa geedaha meelihii loogu talo galay 1 sanno marka lagu hayo beerta dhir kobcinta. Si ay geeduhu si dhakhso ah ugu baxaan ,qaabaka ay u baxaana u hagaago waa in caleemaha laga jaraa.

Dhulka lagu talaalayo geeduhu waa iney yeeshaan ciid fudud oo gudbisa biyaha, waa in lakala fogeeyaa marka la talaalayo geedaha.

Magaca: Booc <u>(Calotropis procera)</u>

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Boocu waxaa uu si dabiici ah uga baxaa meelo badan oo ka tirsan goboladda iyo degmooyinka dalka, gaar ahaan koonfurta dalka

Waqooyiga Afrika , gacanka Carabta, iyo Hindiya ayaa ka mid ah dhulalaka uu boocu uga baxo sida dabiiciga ah.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Boocu waxaa uu ka mid yahay geedaha sida dhakhsaha ah u baxa marka la talaalo. Hase ahaatee cimrigiisu waa uu gaaban yahay. Dhererka geedkani waxaa u gaadhaa 5 mitir, inkasta oo uu intad ka gaaban yahay sida badan. Boocu waxaa uu sii daayaa dheecaan cad, marka qeyb ka mid ah geedka la dhaawaco. Jirrida geedkani waa cawlaan, caleentiisuna marka uu geedku yaryahayna waa cadaan.

Ubaxa midabkoodu yahay cadaan, ayuu xagga sare ku leeyahay. Xiddida geedkani waa sun. Qori midabkiisu cawlaan yahay aadna u fudud ayuu leeyahay geedkani.

## BOOC  CALOTROPIS PROCERA

Miraha

Qaabka

Ubaxa

Laamaha

Caleenta

Iniinyo

**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Dhulka ciidiisu nafaqadda ku yartahay ayuu geedkani aad u baxaa. Dhulkaas oo sida badan dhirta kale ka bixi kari waayaan , nafaqadda ku jirta oo yar awgeed. Agagaarka tuulooyinka, ayaa boocu aad uga baxaa, iyo meelaha dhulka inta ciid laga guray haddana laga guurey.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Waxyaabaha loo isticmaalo booca waxaa ka mid ah in lagu beero bacaadka, si uu uga qeyb qaato hakinta socodka bacaadka.
Somaaliya waxaa uu aad uga baxaa bacaadka Shallambood iyo Marka u dhaw.
**Daawooyinka.** Boocu waxaa uu ka mid yahay dhirta laga sameeyo dawooyinka, lagula dagaalamo dhibaatooyinka xasharaadka dhulka hoostiisa ku nool. Xooluhu ma cunaan caleenta geedkani , inkasta oo riyuhu daaqaan. Waxyaabaha dusha ka saaran iniinyaha geedkani oo aad u jilicsan waxaa lagu ridaa barkimooyinka iyo waxyaabaha la mid ka ah.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Geedkani waxaa uu ka bixi karaa meelo badan oo ka tirsan dalka iyadoo wax xanaaneyn ah la siin, lana beerin iniinyihiisa. Inkasta oo uu Somaaliya boocu iskiis u baxo, haatan aaney aheyn lagama maarmaan in la badiyo , waxaa haboon in lagu dhiiri galiyo geedkan inuu inkiis uga baxo meelaha looga baahan yahay, sida bacaadka Shallambood iyo meelaha la mid ka ah.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANNDA GEEDKA MUDDADA BEERTA DHIR-COBCINTA KU JIRO.

Habka ugu raqiisan uguna fudud ee geedkan u baxo, waa iyadda oo iniinyaha geedkani lagu dhiiri galiyo iney iskood u baxaan , marka ay diyarka noqdaan. Iniinyaha geedkani waxaa si toos ah loogu beeri karaa dhulka la doonayo inuu geedkani ka baxo. Taas oo dedejineysa bixitaanka geedkani. Waxaa kale oo suuro gal ah in qeyb ka mid ah geedkani inta la gooyo, dib loogu beero dhulka.

Magaca: Boordi ( <u>Cassia siamea</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka boordigu waxaa uu ka mid yahay geedaha dibeda waddanka ka soo galay, dhul aan sidaas u badneyna waa lagu beerey.

Geedkani waxaa uu ka baxaa agagaarka labada webi Shabeelle, iyo Jubba. Gaar ahaan, waxaa uu geedkani ka baxaa nawaaxiga degmooyinka ayka midka yihiin Afgooye, Jilib, iyo qaar kale .

Geedkani wuxuu si dabiici ah uga baxaa Waddamada ku yaal Koonfurta Bari ee qaarada Aasiya, sida Hindiya, Siiralanka, Malaysia, Barma, Indooniisiya, Tayland, iyo meelo kale. Waxaa la wariyey in geedkani la soo galiyey qaarada Afrika ee uusan si dabiici ah uga bixin.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA**

Boordigu waa geed leh caleemo qoyan ama cagaar ah xilli kasta. Astaamaha geedkani waxaa ka mid ah, isaga oo si dhakhso ah u baxa marka la beero, dhererkiisana wuxuuu sida badan u dhexeeyaa 8-10 mitir, hase ahaatee waxaa la wariyey in dhererka geedkani uu 20 mitir gaadho meelaha qaarkood, gaar ahaan marka uu ka baxayo cimilada ku haboon bixitaankiisa. Geedka boordiga jirridiisa waxaa lagu qiyaasaa iney ilaa 30 cm, qolofta saaran jirriduna wey siman tahay, midabkeeduna waa cawlaan ama mariin.

Geedkani laamihiisu waxay u fidaan hareeraha, caleemihiisuna labolabo ayey isaga soo hor jeedaan, ubax aad u fara badan oo ka soo farcama jirrida gunteeda ayuu geedkani boordigu leeyahay.

Boordigu mirahiisu wey dhaadheer yihiin, isla markaana wey dhuudhuuban ayuu leeyahay Boordigu.
Xididada geedkani aad ayey dhulka hoos ugu galaan, kuwaas oo biyaha dhulka ku jira u soo qaada. Geedkani qorigiisu ama udubkiisu adkeysi ayuu u leeyahay dhaawacyada ay u geystaan cayayaanka ay ka midka yihiin aboorku.
Ugu dembeyntii waxaa la wariyey in geekani cimrigiisu dheer yahay.

# BOORDI — CASSIA SIAMEA



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedka boordigu waxaa uu ka baxaa dhulka aanu roobku ka di'in muddo 4-6 bilood ah. Roobka uu u geedkani u baahan yahay si uu baxo waxaa lagu qiyaasaa 650- 1500 mm sannadkii, hase ahaatee, waxaa la wariyey in geedka boordigu ka bixi karo dhulka uu ka da'o roob gaadhaya 500-700 mm sannadkii.

Geedkani dhulka kulul ayuu ka baxaa, ilaa 21-28c ayaa ah heer kulka ku wanaagsan bixitaankiisa. Boordigu waxaa uu si fiican uga baxaa banaannada iyo buurahaba, gaar ahaan kuwa uu dhererkoodu gaadho ilaa 1000 mitir.

Soomaaliya geedkani waxaa uu si fiican uga bixi karaa Koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan dhulka ciidiisu dhoobeyda tahay. ciida bacaadka ah si fiican ugama baxo geedkani.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA

Geedka boordiga Waxyaabo aad u tiro badan ayaa Soomaaliya iyo Waddamada looga isticmaalaa, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabada:** Dad badan oo ku dhaqan meelaha uu geedkani sida dabiiciga uga baxo, ayaa xaabo ka dhigta laamahiisa iyo qorigiisa, laakiin Soomaaliya xaabadu ma ah isticmaalka ugu weyn ee geedkani.

**Dhuxul:** **Geedka boordiga qorigiisa ayaa dadka ku dhaqan waddamada uu sida dabiiciga uga baxo ka sameyaan dhuxul.**

**Dhismo:** Faa'idooyinka ugu weyn ee geedkani waa udubkiisa oo dadku ka sameyaan alaabooyika aqalada la dhigto sida miisaska, armaajooyinka, kuraasta,iyo daababka la galiyo alaabooyinka ay ka mid ka yihiin faasaska, ama dubaha.

**Hadh:** Sobobaha ugu weyn ee geedkani Soomaaliya loogu tallaalay waa in uu dadka iyo xooluhu ka hadhsadaan kulka qorraxda, isla markaan lagu qurxiyo degmooyinka iyo tuulooyinka.

Geedkani Waxyaabaha kale ee loo isticmaalo waxaa ka mid ah iyada oo laga sameeyo daawooyin, isla markaana uu gabaad siiyo guryaha iyo beeraha. Boordigu wuxuu ka mid yahay geedaha kor u qaada nafaqada ciida.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Boordiga marka la rabo in beero, waa in marka hore iniinyaha laga soo ururiyaa geedaha waaweyn ee caafimaadka qaba, isla markaan leh dherer iyo dhumuc labadaba.
Halkii (1kg) oo iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku ku jiraan ilaa 34000-40000 xabbo. Geedkani iniinyahiisu waxay ku jiraan qwalfoof, haddaba si iniinyaha looga saaro qalfoofka ay ku jiraan waa in la dhigaa qorraxda, si ay u qalalaan, waana in lala dhacaa ulo.

Waxaa iniiyaha geedkan la keydin karaa muddo dhawr sanno ah haddi la dhex dhigo qol caad oo heerkulkiisu yahay joogto.

Geedkani intaan la abuurin iniiyahiisaa ka hor, waa in duubka saaran la jilciyo si uu dhakhso ugu baxo marka la abuuro. Si arrintan loo sameeyo waa in lagu ridaa iniiyaha biyo aad u kulul ama karkaraya, Waana in lagu dhex daayaa muddo ilaa 24 saac, si xuubka iniinyaha saaran u jilco.
Haddii ay dhacdo in iniinyuhu yihiin qaar dhawaan la guray uma baahna in la jilciyo duubka saran iniinyaha.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIR-KOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo badab ayaa geedkan loo kobcin karaa. Waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran:

a) Mararka qarkood iniiyaha geedka meeshii la rabay in geedku ka soo baxo ayaa si toos ah loogu abuuraa.

b) Waxaa kale oo la yeeli karaa, in geedku inta uu yaryahay la gooyo oo isgoo dhan lagu talaalo meeshii loogu talo galay.

c) Soomaaliya, habka ugu badan ee geedkani loo kobciyo waa iyada oo lagu abuuro iniinyaha bac, ka dibna lagu xanaaneeyo beerta dhirkobcinta ilaa muddo dhan 12-24 todobaad ah.

Iniinyu marka la beero todobaad ka dib ayey soo baxaan, boqolkii ilaa 90 ayaana soo baxa. Mudadda ay geeduhu yaryar yihiin waxa hoos ah uma baahna, hase ahaatee waa in laga jaraa dhirta kale ee dhibaatooyinka soo gaadhsiin kara markey kula tartamaan biyaha iyo macdanaha kale. Guud ahaan roobka Soomaaliya ka da'aa wuu yar yahay, sidaas daraadeed, geedka boordiga waxaa lagu beeri karaa kaliya agagaarka labada webi Jubba iyo Shabeelle.

Geedkani si dhakhso ah ayuu u baxaa, sobobtani ayaana keentey, in qaar ka mid ah beeraleyda ku dhaqan degmadda Afgooye iney ku tallaalay beerahooda, si ay u iibshaan qoriga geedkani. Daaqista xoolaha waa in laga ilaaliyaa geeduhu mudadda ay yaryar yihiin.

Magaca: Cadaad ( <u>Acacia senegal</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedakani magacyadda kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah, Cadaad cad, Cadaad Geri, iyo qaar kale.

Geedka cadaadu waxaa uu ka baxaa Soomaaliya oo dhan guud ahaan, hase ahaatee noocyada cadaada ka baxda Soomaaliya wey kala duduwantahay.

Geedkani waxaa uu si dabiici aha uga baxaa Waqooyiga Afrika, laga bilaabo Muritaaniya, Suudaan iyo Soomaaliya. Waxaa kale oo uu ka baxaa waddamda ku yaal Afrikada Bari sida Kiiniya, Ugaandha, Koonfurta Afrika, Bakistaan, Hindiya, iyo qaar kale.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Cadaadu waa geed gaaban, cimirigiisuna waa uu gaaban yahay, marka la barbar dhigo geedaha kale ee dalka ka baxa. Geedka cadaada dhererkiisu wuxuu lagu qiyaasaa ilaa 9 mitir, hase ahaatee dherekiisu waxaa uu inta badan u dhexeeyaa 2-6 mitir. Udub kaliya oo gaaban ayuu sida badan leeyahay. Laamo dhaadheer ayuu ka bixiyaa qaybaha geedka ee u dhaw dhulka. Dhumucda jirrida waxaa ay gaartaa ilaa 40cm. Geedkani jirridiisu waa madow marka geedku yaryahay, marka cimriga geedku weynaado waxay isku badashaa cawlaan iyo huruud isu dhafan.

Geedka cadaadu wuxuu leeyahay, laamo yaryar oo ka farcama laamaha waaweyn, kuwaas oo caleemuhuna ku yaalaan iyaga oo labolabo isaga soo hor jeeda.
Ubax midabkiisu yahay huruud iyo cadaan isu dhafan ayaa cadaadu leedahay.


Geedkani iniinyahiisu wey wareegsan yihiin, isla markaana fidsan yihiin. Xididadiisu aad ayey dhulka hoos ugu galaan. Qoriga cadaadu waa adag yahay, waana culus yahay.

# ÇADAD — ACACIA SENEGAL


Miraha (huruud)




Qaabka Geedka



Ubaxa (huruud - casaan)




Laamaha




Caleenta (cawlan - cagaar)



Iniinyo (mariin-doog)



**5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)**

Geedkani marka la doonayo in la beero, waa in Iniinyahiisa laga soo ururiyo geedaha leh dhererka iyo dhumucda leh, isla markaana qaabka ay u bexeen wanaagsan yahay.
Iniinyaha geedkani waxaa laga soo ururin karaa geedaha hoostooda.

Geedkani iniinyahiisa muddo dheer lama keydin karo.Wakhti aad u dheer lama keydin karo iniinyahay geedkan.
Si marka iniinyaha la beero si dhakhso ah ugu soo baxaan, waxaa haboon in dahaarka saaran la jilciyo, haddaba si loo jilciyo iniinyaha xuubka saaran waa in biyo diiran lagu ridaa loona daayaa muddo dhan labo maalmood.
Hadday iniinyuhu yihiin kuwo dhawaan la soo ururiyey, uma baahna in biyo lagu rido.

**5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIR-KOBCINTA UU KU JIRO.**

Geedakani cadaada Siyaabo badan ayaa loo kobcin karaa, waxaana ka mid kuwan hoos ku qoran.

a) Mararka qaarkood iniinyaha ayaa si toos ah loogu beeraa meeshii la rabay in lagu beero. Sida badan

b) Soomaaliya sida badan geedkani bac ayaa iniinyahiisa lagu beeraa, waxaana lagu kobciyaa beerta dhir-Kobcinta muddo gaadheysa 4-5 bilood ah.

Ciida lagu beerayo geedkani iniinyahiisa waa iney qoyanataa, tahayna mid fudud. Marka iniinyaha lagu beerayo bacda, baco ay kala duwan yihiin kala dhererkooda iyo dhumucdooduba ayaa la isticmalaa, siiba bacaha dhererkooda iyo dhumucdoodu tahay (30*10 cm) markey fidsan yihiin ayaa la isticmaalaa.

Geedakani Iniinyahiisa waa in aan god loogu qodin marka bacda lagu abuurayo oo qiyaastii hal (1cm) kaliya dherer le'eg la dhigaa. Bacdii walbana waa in ilaa 3 xabbo lagu rido, si haddii mid ama labo u soo bixi waayaan kan saddexaad u soo baxo. Waxaa lagu qiyaasaa in boqolkiiba 70-100 iniinyaha la beero soo baxaan. Waxaa lagu warejiyaa baco kale hadday dhacdo in dhawr geed ka soo baxaan waa in lagu wareejiyaa baco kale 4-6 todobaad markey jiraan. Cadaadu waxaa lagu beeri karaa bacaadka, uu cawsku celinaayo. ciida biyaha gudbisa ayaa in lagu talaalo haboontahay. Marka la tallaalayo geedaha waa in leysku jirsiiyaa afar talaabo, dhulka biyuhu fadhiistaan waa inaan lagu tallaalin geedkani. Cayayaanka Aboorku ka mid yahay ayaa la wariyey iney dhaawac u geystaan geedkani xididadiisa.

### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedka cadaadu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, ama dhulka roobka yari uu ka da'o.
Roobka uu u baahan yahay geedkani si uu baxo, waxaa lagu qiyaasaa 200- 500mm sannadkii.

Cadaadu dhulka kulul ayuu ka baxaa, heer kul gaadhaya ilaa 22-32c ayaa ah cimilada uu sida fiican uga baxo .

Geedkani banaannada iyo buurahaba wuu ka baxaa, gaar ahaan buuraha dhererkoodu gaadho ilaa 500 mitirba.

### 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Faa'idooyin badan ayuu geedkan leeyahay, kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwan soo socda.

**Xaabo:** Soomaaliya iyo waddamada kaleba dad badan oo ku dhaqan miyiga iyo magaalooyinkaba ayaa xaabo ka dhigta laamaha iyo qoriga geedkani cadaada.

**Dhuxul:** Geedkani iyo galoolka ayaa laga sameeyaa dhuxusha ugu badan ee Soomaaliya laga isticmaalo.

**Bacaad Celinta:** Dhawrkii Sanno ee u dembeeyey waxaa cadaada lagu tallaaley meelaha hawlaha bacaadku meelaha dhibaatada ka taagan tahay.

**Xabag:** Xabagta cadaada waa la cunaa,

**Hadhka:** Dadka iyo xooluhuba waxay ka dugsadaan hooska geedkan kulka qorraxda

Cadaada udubkiisa waxaa lagu dhistaa aqalada, isla markaana waxaa laga sameeyaa, daabka la galiyo alaabada ay ka midka yihiin gudunta, iyo qaar kale.
Caleenta geedkani waxaa daaqa xoolaha. Cadaada caleentu markey ka daa'dato waxay kor u qaadaa nafaqada ciida.
Daawooyin kala duwan ayaa laga sameeyaa geedkani, kuwaas oo lagu daaweeyo cudurada qaarkood.

Magaca: Caday ( <u>Salvadora persica</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani magacyada kale ee loo yaqaan waxaa ka mid ah Rumay. Geedka cadaygu wuxuu ka baxaa Guud ahaan Soomaaliya oo dhan, inkast oo uu ku badan yahay meelo qaarkood sida nawaaxiga labada webi ee Shabeelle iyo Jubba.


Waddamada uu geedkani sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid Masar, Liibiya, Aljeeriya, Senegaal, Maali, Niijeriya, Kameruun, Jaad, Suudaan, Itoobiya, Ugaandha, Tansaaniya, iyo Hindiya.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedka cadaygu waa geed gaaban, caleemihiisuna waa cagaar sannadkii oo dhan. Geedkani dhererkiisu ilaa 6 mitir ayuu gaadhaa, waxaa muuqaal ahaan ay isku eg yihiin geedka Garaska maraka uu yar yahay.
Caleemaha geedkani dhererkoodu ilaa 10 cm ayuu gaadhaa, ubax midabkiisu yahay cagaar iyo cadaan isku dhafan ayuu bixiyaa geedkani cadaygu, sida badana waxaa ayka baxaan meelaha ay laamuhu ka dhamaadeen. Geedakani qolofta saaran jirridiisu wey siman tahay.

Geedakani udubkiisu ama qorigiisu waa jilicsan yahay, mar walbana waa uu qoyan yahay.

## CADAY — SALVADORA PERSICA



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Cadaygu wuxuu ka mid yahay geedaha leh caleemaha dooga ah sannadkii dhan, waxaana uu sida badan ka baxaa meelaha biyaha badan laheyn, ama roobku ku yar yahay.
Roobka uu u baahan yahay geedkani si uu u baxo, waxaa lagu qiyaasaa 50-600 mm sannadkii.

Cadaygu miro cascas ayuu leeyahay. Ubax midabkiisu isugu dhafan yahay Cadann iyo cagaar ayuu bixiyaa.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Geedka cadaygu faa'idooyin badan ayuu u leeyahay dadka iyo xayawaankaba, waxaana ka mid ah, kuwan hoos ku qoran:

Cadayga : Geedkani waxaa uu leeyahay, laamo dhaadheer oo dhuudhuuban, aadna ugu haboon nadiifinta ilkaha, kuwaas oo dadka Soomaaliyeed isticmaalaan.

Daaqa : Geella ayaa ka mid ah xayawaanka quuta caleenta geedkani, gaar ahaan xilliyada roob la'aantu jirto, ama abaaruhu dhacaan.

Cunto : Dadka qaarkood ayaa la wariyey iney cunaan miraha geedkani markey dubaan, gaar ahaan xilliyadda cunto yaridu jirto ama abaaruhu dhacaan.

Xididada geedkani waxaa dadka qaarkood ka sameeyaan daawooyin lagu bogsiiyo cudurada ku dhaca xubnaha jidhka bini'aadamka qaarkood.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Hababka ugu haboon ee iniiyaha geedkani loo soo ururiyo, xilliyada ugu haboon in la soo guro, iyo mudadda la keydin karo, waxay ka mid yihiin wararka buuggani lagu darayo mustaqbalka dhaw.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIR-KOBCINTA UU KU JIRO:

Geedka cadaygu waxaa uu ka mid yahay geedaha iskood u baxa marka ay helaan cimilo ku haboon, geedaha Soomaaliya ka baxana waa qaar si dabiici ah u soo baxay.

Magaca: Cambe (Mangifera indica)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedakani magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Maango. Cambuhu waxaa uu ka mid yahay geedaha khudaarta la cunno leh, dadkuna aad ayey u jecel yihiin mirahiisa macaan. Geedakani waxaa uu ka mid yahay geedaha waddanka dibeda ka soo galay, kuwa ugu caansan.

Geedaka cambaha Waxaa Soomaaliya aad loogu beerey agagaarka labada webi Shabeelle iyo Jubba.

Waddamada uu sida dabiiciga ah uga baxo cambuhu waxaa ka mid ah, Burma, Hindiya, Malaysiya. Waxaa la wariyey in geedkani la soo galiyey qaarada Afrika nuddo haatan laga joogo 1000 sanno.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Cambuhu waa geed aad u weyn lehna caleemo qoyan xilli kasta gu iyo Jiilaalba. Geedkani Dhererkiisu waxaa lagu qiyaasaa ilaa 5-25 mitir, hase ahaatee waddamada kulul ee roobku ku yaryahay sida waqooyiga Afrika oo kale dhererka geedkani ma dhaafo 10 mitir.
Dhumucda geedkani udubkiisu ilaa 1 mitir ayey gaadhaa, qolofta saaran jirriuda geedkuna midabkeedu waa madow iyo mariin isu dhafan.

Cambahu laamo waaweyn oo hareeraha u fida ayuu leeyahay. Geedkani miraha uu bixiyo wey kala duduwan yihiin, marka loo eego dhererkooda iyo balacooda, oo miraha qaarkood ayaa aad u waaweyn.


Astaamaha geedkani waxaa ka mid ah, Xididadiisa oo aad u adadag, aad ayeyna dhulka hoos ugu galaan.
Marka loo isticmaalo dhismo, qoriga geedka Cambuhu waxaa uu jiraa muddo dheer, wuuna jilicsan yahay. Midab huruud ahna wuu leeyahay.

CAMBE — MANGIFERA INDICA


Miraha (doog-huruud)




Qaabka Geedka





Ubaxa (cadaan-casaan)



Laamaha



Caleenta (doog-casaan)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Cambahu waxaa uu ka mid yahay geedaha u adkeysata abaaraha, waxaan uu si fiican uga baxaa dhulalka biyaha leh, ama roobka badani ka da'o. Waxaa lagu qiyaasaa roobka uu u baahan yahay geedkani si uu u baxo ilaa 700 mm sannadkii.

Heer kulka gaadhaya ilaa 18-27c ayuu geedka cambahu si fiican uga baxaa.jecel yahay in uu jiro xilli dhulku qalalan yahay si uu u baxo.

Soomaaliya, waxaa uu geedkani si gaar ah uga baxaa nawaaxiga labada webi Shabeelle iyo Jubba, dhulkaas oo aan aad u sareyn. dhulalka sareeya ee dhererkoodu gaadho ilaa 1300 mitir cambahu waa uu ka bixi karaa.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Faa'idooyin fara badan ayuu geedkani leeyahay, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Cambaha laamihiisa waxay dadku ka dhigtaan xaabo ay shitaan marka ay ku kalifto ee aaney haysan xaabo kale oo u dhaanta.

**Dhuxul:** Waddamada qaarkood ayaa qoriga geedkani ka sameeeya dhuxul ay shitaan.

**Dhiso:** Cambuhu wuxuu leeyahay qori lagu dhisan karo guryaha, gaar ahaan, dhismayaasha aan sidaas u sii weyneyn.

Soomaaliya faa'idadda ugu weyn ee geedkani waa mirahiisa oola cunno, mirahiisa waxaa ku jira nafaqadda jidhka bini'aadamku u baahan yahay, gaar ahaan fiitamiin A iyo B.

Geedka cambahu waxaa uu leeyahay hoos aad u weyn oo dadka iyo xayawaankuba kaga gabadaan kulka qorraxda, gaar ahaan xilliga qoraadka u kulushahay. Waxaa kale oo la sheegey in caleenta geedkan la cunno. Dhamaan tuulooyinkii iyo degmooyinkii lagu tallaalay geedkan bilicdooda kor ayuu u qaaday. Geedakani daawooyin ayey dadka qaarkood ka sameeyaan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Marka la doonayo in la beero geedkani, waa in iniinyahiisa laga soo guraa geedaha waaweyn ee leh miro badan. Halkii (1kg) ee iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan 55 xabbo.

Marka miraha la cuno, waa in la ururiyaa iniinyaha.
Muddo aad u dheer lama keydin karo iniinyaha geedka Cambaha, ilaa bil ayaa la keydin karaa, hase yeeshee muddo 3 bilood gaadheysa ah ayaa suurogal ah in la keydiyo iniinyaha.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geedka Cambaha siyaabo badan ayaa loo kobcin karaa badan, waxaana ka mid ah :

a) mararka qaarkood waxaa leysku kabaa ay ka soo baxaan waxaa leysku kabaa labo geed, iyaddo ujeedadu tahay in geedka ka soo baxayaa uu noqdo mid soo saara miro waaweyn oo waxtar u yeesha dadka.

b) Sida badan geedkani iniinyahiisa waxaa lagu beeraa bacdaas oo aad uga weyn bacaha kale ee loo isticmaalo geedaha kale beeritaankooda, qiyaastii dherer ah 2cm gaadhaya ayaa iniinyaha lagu ridaa mar kala abuurayo.

Saddex todobaad gudahood ayaa iniinyuhu ku soo baxaan. Muddo dhan 6-9 bilood ka dib ayaa geedaha lagu tallaalaa meeshii loogu talo galay inuu geedku ka baxo.
Dhererka geeduhu waxaa ay gaadhaan 15cm marka 6-8 todobaad jiraan.

Geedka Cambahu waxaa haboon in lagu beero Ciid gudbin karta biyaha, isla markaan nafaqadu ku badan tahay.
Madaama uu Cambahu yahay geed aad u weyn waa in la kala fogeeyaa amrka la beerayo, sida badan labo qiyaastii 12 talaabo aya leysku jirsiiyaa.mitir ayaa haboon in leysu jirsiiyo.

Hadday dhacdo in nafaqadda ciida geedka lagu beerayaa yar tahay waa in lagu daraa nafaqo ciida, si geeduhu hore ugu baxaan.

Cannuuni Yare ( Annona squamosa )

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**


Geedka canuunigu waxaa aad loogu beerey hareeraha labada webi Jubba iyo Shabeele. Geedakani miro aad u macaan dadkuna jecel yihiin ayuu leeyahay , isla markaa waxaa uu beeraleydda soo geliyaa dakhli marka ay iibiyaan miraha geedkani.

Geedka canuuni yare waxaa uu uga baxaa si dabiici ah qaaradda Laatiin Ameerika, iyo Jasiiradaha West Indiis.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedkani waa uu yar, qoddaxna ma laha. Geedkani Caleemaha ka daa'ta mirahana ma bixiyo geedkani, haddii biyuhu ku yaraadan. Geedkani Dhererka waxaa uu gaadhaa ilaa 7 mitir, dhumucda jirriduusuna ilaa 20 cm. Ubaxa geedkani bixiyo waxaa uu si raacsan yahay afar-afar ama kali ayuu ubaxa geedkani u baxaa.

CANNUNI (YARE) ANNONA SQUAMOS



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Geedkani waxaa u si wacan uga bixi karaa, webiyadda agagaarkooda, gaar ahaan meelaha la waraabin karo xilliga roob la'aanta. Geedkani roobka uu u baahana yahay si uu u baxo waxaa lagu qiyaasaa Ilaa 1000 mm sannadkii.

Dhulka kulul ee ilaa 18c- 23c, ayuu geedka Canuuni Yare si haboon ugu bixi karaa.

Dhulalka sare ee gaadhaya inta u dhexeysa 500 mitir ilaa 1200 mitir ayuu geedkani aad uga baxaa..

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Geedkani waxyaabaha ugu weyn ee loo isticmaalo waa isaga oo ay dadku ka helaan miro macaan nafaqo badan leh, kuwaas oo ay dadku aad u jecelyihiin.
Geedka canuuniga Yare sida dhir badan oo dalka ugu baxda si dabiicigga ah ama la soo galiyey ayaa daawooyin laga sameyaa, dawooyinkaas oo loo isticmaalo in lagu daaweeyo, qaar ka mid ah cuduradda ku dhaca dadka.
Waxaa kale oo geedkani dadka qaarkood ka sameeyaan waxyaabo la gula dagaalamo xasharaadka, kuwaas oo dhibaato lixaad leh u geysta dhamaan dalagyadda beeraha.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniiyaha geedkan ee la rabo in dib loo beero, waxaa haboon in laga soo ururiyo geedaha leh miraha bislaadey, isla markaana caafimaadka qaba. Geedakani iniinyahiisu waxay ku dhex jiraan miraha la cunno, haddaba si iniinyaha looga saaro miraha waa in lagu ridaa biyo.
Marka la beerayo iniiyaha, looma baahna in diirka saaran iniinyaha la jilciyo sida geedaha kale qaarkood.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Wararka ku saabsan siyaabaha geedkani iniinyahiisa loo beero, isla markaana loo xanaanneeyo wey yar yihiin.

a) Waxaa iniinyaha geedkani ku soo baxaan marka la beero muddo gaadheysa 2-4 todobaad ah.
Isugeyn ilaa 12 bilood ayaa lagu geedkani u baahan yahay in lagu xanaanneyo beerta dhirkobcinta.

Geedka canuuni yare waxaa lagu tallaalaa dhulalka leh ciida furfuran ee biyahana sida fudud u gudbisa. Marka la beerayo waxaa haboon in geedkani leysku jirsiiyo qiyaastii shan talaabo, waxaana beeraleyda qaarkood ku dhafaan geedkani geed miroodyada kale sida Cambaha.

Geedkani si u qaan gaadho miro tiro iyo tayo lehna u soo saaro waa in laga gooyaa dhirta kale ee u geysan kara dhibaatada, siiba marka ay biyaha iyo nafaqadda kale ee ciida ku jiraa yar tahay. Geedkani waxaa uu ku soo saaraa miraha 3 bilood marka uu geedku jiro.

Magaca: Canuuni weyn (*Annona muricata*)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedakani waxaa uu ka mid yahay geedaha waddanka dibeda ka soo galay, beeraha ku dhaw agagaarka degmadda Afgooye, ayaa aad ugu tallaaley geedkani.


Geedakani waxaa uu si dabiici ah uga baxaa jasiiradaha ku yaal Badweynta Atlaantiga ee loo yaqaan Kareebiyanka.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA**

Canuuniggu waa geed yar oo leh miro la cunno, dhererkiisu waxaa uu gaadhaa ilaa 8-10 mitir. Geedkani wuxuu leeyahay Laamo dhulka u dhaw. Caleentiisa iyo ubaxiisuba waxay leeyihiin ur aan sidaas u sii fiicneyn.


# CANNUNI (WEYN) ANNONA MURICA

Miraha (doog-cadaan)



Qaabka Geedka

Ubaxa



Caleenta



Iniinyo





Laamaha

**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Geedka canuuni weyn waxaa uu ka baxaa cimilada kulul. Roobka uu baahan yahay geedkani waxaa lagu qiyaasaa inuu gaadho ilaa 1000 mm sannadkii.

Canuuniggu waa geed ka bixi kara buuraha iyo banaanada. Waxaa uu si gaar ah uga bixi karaa dhulalka sareeya ee dhererkeedu gaadho ilaa 1000 mitir.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Inkasta oo waxyaabo kale oo badan loo isticmaalo, Faa'idada ugu weyn ee geedkani waa iyadda oo dadku ka helaan miro ay cunaan.

Iniinyaha geedkani lama cuni karo sida geed miroodka kale, waayo waa sun waana in si taxadir ah looga saaro qalfoofka saaran.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDAdDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabaha kale duwan ee iniinyaha geedkani loo soo ururin karo, mudadda la keydin karo, iyo wararka ku saabsan hababka kale duwan ee geedkani loo kobcin karo aad ayey u yar yihiin, sidaas daraadeed, marka ay suuragal noqoto waxaanu jecelnahay inaan buuggani ku darro.

Magaca: Danno (<u>Euphorbia tirucalli</u>):

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka dannadu waxaa uu ka mid yahay geedaha waddanka dibeda ka soo galay, waxaan Soomaaliya uu baxaa dhul aad u balaaran. Geedakani waxaa aad loogu tallaaley meelaha hawlaha bacaad celintu ka socoto, gaar ahaan nawaaxiga degmada Shallambood ayaa ka mid ah meelaha aadka loogu talaaley sannadihii ugu dembeeyey.

Geedkani iniinyahiisii ugu horeeyey lama hubo meeshii ay ka yimaadeen, hase ahaatee waxaa la wariyey iney ka yimaadeen waddanka Hindiya ama Dannadu waxay asalkeedii hore dalka ka soo gashey, waddanka Talyaaniga ama Hindiya. Mudadda uu uu Soomaaliya so galay, waxaa kale oo uu soo galey Itoobiya, iyo Suudaan.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA**

Dannadu waa geed aan weyneyn, lehna jirrid cagaar ah . aadna u jilicsan. Laamo midabkoodu isugu dhafan yahay huruud iyo cagaar ayuu geedkani leeyahay.
Geedkani caleen ma laha sannadka intiisa badan. Ubaxa yar oo isku yara urursan ayuu leeyahay.

EURPHORBIA TIRUCALLI

DANNO

| | |
|---|---|
| Miraha | Qaabka Geedka |
| Ubaxa | Laamaha |
| Caleenta | |
| Iniinyo | |

## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Dannadu waa geed abaareed u adkeysata, sida badan waxaa uu ka baxaa Dhulka leh ciida ah bataaxa ama bacaadka. Hase ahaate, waxaa kale oo la sheegey in dhulka ciidiisu dhoobeyda tahayna uu ka baxo geedkani.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA

Soomaaliya isticmaalka ugu weyn ee geedkani, waa hakinta bacaadka. Waxaa 10-15kii sanno ee u dembeeyey aad loogu tallaaley dhulka hawlaha bacaad celintu ka socoto, gaar ahaan agagaarka Shallambood.

Waxaa kale oo geedkani loo isticmaalaa in leysaga celiyo dabeylaha oo dhibaato u geysan kara degaanka ay dadku ku nool yihiin.

Waddamada qaarkood ayaa dadka ku dhaqani qoriga geedkani u isticmaalan dhismaha.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Habka ugu wanaagsan ee geedkani iniinyahiisa loo ururiyo, mudadda la keydin karo iniiyaha, iyo wararka kale ee ku saabsan geedkani iniiyahiisa waxaa lagu qorayaa buuggani marka ay suuragal noqoto ee la soo ururiyo wararkaas aanu soo sheegney.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabaha kale duwan ee geedkani loo kobcin karo waxaa ka mid kuwan hoos ku qoran.

a) Geedkani iniinyahiisa si toos ah ayaa loogu beeri dhulka, natiijo wanaasan in laga helo ayaa la wariyey.

b) Habka ugu fudud, uguna raqiisan, waa marka qeyb ka mid ah geedkani la gooyo, ka dibna lagu tallaalo meeshii la rabay.

Si dhakhso ah ayaa geedku markiiba u soo baxaa haddii la raaco habkan dembe.

Magaca: Dayib (<u>Juniperus excelsa</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka dayibku waxaa uu ka mid yahay geedaha waddanka ka baxa kuwa ugu faa'idada badan. Geedkani wuxuu caan ku yahay oo ka baxaa goboladda waqooyi ee Soomaaliya, gaar ahaan buuraleyda Golis meelo ka mid ah, sida Gacan Libaax.

Geedkani waxaa uu si dabiici uga baxaa waddamada ayka midka yihiin Suudaan, Soomaaliya, Itoobiya, iyo Kiiniya.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA**

Geedkani calaamadaha lagu aqoonsan karo waxaa ka mid, wuxuu leeyahay caleemo doog ah sannadkii oo dhan, Dhererkiisuna wuxuu gaadhaa ilaa 40 mitir, inkasta oo u sida badan intaas ka gaaban yahay. Dayibku waxaa uu leeyahay udub dheer isla markaana yahay, toosan yahayn. Qolofta saaran jirrida geedkani waa mid aad aan u dhumuc weyneyn.


Qoriga Dayibka si fudud ayaa loo kala jabin karaa, hase yeeshee cayayaanka alwaaxda dhaawacyada u geysta si fudud uguma geysan karaan.

DAYIB — JUNIPERUS EXCELS

Miraha (buluug-cawlaan-mariin)



Qaabka Geedka




Ubaxa (kuruud) (mariin-casaan)


Laamaha



Caleenta (cagaar)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedka dhamasku waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, adkeysigana u leh abaaraha.
Dhulka sareeya ayuu dayibku si wacan uga baxaa, isla markaana leh cimilo qalalan oo badda hawada ka imaneysa ee wadata biyihu u dhawdahay, waxaana uu si gaar ah uga baxaa dhulka ilaa 1800-2900 mitir dhererkiisu gaadho.
Roobka uu u baahan yahay geedkan waxaa lagu qiyasey 500 mm sannadkii dhulka.

## 3. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedka dayibku wuxuu ka mid yahay geedaha waxtarka weyn leh, waxyaabaha looga isticmaalo dalka gudihiis iyo dibadiisaba , waxaa ka mid ah.
**Xaabada:**Laamaha Dayibka waxaa laga dhigtaa xaabo la shito.

**Dhismo:** Qoriga geedkan aad ayaa dadku u isticmaalaan, waxaana qaar ku dhistaan aqaladooda tiirarka ya ka helaan geedkan.Intaan la xidhin warshadii Ceerigaabo ee alwaaxda guryaha lagu dhiso diyaarin jirtey, Dayibku wuxuu ahaa geedk ugu badan ey isticmaali jirtey, isaga oo laga soo ururin jirey Agaggaark Daalo. Waxaa lagu qiyaasey in ilaa 10,000 m ay oo u badan geedkan qori ka yimid iney isticmaali jirtey sannadkii.

Geedkan waxaa kale oo uu leeyahay hoos ay xoolaha iyo dadkuba dhaxanta iyo kulka qorraxada ka galaan. Waxaa kale oo u nafaqeeyaa ciida, gaar ahaan marka caleentiisu dhulka ku daa'dato.

**5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):**

GeedKa dhamasku sida ugu fudud ee iniinyahiisa loo ururin karaa waa iyadda oo geedaha waaweyn ee magaalooyinka ku yaal qaarkood la calaamadeeyo oo sannad walba iniinyaha laga guro. Geedaha iniinyaha laga gurayaa waa iney dherer iyo dhumucba yeeshaan. Waxaa haboon in geedaha iniinyaha laga soo ururiyo bilaha Janaayo iyo Febraayo.

Waxaa lagu qiyaasaa in halkii (1kg) ee iniinyaha geedkani ay ku jiraan ilaa 1-2 milyan oo xabadood. Sida geedaha kale qaarkood, iniinyaha dhamaska waxaa ku dahaaran qalfoof, haddaba si iniinyaha qolofta looga saaro waa in labada gacmood lagu xoqaa.

**5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKCOBCINTA UU KU JIRO.**

Siyaabo badan ayaa geedkani loo kobcin karaa, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran:

a) Geedkani intuu yar yahay haddii la gooyo waxaa suuragal ah in dib loogu tallaalo meel kale.

b) Soomaaliya waxaa suurgal ah, in iniinyaha lagu beero bac, bacda lagu abuurayo ciida ku jirta waa in lagu qasaa saalo, si nafaqadda ciida kor loogu qaado. Muddo 12-18 bilood ah, waa in geedaha lagu xanaanneyaa beerta dhirkobcinta. Marka la beero iniinyaha geedkani, waxay ku soo baxaan 3-4 todobaad ka dib. Boqolkiiba 25 ayaa iniiyaha la beero soo baxa.

Geedkani marka la beerayo, waa in lagu beeraa dhulka leh ciida qalalan, isla markana waa in loo qodaa god weyn, waxaana haboon in leysku jirsiiyo shan talaabo marka geedaha la beerayo.

Geedkani waraabin joogto ah ayuu u baahan yahay, inta xididadiisu biyaha dhulka ku jira gaadhayaan. Maalintii labo jeer in la waraabiyo geedahu maraka ay yar yihiin ayaa haboon.
Ugu dembeyntii waa in daaqista xoolaha laga ilaaliyaa geedkani inta uu yar yahay.

Magaca: Dhamas (<u>Conocarpus lancifolius</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka dhamaska magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Hodati.

Dhamasku waxaa uu ka baxaa buuraleyda dherersan waqooyiga Soomaaliya, hase ahaatee 30-40kii sanno dambeeyey waxaa lagu beerey jidadka magaalooyinka sida Muqdisho Beledweyne, Hargeysa,iyo magaalooyin kale.

Waddamada uu geedkani kale sida dabiiciga uga baxo Waxaa ka mid ah Yemen, Soomaaliya. Hase ahaatee waddamo badan ayaa lagu tallaaley inkasta oo aanu ku aheyn dabiici, waxaa ka mid ah Jabuuti, Suudan, Suuriya, Kiiniya, iyo Bakistaan.

2. ASTAAMAHA GEEDKA:

Dhamasku waa geed aad u weyn, caleemo doog ahna, xilli kasta gu iyi jiilaalba. Geedka dhamasku Dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 30 mitir, dhumucda jirridiisuna waxay mararka qaarkood gaadhaa ilaa 50 cm.

Dhamaska Jirridiisa qolofta saaran midabkeedu waa cawlaan, Laamo aad u dhaadheerna ayuu geedkan, sida badana wey toos-toosan yihiin.


Geedkani ubaxiisu waa uu wareegsan yahay iskuna cufan yahay. Dhamaska ubax urtiisu udgoon tahay ayuu leeyahay, bisha Ogoosto ayuu ubaxa bixiyaa.

Qoriga dhamasku waa culus yahay, inkasta oo mararka qaarkood uu fudud yahay. Geedkani qorigiisu muddo dheer ayuu jiraa marka meel lagu isticmaalo.


# DHAMAS

# CONOCARPUS LANCIFOLIUS


**Miraha**



**Qaabka Geedka**





**Ubaxa (doog-huruud)**



**Laamaha**



**Caleenta**



**Iniinyo**



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Dhamasku waa geed ka baxa kara dhulka biyaha yar leh, isla markaana abaarahu ka dhacaan. Waxaa lagu qiyaasaa roobka uu geedkani u baahan yahay si uu u baxo ilaa 250- 600 mm sannadkii.

Dhulka cimiladdisu kulushahay ayaa geedkani ka baxaa, gaar ahaan heer kul gaadhaya ilaa 24-30C ayaa uu u si fiican uga baxaa.

Buuraha ayuu geedkani si fiican uga baxaa, waxaana haboon marka meel lagu tallaalayo in la eegto dhulalka biyo ku jiraan

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA

Geedka dhamaska waxyaabaha faraha badan ee loo isticmaalo waxaana ka mid kuwan hoos ku qoran:

**Xaabo:** Dad badan ayaa xaabaday shitaan ka hela Dhamaska.

**Dhuxul:** **Geedka dhamaska dadka qaarkood ayaa qorigiisa dhuxul ka sameeya,** laakiin Soomaaliya geedkani qorigiisa dhuxul lagama sameeyo.

**Dhiso:** Dhamasku wuxuu ka mid yahay geedaha ugu badan ee tiirarkooda loo isticmaalo dhismayaasha waddanka gudihiisa.

**Hadhka:** Faa'idooyinka ugu weyn ee geedkani waa hooskiisa oo dadka xoolo raacatada iyo dadka ku dhaqan magaalooyinkuba kaga gabadaan kulka qorraxda.

Geedka dhamasku Waxaa kor u qaadaa bilicda degaanka guud ahaan, gaar ahaaana bilicda magaalooyinka, iyo tuulooyinkaba.

Dad badan ayaa Dhamaska ku beerey agagaarka guryahooda si uu uga celiyo dabaylaha iyo dhaxanta. Dhamasku wuxu ka mid yahay geedaha nafaqeeya ciida, gaar ahaan markey caleentiisu dhulka ku dhacaan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Geedka dhamaska, sida ugu fudud ee iniinyahaiisa loo ururin karo waaa iyada oo geedaha waaweyn ee magaaloyinka ku yaal qaarkood la calaamadeeyo oo sannad walba iniinyaha laga ururiyo. Geedaha iniinyaha laga soo gurayaa waa iney ahaadaan qaar dherer iyo dhumucba leh.
Waxaa iniinyahu diyaar noqdaan, oo in la ururiyo haboontahay bisha Janaayo-Febraayo.

Waxaa lagu qiyaasaa in halkii (1kg) iniinyaha dhamaska ku jiraan 1-2 milyan oo xabbo. Iniinyaha geedka waxaa dahaaran qolof, si haddaba iniinyaha qolofta looga saaro waa in labada gacmood dhexdooda lagu xoqaa.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geedka dhamaska siyaabo badan ayaa loo kobcin kara, waxaana ka mid ah.

a) Geedkani inta uu yaryahay haddii la gooyo waxaa lagu tallaali karaa meel kale.

b) Waxaa kale oo suurogal ah, in qeyb ka mid ah inta la gooyo lagu tallaalo meeshii loogu talo galay.

c) Sida qaalibka ah, Soomaaliya geedka dhamaska waxaa lagu beeraa bac Waxaa lagu kobciyaa beerta dhirkobcinta mudo 12-18 bilood. Bacda lagu abuurayo iniinyaha waa in marka hora ee ciida lagu gurayo lagu qasaa saalo.

Waxaa iniinyuhu ku soo baxaan 18-25 maalmood, boqolkiibana 25 ayaa geedaha la beero soo baxa.
Dhamaska waa in tallaalaa dhulka leh ciid qalalan. Geedkani marka la tallaalayo waa in god weyn loo qodaa oo ilaa 1 mitir dhererkiisu gaadhayo, geedaha marka la tallaalayo waa in la kala fogeeyaa oo leysku jirsiiyaa ilaa 5 talaabo.

Waraabin joogto ah ayuu Dhamasku u baahanyahay inta xididadiisu biyahay dhulka ku jira gaadhayaan. Labo jeer ayaa in waraabiyo haboon tahay marka ay geedahu yaryar yihiin.
Daaqista Xoolaha waa in laga laga ilaaliyaa, marka uu geedku yaryahay.

Magaca: Malmal (Commiphora myrrh)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani magacyada kala ee looga yaqaan, waxaana ka mid ah Xagar, Dhiddin, iyo qaar kale.

Malmalku waxaa uu ka baxaa waqooyiga, koonfurta iyo gobolada dhexe ee Soomaaliya.

Malmalku waxaa oo uu si dabici ah uga baxaa Jabuuti, Sacuudi Carabiya, Yemen, Itoobiya, iyo Soomaaliya.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Geedka malmalku waa geed yar, oo qoddax badan leh. Dhererka geedkani waxaa uu gaadhaa ilaa 4 mitir. Malmalku waxaa uu ka mid yahay geedaha ay caleemuhu ka daataan xilliga roob la'aantu jirto, ama uu roobku yar yahay.

Midabka jirrida geedkani waa cadaan u sii dhawaanaya Buluug iyo cawlaan. Laamihiisa waxay ka sameysan yihiin qori adag. Caleemaha geedkani waa cawlaan uu ku dhafan yahay cagaar. Xilliga Gu'ga ee roobku jiro caleemo badan ayuu geedkani leeyahay.


Geedkani mirahiisu wey yaryar yihiin. Waxaa miruhu sii daayaan iniinyaha markey bislaadaan. Iniinyaha geedkani midabkoodu waa gaduud ama jaale/mariin.

# DHIDDIN — COMMIPHORA MYRRH


Miraha (cagaar)




Qaabka Geedka



Ubaxa (dhawr middab)



Laamaha



Caleenta (cawlaan-doog)



Iniinyo (orange/ mariin)



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Mal-malku waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, waxaana la wariyey inuu u adkeysto abaaraha. Muddo ku dhaw ilaa labo sanno ayaa uu geedkani biyo la'aanta u adkeysan karaa. Roobka uu geedkani ka bixi karo waxaa lagu qiyaasaa ilaa 50 mm sannadkii.

Geedka mal-malku waxaa uu si fiican uga baxaa ciida qalalan ee goboladda dhexe ee Soomaaliya.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Dadka badan oo Soomaaliyeed ayaa ku tiirsan dakhliga ka soo gala iibinta mal-malka, dadkaas oo lagu qiyaaso ilaa 10 kun.

Xabagta geedkani oo la shito, dibeda ayey dadka ka ganacsada qaarkood u dhoofiyaan. Xilliga roob la'aantu jirto mal-malka laga soo ururiyaa geedaha. Guud ahaan, lacag adag ayaa waddanka ka soo gasha dhoofinta mal-malka.

Geedkarisku ama dadka daawooyinka ka sameeya dhirtu waxay geedka mal-malka ka sameeyaan daawooyin ay ku bogsiiyan cudurada ku dhaca dadka. Dugsiyada Quraanka ayaa dheecanka ka yimaad mal-malka ku dhigta quraanka, madaama ay si fudud u dhaqmin.

Xoolaha, gaar ahaan geela ayaa daaqa caleenta geedkani. qoriga malmalka dadka qaarkood ayaa isticmaala.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Habka ugu wanaagsan ee geedkani iniinyahiisa loo ururin karo, mudadda la keydin karo, iyo wixii warar ah ee ku saabsan iniinyaha geedkani waxaa lagu qorayaa buuggani marka ugu horeysa ee ay suuragal noqoto.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Habka kaliya ee geedkan loo tallaalo, waxay tahay iyada oo qeyb ka mid ah geedkan inta la gooyo ka dibna dib loogu tallaalo dhulkii la doonayey inuu ka baxo geedkani.

Magaca: Dhuur( <u>Tamarix aphylla</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka dhuurka magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid Gol. Dhuurku wuxuu ka baxaa meelo badan oo dalka ka tirsan, wuxuuna ku badan yahay Koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan nawaaxiga degmada Afgooye,iyo Jannaale beeraha u dhaw oo lagu tallaaley 40-50kii sanno ee u dembeeyey. Waxaa kale oo uu ka baxaa goboladda Jubbada Dhexe, iyo Jubbada Hoose.

Dhuurku wuxuu si dabiici ah uga baxaa waddamada ay ku jiraan Afgaanistaan, Aljeeriya, Baxreyn, Jaad, Joordan, Kiiniya, Kuweyt, Liibiya, Marooko, Muritaaniya, Yemen, Cumaan, Bakistaan, Sacudi Caraabiya, Tansaaniya, Tuuniisiya, iyo meelo kale.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Dhuurku waa geed si dhakhso ah u baxa marka la beero. Waxaana uu leeyahay caleemo cagaar ah xilli kasta. Geedkani dhererkiisu waxaa uu gaadhaa ilaa 20 mitir, dhumucda jirridiisuna ilaa 1 mitir.

Midabyo isugu dhafan casaan, mariin, cawlaan, ayey jirrida geedkani leedahay. Caleemaha geedkani waxay u eg yihiin irbada oo kale.

Dhuurku ubax in la arkaa aad u adag tahay ayuu leeyahay, midab ah cagaar, marka dembena isu badala mariin ayuu leeyahay.

DHUUR TAMARIX APHYLLA

Miraha



Qaabka Geedka


Ubaxa (cagaar)



Laamaha



Caleenta (cawlaan-cagaar)



Iniinyo

**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Dhuurku waxa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biayaha yar leh, isla markaana u adkeysta abaaraha.
Geedkani waxaa uu ka bixi karaa dhulka hela roob gaadhaya ilaa 100 mm sannadkii.

Geedkani dhulka nafaqaddu aadka ugu yar tahayna waa uu ka bixi karaa. Dhuurku waxaa uu si haboon uga baxaa ciida furfuran e biyuhuna sida fudud uga gudbi karaan.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Dhuurka waxyaabo badan ayaa loo isticmaalaa, waxaana ka mid ah, kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo: Geedkani** dadka qaarkood ayaa ka hela xaabada ay shitaan.

**Dhuxul:** Inkasta oo aaney Soomaaliya ku aheyn caadi, waddamada qaarkood ayaa qoriga geedkan dhuxul ka sameysta.

**Dhismo:** Dhuurka qorigiisa waxaa dadku ka sameystaan daababka, la galiyo alaabada ay ka mid ak ayihiin dubaha, waxaa kale oo lagu dhistaa aqalada.

**Hadhka:** Dadka iyo xooluhuba waxay dhuurka ka dugsadaan qorraxda kulkeeda, isla markaana wuxuu qurxiyaa degaanka guud ahaan.

Dhuurku waxaa uu ka mid yahay geedaha Soomaaliya ka baxa kuwa ugu wanaasan ee lagaga hor tago bacaadka, waxaa 10-20kii sanno ee u dembeeyey aad loogu beerey agagaarka degmooyinka Shallambood, Marka, Baraawe, iyo qaar kale si uu u hakiyo bacaadka. Waxaa kale oo dadka qaarkood ka sameeyan daawooyin laga hor tago cudurda qaarkood.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Wärarka ku saabsan geedkani iniinyahiisa, mudadda la keydin karo, iyo wakhtiga ugu haboon in iniinyahiisa la soo ururiyo waxaan lagu darayaa buuggani marka ay suuragal noqoto.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Dhuurku waxaa uu ka mid yahay geedaha iskood u baxa , marka ay helaan cimilo ku haboon. Waxaase mudan in la xasuusnaado in geedkani ka bixi karo dhulalka leh cimilada qalafsan, ee dhirta kale ku adag iney ka baxaan. Habka ugu fudud ee geedkani loo badin karo waa iyadda oo geedaha baxaya laga jarro laamo, kuwaas oo marka dembe loo isticmaali karo dhireynta.

Magaca: Fulaay ( _Acacia seyal_)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Fulaaygu waxaa uu ka mid yahay geedaha sida dabiiciga uga baxa Soomaaliya. Waxaa uu u baxaa geedkani raxanraxan ama koox-koox.

Fulaaygu waxaa uu si dabiici ah uga baxaa dhulalka u dhow lama degaanka ku yaal Waqooyiga Afrika.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Fulaaygu waxaa uu ka mid yahay, geedaha sida dhakhsaha ah u baxa marka la beero. Geedakani dhererkiisu ilaa 17 mitir ayuu gaadhaa, dhumucda jirridiisuna ila 60 cm.

Marka uu ka baxayo cimilo ku haboon qaabka dalada oo kale ayuu u baxaa. Midabka jirrida geedkani waa cagaar iyo huruud isu qasan marka uu geedku yar yahay. marka uu geedku muddo dheer jiro jirrida geedkani waxay isku badashaa casaan u eg sida birtu markey daxaleysato. Fulaaygu waxaa uu leeyahay ubax aad u qurrux badan.

FULAAY — ACACIA SEYAL

| Miraha | Qaabka Geedka |
| --- | --- |
| Ubaxa | Laamaha |
| Caleenta | |
| Iniinyo | |

## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Fulaaygu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, isla markaan u adkeysata abaaraha. Waxaa la wariyey in geedkani u adkeysto biyo la'aanta muddo gaadheysa 6 bilood. Roobka uu ka bixi karo waxaa lagu qiyaasaa 150 mm sannadkii.

Waxaa kale oo uu ka bixi karaa geedka Fulaaygu meelaha biyo fadhiisyadda ah, oo laga yaabo in geedaha kale ka bixi waayaan.

Soomaaliya iyo waddamada kale qaarkoodba waxaa uu Fulaaygu aad u uga baxaa dhulka leh ciida dhoobada ah, gaar ahaan Soomaaliya,webiga Shabeele iyo meelaha kale ee biyuhu fadhiisataan ayuu aad uga baxaa.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedkani waxyaabo badan ayaa loo isticmaalaa. Tusaale ahaan, geedkani xabagtiisa Suudaan dibeda ayey u dhoofisaa. Waxyabaha kale ee loo isticmaalo waxaa ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Geedkani xaabo ayaa laga dhigtaa waddamada qaarkood, qaar kalene waxay ka sameeyaan dhuxusha ay shitaan, dhuxul tayadeeduna wanaagsan tahay ayaa laga sameeyaa qoriga geedkani.

**Daaqa:** Geedkani caleemihiisa xoolaha ayaa daaqa, gaar ahaan, xilliga dhirta kale gabaabsinka tahay. Beeraleyda qaarkood ayaa geedka oo dhan gooya marka ay rabaan iney caleenta geedkan u jaraan xoolahooda.

**Daawooyinka:** Jirrida, Xabagta, iyo caleemaha geedkani waxaa laga sameeyaa daawooyin kala duwan oo lagula dagaalo cudurada dadka ku dhaca.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Habka ugu wanaagsan ee iniinyaha geedkani loo ururin karo, mudadda la keydin karo, iyo xilliga ugu haboon in la loo guro, waxay ka mid yihiin wararka aanan la soo ururin markii buuggani la qorayey sidaas daraadeed, waxaa lagu qorayaa buuggani marka ay suurgal noqoto.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha iskood u baxa marka ay helaan cimilo ku haboon, Waxaa uu si gaar ah ugu bataa dhulka ay xoolu daaqin, waayo daaqista xooluhu dhibaato weyn ayey gaadhsiin karaan geedkani gaar ahaan marka uu yar yahay.
Fulaaygu si dhakhso ayuu u baxaa marka laga jaro geedaha kale oo kula tartama biyaha iyo macdanta kale ee uu u baahan yahay.

Calaamadaha kale ee uu geedkani leeyahay waxaa ka mid ah, isaga oo dib u soo baxa marka la gooyo.
Waxaa la wariyey in geedkani dhererkiisu istaago marka uu 10 sanno gaadho.

Magaca: Galool ( _Acacia bussie_).

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedka galoolka Magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Sarmaan Dhaadheer, geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha dalka ka baxa kuwa ugu faa'idada badan.

Galoolku waa geed caan ah, kana baxa Soomaaliya oo dhan guud ahaan. Inkasta oo gobolada qaarkood aad ugu badan yahay, sida Gobolka Baay.

Galoolku waxaa uu si dabiici ah uga baxaa waddamada ay ka mid ka yihiin Soomaaliya, Itoobiya, Kiiniya, iyo Tansaaniya.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Galoolka waa geed bixitaankiisu gaabiyo marka la tallaalo, cimrigiisu aad ayuu dheeryahay. Wuxuuna leeyahay qaabka dalada oo kale markey furan tahay. Geedka galoolku dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 10 mitir, sida badan 1 udub oo kaliya ayuu leeyahay, hase ahaatee dhawr udub ayuu mararka qaarkood yeeshaa.

Galoolka jirridiisu way jactadsantahay, midabkeeduna waa madow ama cawlaan, geedkani Laamo waaweyn ayuu leeyahay, laan walba waxaa ka farcama caleemo badan isagana soo hor jeeda labo labo. Qoddax adadag ayuu Galoolku leeyahay isuna raacsan labolabo. Geedkani waxaa uu leeyahay qoddax toosan, dhererkooduna wuxuu gaadhaa ilaa 9cm.


Xidida geedkani waxay ku kooban yihiin dhulka intiisa sare, qoriga ama udubka Galoolku aad ayuu u adag yahay una culus yahay.

GALOOL — ACACIA BUSSIA


Miraha (mariin)




Qaabka Geedka



Ubaxa (cadaan-huruud)



Laamaha




Caleenta



Iniinyo

## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha badan laheyn, inkast oo uu Soomaaliya ku badan yahay gobolka Baay oo ka mid ah goboladda roobka ugu badani ka da'o. Roobka geedkani u baahan yahay si uu u baxo waxaa lagu qiyaasaa 130-500 mm sannadkii.

Dhulka sare ee Afrikada Bari ayuu si gaar uga baxaa, gaar ahaan 300-1800 mitir dhulka dhererkoodu gaadhayo.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA

Geedka galoolka waxyaabo fara badan ayaa Soomaaliya iyo waddamada kaleba looga isticmaalaa. Waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Dad badan oo ku dhaqan miyiga iyo magaalada ayaa galoolka xaabo ka dhigta.

**Dhuxul:** Soomaaliya, galoolku waa geedka ugu badan ee dhuxusha laga sameeyo. Tusaale ahaan, dhuxusha ugu badan ee laga isticmaalo magaalooyinka waaweyn waxaa laga sameeyaa Galooka iyo Cadaada. Sida Soomaaliya oo kale ayaa Waddamo kale ayaa iyaguna geedkani dhuxul ka sameeya. Tayada dhuxusha Galoolku aad ayey u wanaagsan yahay waana sobobta keentey in dhuxusha laga sameysto.

**Daaqa:** Xoolaha oo lafdhabar u ah dhaqaalaha Soomaaliya, waxay daaqsin ka dhigtaan caleenta geedkani, gaar ahaan meelaha cawsku ku yaryahay.

**Hadh:** Waddamada qorraxdu kulushahay, dadka iyo xooluhuba waxay ka hadsadaan galoolka kuleyka qorraxda. Hase ahaatee laamaha galoolka waxaa laga sameyee xerooyin xoolo.

Waxyaabaha kale ee geedkani loo isticmaalo waxaa ka mid ah, iyada oo ka sameyaan daawooyin waxtar leh oo lagu daaweeyo cuduradda qaarkood. Waxaa kale oo uu leeyahay Xabag la cunno.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Wararka ku saabsan habka ugu wanaagsan ee geedkani iniinyahiisa loo soo ururiyo xilligan ku haboon iyo mudadda la keydin karo, waxaa lagu dari doonaa buuggani marka ugu horeysa ee ay suuragal noqoto.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Galoolku waxaa uu ka mid yahay geedaha sida dabiici ah u baxa, una tarma marka ay haystaan cimilo ku haboon.

Galoolku waxaa uu qabsadaa dhul balaadhan. Waxaa kale oo galoolka caado u ah inuu dib u soo baxo marka ay xooluhu daaqaan. Sidaad daraadeed waa in xoolaha laga ilaaliyaa iney daaqaan caleenta geedkani marka uu yar yahay.

Magaca: Garas ( Dobera glabra)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Garasku waa geed caan Soomaaliya, gaar ahaan koonfurta Soomaaliya. Geedkani waxaa uu aad ugubadan yahay nawaaxiga degamada Afgooya, Shallambood, Baraawe, Jilib, Jamaame, Bu'aale iyo degmooyin ka tirsan gobolka Baay.

Waddamada uu sida dabiiciga ah uga baxo waxaa ka mid ah, Itoobiya, Hindiya, Kiiniya, Sacuudi Carabiya, Suudaan, iyo Ugaandha.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Geedka garaska astaamaha lagu aqoonsan karo waxaa ka mid caleemihiis oo waaweyn, kuwaas oo xilli kasta leh caleemo ee ah dooga/ Cagaar.

Geedkani waxaa uu leeyahay hal udub oo aad u dhumuc weyn. Garasku qolofta saaran jirridiisu way simantahay, midabkeeduna waa cawlaan. Caleemaha geedkani aad ayay u balaaran yihiin. Garasku ubaxa aan sidaas u weyney ayuu leeyahay, miro la ay dadku cunaan ayuu geedkani ayuu leeyahay.


Geedkani qorigiisu waa fudud yahay, waxyaabo badan ayaana lagu qabsan karaa, midabkiisu waa cadaan.

## GARAS — DOBERA GLABRA


Miraha



Qaabka Geedka



Ubaxa (cadaan)



Laamaha



Caleenta (cagaar)



Iniinyo

**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Garasku wuxuu ka mid yahay geedaha u adkeysta abaaraha, isla markaana ka baxa dhulka roobku ku yaryahay.
Waxaa la wariyey in muddo ku dhaw dhawr bilood uu biyo la'aan u adkeysan kara. Roobka uu geedkani u baahan yahay si uu u baxo waxaa lagu qiyaasaa 250 mm sannadii. Inkasta oo uu si haboon uga baxo dhulka hela roob gaadhaya ama ka badan 400mm/sannadkii.

Ciida dhoobada ah dhulka leh ayuu si gaar ah geedkani uga baxaa.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Waxyaabo badan ayaa geedkani looga isticmaalaa Soomaaliya iyo waddamada kaleba. Waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Daaqa:** Xilliga jiilaalka ah ee geedaha kale caleentu ka qalasho isla markaana ka Daa'dato, Garasku wuxuu ka mid yahay geedaha ay xooluhu daaqaan.

**Hadhka:** Faa'idooyinka uu geedkani leeyahay waxaa aqoonsaday, beeraleyda ku dhaqan agagaarka Afgooye iyo Shallambood , waayo markey dhulka u diyaarinayaan beerid , dhirta oo dhan ayey jari jireen, hase ahaatee ma goyn jirin Garaska waayo wuxuu dadka iyo xoolahaba wuxuu siiyaa hoos ay ka galaan kuleylka qorraxda.

Waxyaabo badan ayaa qoriga geedkani ay dadku ka sameeyaan, sida lugaha Gambarta, Sariiraha gaar ahaan cadiirta ama jimbaarta. Waxaa kale oo laga sameyaa fandhaalada dharyaha,cuntada lagu karsado iyo alaabada kale ee kushiinka.

Garaska qorigiisa si fudud ayaa loo qaloocin karaa, taas ayaana keentey in alaabada aynu soo sheegney oo dhan laga sameeyo..
Miro la cuno ayuu garasku leeyahay, inkasta oo ay tahay xilliga cunto la'aantu dhacdo ama abaarahu.

Ugu dembeyntii Garasku wuxuu ka mid yahay geedaha lagu dhiiri galiyo in beeraledu ku tallaalaan beerahooda.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha la doonayo in la beero, waa in laga soo ururiyaa geedaha da'doodu weyn tahay. Si kor loogu qaado fursada ay iniinyuhu ku soo bixi lahaa, waa in iniinyaha gacanta lagaga soo saaro miraha.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Garasku waxaa uu ka mid yahay geedaha markey helaan cimilo ku haboon iskood u baxa. Si dabiici ah ayey iniinyaha geedkani dhulka ugu daa'taan, marka dembana u baxaan.
Garasku waxaa uu ka mid yahay, geedaha xooluhu marka ay daaqan dib u soo baxa.

Daaqista xoolaha waa in laga ilaaliyaa geedkani inta uu yahay.

Magaca: Garbi ( <u>Acacia albida</u>:)

**1. IFAFAALHA GEEDKA:**

Geedkani waxaa u ka baxaa meelo ka mid waqooyiga Soomaaliya, Goboladda Waqooyi Galbeed iyo Awdal. Waxaase suurogal ah inuu ka baxo meelo kale oo dalka ka tirsan.
Waxaa dhawrkii sanno ee u dembeeyey lagu tallaaley meelaha bacaadku dhibaatada ku hayo, sida Shallambood iyo Baraawe.

Garbigu wuxuu si dabiici ah uga baxaa guud ahaan qaaradda Afrika, laga bilaabo Masar ilaa Koonfurta Afrika. Waxaa kale oo uu ka baxaa Waddamada ku yaal bariga dhexe sida Suuriya iyo Israa'iil.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Garbigu wuxuu ka mid yahay geedaha aan sida dhakhsaha ah u bixin marka la tallaalo. Hase ahaatee, cimirigiisu wuu dheer yahay. Geedkani wuxuu ka mid yahay geedaha caleentu ka daadato, gaar ahaan xilliga gu'ga. Geedkani dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 30 mitir, laakiin inta badan wuxuu u dhexeeyaa 2-30 mitir. Dhumucda udubkiisu waxay mararka qaarkood lagu qiyaasaa iney 1 mitir gaadho. Midabka qolofta jirrida saaran waa cadaan inta geedku yaryahay, hase ahaatee marka geedku weynaado waxaa midabkeedu isu badalaa cawlaan.

Garbigu waxaa uu leeyahay laamo midabkoodu cadahay, kuwaas oo marka dambe isku badala casaan, caleemahiisu labolabo ayey isku raacsan yihiin. Garbigu waxaa uu leeyahay midabkiisu waa cadaan, ama huruud, waxaa kale oo uu leeyahay qoddax labolabo isu raacsana wuu leeyahay.


Xidido dhaadheer oo dhulka fidsan, aadna ugu adadag ayuu geedkani leeyahay. Qoriga geedkani midabkiisu waa huruud ama casaan.

## GARBI ACACIA ALBİDA


Miraha




Qaabka Geedka





Ubaxa (huruud-
cadaan




Caleenta(buluug-
doog-



Iniinyo (mariin
madow)



Laamaha



### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Garbigu wuxuu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, ama roobku ku yar yahay. Roobka uu ka bixi karo geedkani waxaa lagu qiyaasaa inuu ilaa 250- 1000 mm sannandkii. Soomaaliya waxaa ay leedahaycimilada ku haboon bixitaanka geedkani.

Dhulka leh cimilada kulul ayuu garbigu si fiican uga baxaa. Heerkulka gaaraya ilaa 18-30c ayaa ku haboon geedkani bixitaankiisa.

Dhulka leh ciida gudbin karta biyaha, gaar ahaan wuxuuu geedkani si fiican uga baxaa marka lagu beero dhulka ciidiisu qoyan tahay. Dhulka sare ee ilaa 2000 mitir gaadhaya wuu ka baxaa geedkani.

### 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxyaabaha loo isticmaalo geedkani Soomaaliya iyo waddamada kaleba wey badan yihiin, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Xaabada ayaa ka mid ah, waxyaabaha ugu weyn ee geedkani loo isticmaalo.

**Daaqa:** Faa'idooyinka ugu weyn ee geedkani waxay tahay isaga oo ay xooluhu daaqaan caleenta geedkani.

**Nafaqeynta Ciida:** Geedka garbiga Caleentii waxay kor u qaadaa nafaqada ciida ku jirta, gaar ahaan marka ay caleentiisu ku dhafanto ciida. Garbigu wuxuu ka mid yahay geedaha lagu dhafo dalagyada beeraha.

**Dhiso:** Geedkani aqalada ayaa lagu dhisaa, gaar ahaan kuwa aan aadka u waaweyneyn.

**Hadhka:** Sida geedaha kale qaarkood, dadka iyo xooluhuba waxay ka helaan garbiga hoos ay ka galaan kulka qorraxda ama ka dugsadaan dhaxanta meelaha qabowgu jiro.

Geedkani faa'idooyinkiisu wey fara badan yihiin, waxaana la wariyey in dadka qaarkood cunaan caleentiisa intey biyo kulul ku ridaan. Geedkani xabagtiisa waa la cunaa. Daawooyin ayaa dadku ka sameeyaan xubnaha geedkani.

Beeraleyda qaarkood ayaa ku tallaala agagaarka guryahooda si ay uga gabadaan dabeylaha. Tijaabooyin lagu sameeyey sida uu geedkani uga bixi karo bacaadka, waxaa cadaatey in lagu tallaali karo isla markaana uu ka bixi karo meelaha dhibaatada bacaadku ka jirto sida Shallambood .

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha geedkani waxaa si toos looga soo ururin karaa geedaha waaweyn hoostooda. Qaar ka mid ah iniinyaha waddanka laga isticmaalo Senegaal ayaa laga keeney. Waxaa haboon in marka iniinyaha la ururinayo in laga soo guro geedaha leh dhererka iyo dhumucda, si hadhow dhirta la tallaalo u noqoto mid si fiican looga faa'ideysto. Waxaa lagu qiyaasaa in halkii (1kg) ee iniinyaha geedkani ku jiraan ilaa 9000 oo xabbo, hase ahaatee waxaa laga soo qaadaan iney 3500 oo xabo ku jiraan.

Si qolofta dusha ka saaran iniinyaha looga saaro, dabaysha ayaa loo dhigaa. Garbiga iniinyahiisa waxaa la keydin karaa muddo dhawr sanno ah, haddii lagu keydiyo meel qalalan oo yara qabow. Mudadda ay makhaasiinka ku jiraan iniinyuhu waxaa lagama maarmaan ah in laga ilaaliyo xasharaadk dhaawaca u geysan kara iniinyaha. Intaan la beerin iniinyaha waxaa haboon in lagu rido biyo diiran, laguna daayo ilaa 24 saac si diirka saaran iniinyuhu u jilco dhakhso uga soo baxaan marka la beero.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANDDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo badan ayaa loo kobcin karaa geedkani. Tusaale ahaan,

a) Marka diirka saaran iniinyaha la jilciyo waxaa si toos ah loogu beeri karaa meeshii geedkani la rabay inuu lagu tallaalo. Xoolaha waa in laga ilaaliyaa marka iniinyaha la beero geedaha.

b) Madaama ururintu iniinyahu adagtahay waxaa haboon in iniinyaha dhulka si toos loogu beerin waayo badankoodu sidaas iney ku bixin ayaa suurogal ah. Bac ayaa iniinyaha lagu beeraa, Dhererka iyo dhumucda bacda laga isticmaalo Soomaaliya waxaa ay ku dhawdahay (30*10cm,) markey fidsan tahay.

Si natiijo fiican loo helo waa in bac walba lagu ridaa ilaa afar xabo oo iniiyo ama abuur ah. Waxay iniinyaha badankoodu ku soo baxaan muddo u dhaxeysa 6-30 maalmood. Waxaa lagu qiyaasaa in boqolkiiba ilaa 40-60 ay soo baxaan iniiyaha la beero. Hadday dhacdo in dhawr geed bac kaliya ka soo wadda baxaan qaar waa in bac kale lagu wareejiyaa bil markey jiraan. waa in si joogto ah loo waraabiyaa dhirta mudadda ay yar tahay. Geedahu xidido dhaadheer ayey la soo baxaan mudadda ay ku jiraan beerta dhirKobcinta waana in la gaagaabiyaa.
Waxaa haboon in geedaha la kale fogeeyo marka la beerayo, ilaa shan talaabo ayaa leysku jirsiin karaa, waana in loo qodaa god dheer oo balaaran, si uu ugu celiyo biyaha wakhtiga roobka..

Ilaa 100 geed ayaa hecterkiiba lagu tallaalaa. xoolahana waa in laga ilaaliyaa 5-8ta sanno ee ugu horeysa. Haddii lagu tal geedaha dhul qalalan waa in la waraabiyaa ilaa 3 sanno ee ugu horeeya.

Magaca: Geed Hindi ( Azadirchta indica)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geed Hindigu wuxuu ka baxaa meelo badan oo dalka ka tirsan, waxaa si gaar ah loogu beerey badhtamaha degmooyinka iyo tuulooyinka qaarkood, ujeedada ugu weyn ee geedkani loogu tallaalay inuu kor u qaado bilicda magaalooyinka, Muqdisho ayaa ka mid meelaha aadka loogu tallaalay.

Geed Hindigu waddamada uu sida dabiiciga uga baxo, waxaa ka mid ah Bangaladeesh, Barma, Kaamboodiya, iyo waddamo kale. Waxaa la soo galiyey Afrikada Dhexe waxaana uu ku fiday ilaa immika dhamaan dalalka ku yaal badhtamaha iyo waqoyiga Afrika. Sababta ugu weyn ee uu aadka ugu fiday geedkani waa iyada oo la ogaadey faa'idooyinka uu leeyahay geedkani.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Geed Hindigu waa geed weyn lehna caleemo doog ah ama cagaaran sannadkii oo dhan. Geedkani dhererkiisa wuxuu gaadhaa ilaa 20-25 mitir, hase ahaatee sida badan geedaha Soomaaliya ku yaal wey ka gaagaaban yihiin. Geedkani Dhumucda udubkiisu waxaa lagu qiyaasaa in ilaa 100-150cm gaadho meelaha qaarkood. Qolofta saaran jirrida way dhumuc weyn tahay. Laamo waaweyn oo afarta dhinac u fida ayuu geedkani leeyahay.

Miro wareegsan ayuu bixiyaa, xididadiisuna aad ayey dhulka hoos ugu galaan, una tiro badan yihiin. Qoriga geed hindigu waa u adkeystaa dhibaatada uga timaad xasharaadka sida aboorka.


# GEED HINDI

# AZADIRACHTA INDICA


Miraha (huruud-cagaar)




Qaabka Geedka




Ubaxa (cadaan)



Laamaha



Caleenta (cagaar)



Iniinyo



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Geed Hindigu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar ama roobka yari uu ka da'o. Waxaa uu geedkani biyo la'aan u adkeysan karaa muddo 5-7 bilood gaadheysa. Roobka uu u baahan yahay inuu ku baxo waxaa uu u dhexeeyaa 450-1200mm sannadkii.

Heerkul gaadhaya ilaa 21-32c geedkani wuu u adkeystaa. Banaanada iyo buuraha gaaadhaya ilaa 1000 mitirba wuu ka bixi karaa geeedkani.

Waxaa muhiim ah in dhulka lagu beerayo geedkani lahaado biyo dhulka xagiisa sare ku jira

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Waxyaabo farabadan ayaa geedkani loo isticmaalaa, waxaana ka mid ah kuwan aan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Qoryaha geedkani dadku waxay ka dhigtaan xaabo ay shitaan.

**Dhuxul:** Dhuxul ayaa dadka ku nool waddamada uu ka baxo ka sameeyaan geedkani.

**Dhismo:** Qoryaha dadku ka soo gurtaan geedkani aqalada ayey ku dhistaan.

Geedkani faa'idooyinkiisa waxaa ka mid ah hadh ama hoos, magaaloyinka Muqdisho ka mid ka tahay aad ayey dadku ugu nastaan hadhka geedkani. Xooluhuna sidaas oo kale ayey ugaga gabadaan qorraxda kulkeeda. Bilicda magaalooyinka ayaa geed hindigu aad u kordhiyaa. Waxaa dhawaan laga sameeyey daawooyin la gula dagaalamo xasharaadka waxyeelada gaadhsiiya dalagyada beeraha.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Geedkani iniinyahiisu waxaa haboon in la ururiyo bisha Janaayo iyo wixii ka dembeeya, gaar ahaan nawaaxiga Muqdisho. si loo guro iniiyo ku filan hawsha loogu talo galay waa in bac la hoos dhigaa geedaha iniiyaha laga ururinayo. Si daboolka saaran iniinyaha looga saaro, waa in biyo lagu ridaa.

Waxaa la keydin karaa iniinyaha geedkani ilaa 2-3 todobaad, ugu badnaan 2 bilood ayaa la keydin karaa iniinyaha geedkani.

Iniinyaha diirka saaran uma baahna wax jilcin ah, laakiin haddi la doono biyo qabow ayaa lagu dhex ridi karaa maalin ama labo maalmood. Waxaa lagu qiyaasaa in halkii (1kg) iniinyaha geedkan ku jiraan 4,400-6,300 oo xabbo.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANNDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Habab badan ayaa geedkanI loo abuuri karaa geedkani, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

a) Inta uu yar yahay geedkani haddii la gooyo, lagana ilaaliyo in xididadiisa dhaawac gadhaan, waxaa lagu tallaali karaa meel kale. Waxaa muhiim ah in la tallaalo geedka xilliga gu'ga ah ee roobku jiro.

b) Soomaaliya sida ugu badan ee geedkani loo kobciyo waa iyada oo iniinyahiisa lagu abuuro bac, ka dibna lagu xanaanneeyo in muddo ah.

Marka iniinyaha la beerayo waa in bac walba lagu ridaa Saddex iniinyo si fursada hal ama labo geed ku so baxayso kor loogu qaado. Boqolkiiba 35-65 ayaa iniiyaha la abuuro soo baxa. Intey geeduhu yar-yar yihiin waxaa lama huraan ah in loo yeelo hadh aan weyney oo dhamaan ileyska qorraxda qarineyn hase ahaatee ka celinaya kulka xadi dhaafka ah.

Dhulka lagu tallaalayo geedkani marka dembe waa iney lahaadaan ciid u badan bacaad, isla markaas gudbisa biyaha. Waa in geedaha la kala fogeeyaa marka la tallaalayo, ilaa 8 talaabo ayaa leysku jirsiiyaa marka la beerayo. Haddi la damco waa leyskaga dhaweyn karaa markii loo baahdo. Mudadda uu beerta dhirKobcinta ku jiro hadday dhacdo in xidido dhaadheer uu la baxo, waa in gaagaabiyaa.

Magaca: Geed Walaayo ( Parkinsonia aculeata)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geed walaayuhu wuxuu ka baxaa Soomaaliya meelaha ay ka midka yihiin bacaadka Shallambood, Laas-caanood, Beledweyne, Jalalaqsi, Burco, iyo Xamar. Waxaa kale oo uu ka baxaa oo lagu tallaaley jidka u dhexeeya Muqdisho, gobolada Jubbada Dhexe, iyo Jubbada hoose.

Waxaa geedkani uu si dabiici ah uga baxaa badhtamaha iyo koonfurta Ameerica, gaar ahaan waddamada ay ka mid yihiin Braasiil, Jili, kolombia, Ekwadoor, Gayana, Fenesuwela, Meksiko, Banama, Baraguwaay, Beru, iyo Waqooyiga Ameerika. Intaas waxaa raaca in geedkani aad loogu tallaalay waddamada ku yaal kuleylayaasha.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedkani waxaa u leeyahay caleemo qoyan sannadkii oo dhan, inkasta qaar ka mid caleemuhu ka daataan intey marka hore qalalaan xilliga xaggaaga ah. Qolofta saaran jirrida geedkani wey salaxan tahay, midabkeeduna waa huruud. Qoddax sida caleemaha u eg ayuu geedkani leeyahay. Dhererkiisu wuxuu u dhexeeyaa 4-10 mitir. Dhumucda udubka geedkani waxaa uu gaadhaa ilaa 40cm.


Miro dhaadheer isla markaana dhuudhuuban ayuu bixiyaa. Ubax midabkiisu yahay huruud ayuu leeyahay. Iniinyaha geedkan wa cawlaan.

# GEED WALAAYO PARKINSONIA ACULEA


Miraha (huruud-mariin)




Qaabka Geedka




Ubaxa (huruud)




Laamaha




Caleenta (cagaar)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geed walaayuhu waxaa uu ka baxaa dhulka biyaha yar leh, isla markaana xilliyadda roobku kala fog yihiin ama aad roobku ugu yar yahay. Roobka uu u baahan yahay inuu ku baxo geedkani waxaa lagu qiyaasaa ilaa 250-800 mm sannadii dhulka hela.

Banaanadda iyo buuraha dhererkoodu gaadho ilaa 1400 mitirba wuu ka bixi kara gededkani.

Sida geedo badan oo kale geed Walaayuhu uma baahan in lagu tallaalo dhulka biyahu ku jiraa.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxyaabo badan ayaa dalka gudihiisa iyo dibediisaba looga isticmaalaa geedkani, waxaana ka mid kuwan hoos aku qoran.

**Xaabo:** Inkasta oo aan Soomaaliya aad looga isticmaalin, laamaha geedkani waxaa laga helaa xaabo ay dadku shitaan.

**Dhuxul:** Waddamada qaarkood ayaa dhuxushey shitaan, ka sameysta laamaha geedkani.

**Bacaad Celinta:** Guud ahaan Soomaaliya, geedkani waxaa lagu tallaaley meelo badan, hase ahaatee waxaa si gaar ah loogu beerey meelaha hawlaha bacaad celintu ka socoto.

Geedkani Waxaa uu leeyahay hadh, kaas oo dadka iyo xooluhuba kaga gabadaan kulka qorraxda. Beeraleyda ku dhaqan Soomaaliya iyo waddamada kaleba waxay ku tallaalaan geed walaayahan agagaarka beerahooda amase guryaha ay degan yihiin, si uu uga celiyo dabaylaha, isla markaana kor u qaado bilida magaalooyinka iyo tuulooyinka.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Natiijo fiican ayaa laga heley markii geedkani lagu tallaalay bacaad celinta Shallambood. Iniinyaha geedkani waxaa laga soo ururiyaa geedaha marka ay diyaarka noqdaan.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geed walaayuhu waxaa uu ka mid yahay geedaha sida dabiiciga ah isaga baxa marka ay helaan cimilo ku haboon bixitaankooda.

Habka ugu raqiisan uguna dhakhsaha badan ee geedkani loo kobcin karo waa marka iniinyaha geedkani si toos ah loogu abuuro dhul la sii falay. Waxaa kale oo ka mid ah habka geedka loo tallaalo, in qeyb ka mid ah geedkani inta la gooyo dib loogu abuuro dhulka.

Sida dhirta kale qaarkood, geedkani iniinyuhiisa laguma beero bacaha.

Magaca: Gob ( Ziziphus mauritiana)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Gobku waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh, dakuna aad ayey u jecel yihiin mirahiisa macaan. Geedka gobka, waxaa uu ka mid yahay geedaha caan ku ah Soomaaliya.

Geedakani waxaa uu ka baxaa waddanka oo dhan, waxaa uu si gaar ah ugu badan yahay waqooyiga Soomaaliya. Waxaa kale oo si lagu beerey agagaarka jidadka, magaalooyinka qaarkood, sida Dhuusomareeb, Sablaale, iyo Garoowe.

Gobku wuxuu si dabiici ah uga baxaa waddamda ku yaal waqooyiga Afrika, iyo dhulalka qalalan ee yaal Qaarada Aasiya. Waxaa aad loogu beerey waddamada ku yaal kuleylayaasha.
Waxaa la sheegey in gobku markiisii hore buuraleyda Himilaaya uu uga yimid Afrika, labo kun oo sanno ka hor.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Gobku waa geed weyn oo leh caleemo doog ah sannadki oo dhan, hase ahaatee xilliyada abaaraha caleemuhu wey ka daataan. Geedkani dhererkiisa waxaa lagu qiyaasaa inuu u dhexeeyo 3-8 mitir, marar ayuu gaadha ilaa 16 mitir. Laamo tiro badan ayaa jirrida geedkan ka soo baxa, dhumuda udubkiisuna waxay ku dhawataaa ilaa 40cm.
Qolofta jirrida saaran midabkeedu waa cawlan ama madow. Iniinyahu waxay ku dhex jiraan miraha la cuno gudahooda.
Qori adag ayuu geedkani leeyahay oo aadna u culus.


# GOB

# ZIZIPHUS MAURITIANA

## Miraha (cawlaan)



## Qaabka Geedka




## Ubaxa (



## Laamaha





## Caleenta (cagaar)



## Iniinyo



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Gobku wuxuu ka baxaa dhulka leh, xilliyo abaareedka, waxaana uu ka baxaa dhulka biyaha yar leh. Roobka uu u baahan yahay 150-500 mm sannadkii.
Dhulka cimiladiisu kulul leh ayaa geedkani ku haboon bixitaankiisa.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Gobku waa geed faa'idooyin badan leh, waxaana ka mid ah.

**Xaabo:** Qoryaha geedkani xaabo, ayaa laga dhigtaa.

**Dhuxul:** Meelaha qaarkood ayaa qoriga geedka gobka dhuxul laga sameysta , hase ahaatee Somaaliya kuma ah caadi.

**Dhismo:** Guryaha eyey dadka qaarkood ku dhistaan tiirka geedkani.

**Daaqa:** Wakhtiga Jiilaalka ee daaqu yar-yahay waxaa xooluhu daaqaan caleenta geedkani.

Faa'idada ugu weyn ee geedkani waxay tahay iyada oo Gobku leeyahay miro la cuno oo ay dadku aad u jecelyihin. Geedka gobka dad ayaa guryahooda agtooda ku beera si uu dabaylaha iyo dhaxanta uga celiyo dadka ku nool guryahaas.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Marka la ururinayo iniinyaha geedkani, waa in si gaar ah loo radsadaa geedaha bixiya miraha aadka u badan. Waxaa iniinyaha laga soo guri karaa geedaha aanu kor ku sheegney hoostooda. Halkii (1kg) iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan 650-3500 oo xabbo.
Si dubka saaran iniinyuhu u jilcaan, waxaa la gama maarmaan ah in lakala jabiyo lafta ku daboolan iniinyaha.

Muddo aad u dheer ayaa la keydin karaa iniinyaha geedkani, ugu yaraan sannad. Ka hor intaan iniinyaha la abuurin waa in biyo lagu ridaa qabow ama diiran, loona daayaa ilaa 48 saac.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANNDA GEEDKA MUDDADA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Siyaabo badan ayaa geedkani loo kobcin karaa.

a) Waxaa la jari karaa qeyb ka mid ah geedkani ka dibna waxaa lagu tallaali karaa meeshii loogu talo galay.

b) Sida badan iniinyaha waxaa lagu abuuraa bac, ka dibna waxaa lagu xanaaneeyaa beerta dhirkobcinta ilaa muddo ah intaan lagu talalin meel kale.
Iniinyaha la beero boqolkiiba 30-70 ayaa si guul ah u soo baxa.

Waxaa lagu xanaanneeyaa beerta dhirkobcinta geedaha intey yaryar ilaa 18-24 todobaad. Waxaa gobku si fiican uga baxaa ciida bataaxa, gaar ahaan agagaarka webiyada meelaha qaarkood waxaa haboon in lagu beero ciida waxyaabaha nafaqeeya.

Magaca: Hareeri ( <u>Terminalia prunioides</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Hareerigu waxaa uu ka baxaa meelo badan oo Soomaaliya ka mid ah,. Geedkani waxaa uu si fiican uga bacaadka, waayo waxaa uu ka heli karaa biyo, kuwas oo ka yimaada xagga badda.
Waxaa kale oo la sheegey inuu Hareerigu ka baxo gobolka Baay Jubbada Dhexe, Shabeelada Hoose iyo meelo kale.

Dalalka uu geedkani sida dabiiciga ah uga baxo waxaa ka mid ah Angoola, Botswaana, Kiiniya, Mosambiig, Naamiibiya, Soomaaliya, Tansaaniya, Saambiya, Koonfurta Afrika, iyo Simbaawi.


**4. ASTAAMAHA GEEDKA**

Hareerigu waa geed si dhakhso ah u baxa, isla markaana aad u dheer. Dhererka geedkani waxaa lagu qiyaasey inuu 7-15 mitir gaadho, amam mararka qaarkood wuxuu noqdaa geed hoosaad dhererkiisu yahay 2-4 mitir.


# HAREERI

# TERMINALIA PRUNIOIDES


Miraha (casaan)




Qaabka Geedka





Ubaxa




Laamaha



Caleenta (cagaar)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Hareerigu waxaa uu ka baxaa ciido kala duwan, muddo ilaa 4 bilood ah ayuu roob la'aanta u adkeysan karaa.

Hareerigu waxaa u si fiican ugu baxaa dhulka leh, ciid ay ku jiraan biyuhu, isla markaana ay ka baxaan dhirta ay ka midka yihiin geedaha waaweyn. Inkasta oo uu roobku yarna ku baxo, hase ahaatee 400 mm /sannadkii dhulka hela ayuu aad u jecel yahay geedka hareerigu inuu ka baxo.

## 2. ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxyaabo fara badan ayaa geedkani loo isticmalaa, waxaana ka mid ah kuwan aan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Geedkani waxaa ay dadku ka helaan xaabo.

**Dhuxul:** Faa'idooyinka ugu weyn ee geedkani waa isaga oo qorigiisa laga sameysto dhuxul. Somaaliyana wuxuu ka mid yahay geedaha dhuxusha ugu wanaagan laga sameeyo.

**Dhiso:** Soomaaliya dad badan ayaa qoryaha ay aqaladda ku dhistaan ka hela geedkani, gaar ahaan mundulka iyo guryaha la midka ah. Waxaa kale oo laga sameeyaa daababka la galiyo, waxyaabaha ayka midka yihiin faasaska, gudunta, iyo wlm.

Waxaa beeraley badani ku dhex tallaalaan geedkani beerahooda, si uu dalagyadda beeraha uga celiyo dabeylaha, isla markaana ay uga helaan qoryo ay aqaladdooda ku dhistaan. Waayo caleemaha geedkani marka ay dhulka ku dhacaan waxay ciida ka celiyaan kulka qorraxda oo qalajin kara ciida. Caleenta geedkani waxaa kale oo ay kor u qaadaa nafaqadda ciida ku jirta marka ay dhulka ku daa'taan. Dadka iyo xayawaanka kaleba waxay ka helaan hoos ay kaga gabadaan kulka qorraxda. Waxaa kale o uu leeyahay miro. Xabbag la cunno ayuu leeyahay Hareerigu. Daawooyin ayey dadka qaarkood ka sameeyaan geedkani. Xiddidada geedkani waxaa lagu daaweeyaa Dysentryga.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Hareerigu waxa uu ka mid yahay geedaha, ilaa wakhtiggan hadda ah aan la heyn wararkooda ku saabsan sida ugu haboon ee iniinyahooda loo beeri karo, loona xanaanneyn karo marka uu geedku yar yahay. Iniinyaha geedkani waxay u baahan yihiin in diirka saaran la jilciyo intaanan la abuurin ka hor. Hababka ilaa hadda la shegey in diirka geedkani lagu jilcin karo waxaa ka mid ah, xoqitaan lagu sameeyo iniinyaha diirkooda sare, gubitaan lagu sameynayo diirka sare.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANDADA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Si dabiici ayuu geedkani uga baxaa dhulka, gaar ahaan marka uu helo cimilo ku haboon. Daaqitaanka xoolaha waa in laga ilaaliyaa, madaama ay dhaawac u geysan karaan geedku marka uu yar yahay. Waxaa kale oo la wariyey in geedkani iniinyahiisa lagu kobcin karo bac, boqolkiiba ilaa 30 ayaa iniiyaha soo baxay lagu qiyaasaa.

Magaca: Hohob (<u>Grewia Mollis</u>):

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani magacyadda kale ee looga yaqaan dalka waxaa ka mid ah Dhafaruur, waxaa uu ka mid yahay geedkani geedaha miraha la cunno leh. Soomaaliya geedkani meelo badan ayuu ka baxaa, gaar ahaan goboladda koonfureed ee u dhaw labada webi, Jubba iyo Shabeelle.

Waddamada badan oo ku yaal qaarada Afrika ayuu geedkani si dabiici aha uga baxaa, gaar ahaan Waqooyiga Afrika.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedka hohobtu waa geed aan weyneyn, dhererkiisuna ilaa 7 mitir ayuu ugu badnaan gaadhaa. Jirrida geedkani waxaa ay leedahay midab madow iyo iyo cawlaan isu dhaqan ah.
Geedkani waxaa uu leeyahay caleemaho midabkoodu yahay cagaar madow ku jiro ayuu leeyahay.

Geedkani waxaa uu leeyahay ubax aad u qurux badan, midabkiisuna huruud yahay.

Miraha geedkani wey wareegsan yihiin midab cawlaan ahna wey leeyihiin. Mirahana waxaa uu bixiyaa geedkani xilliga roob la'aantu jirto.
Qorriga geedkani waa fudeyd, sidaad daraadeed ayaana loo gu dhisan guryahay.

HOHOB GREWIA MOLLIS

Miraha

Qaabka Geedka

Ubaxa

Laamaha

Caleenta

Iniinyo

**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Hohobtu waxaa ay ka baxdaa dhulal badan oo leh ciid kala duwan. Geedkani markey xooluhu daaqan si fudud ugama soo kabto, sida geedaha kale qaarkood. Sidaas oo kale, dabku waxyeelo weyn ayuu gaadhsiiyaa geedkani, madaama uusan ka mid aheyn geedaha u yara adkeysn kara dabka.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Waxyaabaha kale duwan ee geedkani loo isticmaalo, waxaa ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xadhko:** Jirrida geedkani waxay dadku ka sameyaan meydhax, taas oo marka dambe ay ka sameyaan xadhko iyo waxyaabo kale.

**Cunto:** Miro dadka ku dhaqan miyiga iyo magaaladuna jecel yihiin ayuu geedkani bixiyaa.

**Dhismo:** Hohobtu waxaa ay leedayahay qorri jilicsan oo ay dadku ka sameeyaan Qaansooyinka iyo Leebabka (Falaadhaha).

Dheecaanka xididada geedkani, waxaa ay raggu marsaan timaha.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Waxaa haboon in laga soo guro iniinyaha geedkani geedaha waaweyn, isla markaana leh dhererka iyo dhumucdaba.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geedkani waxaa lagu beeri karaa iniiyahiisa bac, ka dibna waxaa lagu xanaanneyn karaa beerta dhirkobcinta muddo. Marka iniiyaha geedkani la beero, boqolkiiba ilaa 30 in ku dhaw ayaa soo baxda.

Magaca: (Albizia lebbeck)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha dibeda ka soo galay. Soomaaliya waxaa uu ka baxaa agagaarka labada webi Jubba iyo Shabeelle, waxaa kale oo aad loogu beerey Qoryooley, Jilib, iyo Afgooye nawaaxigooda.

Geedkani waddamada uu sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid ah Bangaaladeesh, Barma, Hindiya, Indooniisiya, Malaysia. Nepal, Bakistaan, Siirilaanka, Taylaand, iyo kuwo kale.

2. **ASTAAMAHA GEEDKA:**


Geedkani waxaa uu leeyahay qaabka dalad oo kale, siiba marka ay furan tahay. Geedkani wakhtiga roobku jirin caleentu wey ka daadataa. Dhererka geedkani wuxuu gadhaa ila 15 mitir. Dhumucda tiirkiisuna mararka qaarkood ilaa 50cm ayey gaadhaa.
Qolofta saaran jirrida midabkeedu waa cawlaan, laamo fidsan oo culculus ayuu leeyahay geedkan. Ubaxa geedkani wuxuu ku kooban yahay dhawr xabbo oo yaryar, oo timo kale ah. Waxaa uu leeyahay hal weyn.

Xididada geedkani waa gaagaban yihiin. Geedkani qori culus, isla markaana adag ayuu leeyahay.


Geedkani waxaa uu leeyahay loox aad u adag kaas oo cayayaanku si fudud u gaadhsiin karin waxyeelo.

# ALBIZZA LEBBECK


Miraha (huruud)




Qaabka Geedka



Ubaxa (cadaan)




Laamaha



Caleenta (cagaar)



Iniinyo



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha u baahan biyaha badan, hase ahaatee waxaa la wariyey in geedkani uu roob la'aan u adkeysan karo muddo gaadheysa ilaa 6 bilood. Roob bku haboon geedkani bixitaankiisa waxaa lagu qiyaasaa 500-2500mm.
Sidaas daradeed si fiican uga bixi maayo geedkani haddii lagu tallaalo gobolada iyo degmooyinka dalka roobka aan badneyn ka da'o.

Guud ahaan dhulka ka sare ee ilaa 1500m mitir dhererkoodu gaadho ayaa geedkani si wacan uga bixi karaa.

Geedkani Xididadiisu waa iney gaadhi karaan biyaha dhulka ku jira.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Geedkani waxyaabo fara badan ayaa loo isticmaala, waxaana ka mid ah:

**Xaabo:** Geedkani laamihiisa iyo qorigiisa xaabo ayaa laga dhigtaa. Madaama tirada geedaha lagu tallaalay Soomaaliya yar tahay dad badan xaabo kama helaan geedkan.

**Dhuxul:** Waddamada qaarkood dad ku dhaqan ayaa dhuxushey shitaan ka sameysta geedkan qorigiisa.

**Dhismo:** Inkasta oo qoriga geedkani aad u adkeyn haddana dad ayaa ku dhist aqaladooda.

Geedkan waxaa kale oo uu caan ku yahay isaga oo nafaqeeya ciida, waxaana haboon in lagu dhex tallaalo dalagyada beeraha, waayo marka ay caleentu ka daadato kor ayay u qaadaa nafaqaada ciida ku jirta.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Geedkani iniinyahiisa waxaa haboon in laga soo guro geedaha leh, dhererka iyo dhumudaba, si geedaha kale ee ka farcamyaana u yeeshaan qeyb ka mid astaamaha aanu soo sheegney. Iney iniinyahu diyaar noqdeen iyo in kale waxaa lagu ogaan karaa, iniinyaha geedka ayaa dhulka ku soo dhaca.

Muddo gaadheysa ilaa 5 sanno ayaa iniinyaha geedkani la keydin karaa.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geedkani iniinyahiisa waxaa lagu abuuraa bac, waxaana lagu xanaanneyaa beerta dhirkobcinta ilaa muddo intaan meeshii loogau talo galay lagu tallaalin geedka.

Marka la abuuro iniiyaha ilaa 60-90 boqolkiiba ayaa soo baxa. Geedkani waxaa lagu xanaanneyaa beerta dhirkobcinta u muddo 4-7 bilood ah. Intaas ka dib waxaa lagu tallaalaa geedaha meeshii loogu talo galay. Waxaa kale oo la jari karaa qayb ka mid ah geedka oo ka dibna dib loogu beeri karaa.

Waa in ciida lagu tallaalayo tahay mid qalalan, oo gudbin kartana biyaha.

Inta uu geedku yar yahay waxaa lagama maarmaan ah in laga ilaaliyo xoolaha, waayo dhawac uu geedku ka soo kaban karin ayaa laga yaabaa iney gaadhsiiyaan.

Magaca: Lukiina (<u>Leucaena lencocephala</u>):

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:

Geedkani waxaa dhawrkii sanno ee u dambeeyey aad loogu tallaaley nawaaxiga webiga Shabeelle, gaar ahaan agagaarka degmooyinka Afgooye, Jilib, Qoryooley, iyo qaar kale.

Waddamada u sida dabiiciga ah uga baxo geedkani waxaa ka mid Gayana, Megsiko, Banama, Surinaam, iyo waddamo kale. Waxaa aad logu tallaaley geedkani waddamo kale oo ku yaal kuleylayaasha.


## 2. ASTAAMAHA GEEDKA:

Geedkani astaamihiisa waxaa ka mid ah, isaga caleemo qoyan leh xilli kasta, gaar ahaan haddii lagu tallaalo dhulka leh biyo joogto ah. Dhererka geedkani waxaa la sheegey inuu gaadho ilaa 10m, hase ahaatee sida badan waxaa uu dhexeeyaa ilaa 5-10 mitir. Dhumucda udubka geedkani ilaa 40 cm ayey gadhaa. Qolofta saaran jirrida geedkani waa madow iyo cawlaan isku dhafan, isla markaana leh dhibco.

Geedka lukiina wuxuu leeyahay ubax u eg cudbiga oo kale.

Xididada geedkani aad ayey u dhaadheer yihiin, qorigiisuna waa uu culus yahay isal markaana adag yahay.

# LEUCAENA LEUCOCEPHALA



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedkani roob la'aanta wuu u adkeystaa. Roobka uu u baahan yahay geedkani si uu u baxo waxaa lagu qiyaasaa 600-1000 mm sannadkii dhulka hela.

Qorrax aad u kulul wuu ku bixi karaa geedkani, gaar ahaan ilaa 20c-25c.

Banaanada iyo buuraha gaadhaya ilaa 800 mitirba wuu ka bixi karaa geedkani,
Geedkani waraabin ayuu u baahan yahay, gaar ahaan haddii lagu beero meel qalalan oo roobku ku yaryahay. Sida badan waraabin uma baahna geedkani haddii lagu tallaalo dhul biyaha leh.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedka lukiina waxyaabo aad u tiro badan ayaa loo isticmaalaa, waxaana ka mid aha kuwan soo socda.

**Xaabo:** Laamaha geedkani waxaa laga dhigtaa xaabo.

**Dhuxul:** Meelaha qaarkood qoriga geedkani waxaa laga sameeyaa dhuxul.

**Udubka:** Qori aad u toosan ayuu geedkani leeyahay, loona isticmaalo dhismayaasha yaryar. Waxaa kale oo mararka qaarkood laga helaa udubyo aad u waaweyn oo lagu dhisto guryaha.

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha kor u qaada nafaqada ciida ku jirta, gaar ahaan marka caleentiisu dhulka ku daadato, sidaas daraadeed, waxaa lagu dhafaa dalagyada beeraha.

Waxaa kale oo oo beeraleydu ku dhaqan waddankeena iyo waddamada kalaba ku tallaalaan geedkani beerahooda iyo guyahoodaba, si uu uga celiyo dalagyadda beeraha dabeylaha iyo dhaxantaba. Waxaa kale oo la sheegey in caleenta geedkan la cuno inta la karkariyo, hase ahaatee Soomaaliya isticmaalidiisu waxay ku kooban tahay badanaa faa'idooyinka aanu kor ku soo sheegey oo kaliya, caleentiisana lama cunno.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Geedkani iniinyahiisa marka la rabo in la beero, si fudud ayaa loo ururin karaa, sannadkii oo dhan waa suurogal in iniiyo laga soo guro geedaha. Halkii (1kg) ee iniiyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan 27000-3000 oo xabbo. Si iniinyaha looga saaro qalfoofka saaran waa in ruxruxaa.

Muddo dhawr sanno ah ayaa la keydin karaa iniinyaha geedkani, haddii lagu keydiyo cimilo caadi ah. Si dubka saaran iniinyaha loo jilciyo intaan la beerin ka hor, waxaa lagu ridaa biyo kulul oo gaadhaya ilaa 80c, waxaana haboon in loo daayo muddo 2 daqiiqo ah. Intaas ka dib waa in lagu ridaa biyo caadi ah ilaa 12 saacadood.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo badan ayaa geedkani loo kobcin karaa. Waxaa ka mid ah kuwan hoos ku qoran:

a) Waxaa suurogal ah in geedku inta u yar yahay la gooyo ka dibna lagu talaalo meeshii loogu talo galay.

b) Soomaaliya, sida badan waxaa iniinyaha geedka lagu beeraa bac, waxaa ka diba lagu xanaaneyaa beerta dhirkobcinta in muddo ah. Ciida bacda lagu beerayo iniinyaha waxaa lagu dhafaa fungus, si ay kor ugu qaadaan niitrogiinta ciida kujirta.

Marka iniinyaha lagu ridayo bacda waa in aan aad hoos loogu galin oo 0.5 cm dherer gaadhaya la dhigaa. Saddex xabbo oo iniinyo ah waa in bac walba in lagu ridaa. Muddo 8-9 maalmood ah ayey iniinyuhu ku soo baxaan, marka la beero, marka iniinyaha la beero boqolkiiba ilaa 50-85 ayaa soo baxa. Geedaha waa in la waraabiya, gaar ahaan inta ay beerta dhirkobcinta ku jiraan. Waxaa dhirta lagu xanaaneyaa beerta dhirkobcinta ilaa 10 todobaad. Mudadda geedkani ku jiro beerta dhirkobcinta waxaa suuragal ah in xididadiisu ka dhex dusaan bacda, si taas looga fogaado, waa in gaagaabiyaa.

Meelaha lagu tallaalayo geedkani waa iney leedahay ciid ay biyuhu ka dhex dusi karaan. Ciida dhumucdeedu le'eg tahay bataaxa ama dhoobadaba wuu ka bixi karaan geedkani. Marka la tallaalayo geedkani waxaa inta badan leysu jirsiiyaa ilaa saddex talaabo. Dhaawacayada ay u geystaan cayayaanka waa u adkeystaa geedkani, waxaana muhiim ah in xoolaha laga ilaaliyo 6 bilood ee u horeysa. Guud ahaan geedkani waxaa uu ka bixi karaa Soomaaliya meelaha hela waraabinta joogtada ah, gaar ahaan nawaaxigga webiga shabeelle.

Magaca: Liin ( Citrus aurantifolia):

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Liintu waxaa ay ka mid tahay geedaha miraha bixiya, caankana ku ah dalka. Waxaa ay ka baxdaa oo aad loogu beerey agagaarka webiga shabeelle, inkasta oo ay ka baxdo meelo kale oo dalka ka tirsan, sida degmooyinka Hargeysa,Boorama, iyo Boosaaso.

Geedkani waxaa uu si dabiici ah uga baxaa koonfurta Bari ee qaarada Aasiya, iyo waddamo kale oo ku yaal Kuleylayaasha.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedka liintu waa geed leh caleeemo qoyan, wuuna gaaban yahay. Dhererkiisu waxaa uu gaadhaa ilaa 5 mitir, dhumucda udubkiisuana mararka qaarkood ilaa 25 cm ayey gaadhaa.
Laamo badan ayuu geedkani bixiyaa.


Xidido dhaadheer ayuu uu liintu leeyahay, taas o ka mid ah astaamaha lagu aqoonsado.

# LIIN — CITRUS AURANTIFOLIA


Miraha (huruud-cagaar)




Qaabka Geedka





Ubaxa (cadaan)



Laamaha



Caleenta (doog)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Liintu waxay u baahan yahay roob gaadhaya ilaa 800 mm sannadkii. Dhulka cimiladiisu kulushahay, ee ilaa 20c-25c ayaa ay gaadheyso ayuu geedkani si fiican ugu baxaa.

Liintu waa geed ka bixi kara dhulka aadka u sareeya ee gaadhaya ilaa 1000 mitir, waxaase muhiim ah in la ogaado in dhulka fidsana geedkani ka bixi karo. Waraabin joogto ah uma baahan geedkani mar hadduu soo baxo.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Liintu waxay ka mid tahay khudaarta waddanka Soomaaliya ka baxda kuwa ugu muhiisan. Waxaa laga isticmaalaa dhamaan dalka oo dhan miyi iyo magaalaba, iyada oo weliba loo isticmaalo siyaabo kala duwan. Waxaa kale oo laga helaa xaabo la shito .

**5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):**

Iniiyaha geedkani waxaa ay ku dhex jiraan miraha, sidaas daraadeed waa in geedaha miraha fiican leh laga soo guro miraha, ka dibna waa in laga iniinyaha laga dhex saaraa. Waa in iniiyaha la qalajiyaa.

**5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:**

Wararka ku saabsan habaka ugu wanaagsa ee geedkani iniinyahiisa loo beero, iyo xanaanadda uu u baahana yahay waxaalagu daraa buuggani marka ay suurgal noqoto.

Magaca: Mahogani ( <u>Khaya senegalensis</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**


Geedkani waxaa uu ka baxaa koonfurta iyo goboladda dhexe ee Soomaaliya. Waxaa kale o lagu tallaaley, magaalooyinka ay Muqdisho iyo Dhuuso-Mareeb ka midka yihiin. Waxaa uu geedkani ka baxaa tuulooyin badan oo u dhaw webiyada.

Waddamada uu sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid ah Benin, Jaad, Gaambiya, Gana, Gini-Bisaaw, Maali, Nijeeriya, Sinigaal, Seyralyoon, Suudaan, Toogo, Ugaandha, iyo kuwo kale oo ku yaal Afrika.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Mahoganigu waa geed weyn oo sannadka intiisa badan leh caleemo qoyan. Dhererkiisu waxaa uu gaadhaa ila 20 mitir. Qolofta saaran jirrida sidaas uma dhumuc weyna, midabkeeduna waa madow ama cawlaan. Caleemaha geedkani wey is weydaarsan yihiin.

# MAHOGANY KHAYA SENEGALENSIS



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Waxaa uu ka mid yahay geedaha u adkeysta roob yarida ama meelaha roob la'aantu ka jirto. Roobka uu ku baxo waxaa lagu qiyaasaa inta u dhaxeysa 400-1530 mm sannadkii.

Waddamada ku yaal kulaylayaasha ayaa uu geedkani si gaar ah uga baxaa, heer kulka uu u baahan yahay waxaa uu gaadhaa 19C-29C.

Dhulka banaanada iyo buuraha badda ka sareeya ilaa 800 mitirba wuu ka baxaa geedkani.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxyaabaha ugu badan ee geedkani loo isticmaalo waxaa ka mid ah kuwan hoos ku qoran;

**Xaabo:** Soomaliya iyo waddamada kaleba ee ku yaal waxaa qoriga geedkani laga dhigtaa xaabo.

**Udubka:** Geedkani waxaa uu leeyahay udub aad ugu wanaagsan dhismaha guryaha, caana ku ah dunida, sidaas daraadeed aad ayaa loo isticmaalaa.

**Isu-dhafka:** Waddamada qaarkood ayaa dalagyadda beeraha ku dhafa geedkani, si ay uga helaan hadh wakhtiga qorraxdu kulushahay, isla markaan udubka geedkani ay ka helaan dakhli marka ay iibiyaan

Waxaa kale oo geedkan lagu tallaala badhtamaha magaalooyinka, si ay kor ugu qaadaan bilicda magaaloyinka, waxaa si gaar ah loogu beeraa jiddadka. Waxaa kale oo dadka qaarkood ka sameeyaan daawooyin ay ku daaweeyaan cuduradda.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Wararka ku saabsan habka ugu wanaagsan ee geedkani iniinyahiisa loo soo guro, isla markaana loo keydiyo, waxaa lagu darayaa buuggani marka ay suurgal noqoto.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Geedaha waddanka ka baxa, waa in la ilaaliyo lana xanaanneyo, si marka dambe iniinyaha looga guro.

Magaca: Maraa (<u>Acacia nilotica</u>).

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Tugaar. Maraagu wuxuu ka baxaa guud ahaan Soomaaliya oo dhan. Koonfurta Soomaaliya ayuu aad uga baxaa, gaar ahaan dhulka aan weli beeraha laga dhigin ee u dhaw labada webi ee Jubba iyo Shabeelle.

Geedkani waxaa kale oo lagu tallaaley degmooyinka ay ka midka yihin Laas-Canood, Ceel-Dheer, Ceel-Buur, iyo Dhuuso-Mareeb si ay dadku uga hadhsadaan kulka qorraxda.

Maraagu waxaa uu si dabiici ah uga baxaa Waddamada ku yaal Bariga, badhtamaha iyo galbeed Afrika. Waxaa ka mid ah waddamada uu ka baxo Burkino-faso, Kameruun, Jaad, Gaambiya, Mali, Nijer, Nijeeriya, Senegaal, Soomaaliya, Suudan, iyo kuwo kale.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Maraagu wuxuu ka mid yahay geedaha sida dhakhsaha ah u baxa. Cimrigiisuna wuu gaaban yahay, sida badana wadajir ayuu u baxaa, wuxuuna ku badan yahay dhulka ciidiisa biyaha badani ku jiraan.

Geedkani dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 14 mitir, wuxuuse inta badan u dhexeeyaa 3-5 mitir. Geedkani Udubkiisu wuu gaaban yahay, dhumucdiisuna waxay gaartaa mararka qaarkood ilaa 60cm. Jirridiisa midabkeedu waa cagaar, markuu geedku yaryahay, madow ayeyna isku badashaa markuu geedku weynaado.

Geedka maraagu laamahihiisu mararka qaarkood dhulka ayey taabtaan, laan walbana waxaa ka farcama laamo yaryar oo caleemaha geedku ku yaalaan. Kuwaas oo labolabo isaga soo hor jeeda. Qoddax aad u fiiqan, dhererkeeduna kala duwn yahay ayuu maraagu leeyahay. Dhererka qoddaxda geedkan wuxuu u dhexeeyaa 1-8cm.

Geedkani ubax aad u udgoon ayuu leeyahay, midabkiisuna huruud yahay. Xidido dhulka aad hoos ugu gala iyo kuwo dhinacyada u fidaba Maraagu wuu leeyahay. Udubka geedkani midabkiisu waa casaan iyo cawlaan isu dhafan.

# MARAA    ACACIA NILOTICA



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Maraagu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, ama roobku ku yar yahay. Roobka ku haboon bixitaanka geedkani waxaa lagu qiyaasaa ilaa 250- 750mm sannadkii.

Dhulka cimiladiisu kulushay ayuu geedkani si gaar aha uga bixi karaa, geedkani waxaa la wariyey inuu uu u adkeysan karo heerkul gaadhaya ilaa 50C. Hase ahaatee waxaa uu si wacan ugu bixi karaa heerkul u dhexeeya 24-28C.

Banaanada iyo buuraha dhererkoodu gaadhayo ilaa 500 oo mitirba, geedkani maraagu wuu ka baxaa. Dhulka biyahu fadhiistaan xilliga roobka ayaa ka mid ah dhulka uu geedkani aadka uga baxo.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedka maraaga faa'idoyin aad u fara badan ayuu leeyahay, waxaana ka mid ah, kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Maraaga qorigiisa xaabo ayaa laga dhigtaa,

**Dhuxul:** Soomaliya inkasta oo galoolka iyo cadaadu yihiin geedaha ugu badan ee dhuxusha laga sameeyo, haddana meelo ka tirsan Soomaaliya ayaa dadku geedka maraaga ka sameeyaan dhuxul.

**Dhismaha:** Geedka maraaga udubkiisa aqalada ayaa lagu dhistaa, gaar ahaan dhismayaasha fudfudud. Waxaa kale oo laga sameeyaa qorigiisa alaabta guryaha la dhigto sida kuraasta, miisaska, iyo wixii la mid ah.

**Daaqa:** Caleenta maraaga xoolaha ayaa daaqa, siiba meelaha cawsku ku yaryahay sida meelo ka tirsan Soomaaliya oo kale.

Waxyaabaha kale ee geedkani loo isticmaalo waxaa ka mid ah, iyada oo lagu tallaalo badhtamaha degmooyinka qaarkood si kor loogu qaado bilicda magaalooyinka.

Geedkarisku waxay ka sameeyaan daawooyin geedkan, taas oo lagu daaweyo cudurada dalka ka jira qaarkood. Maraagu waxaa kale oo uu leeyahay xabag la cunno,

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Geedkani Iniinyahiisa waxaa wanaagsan in laga soo ururiyo geedaha waaweyn hoostooda, si gaar ah waa in loo xushaa geedaha aadka u adadag lehna dherer iyo dhumuc labadaba.Geedka maraaga iniinyahiisa waxaa ku dahaaran qalfoof, si haddaba qolofta saaran iniinyaha looga saaro, waa in gacmaha lagaga saaraa.

Maraaga iniinyihiisa waxaa lagu keydin karaa bakhaarada caadiga ah muddo gaadheysa ilaa 1-2 sanno. Marka ay iniiyuhu yihiin qaar cusub uma baahna in diirka saaran la jilciyo. Marka ay muddo ku iniinyuhu bakhaaradda waxaa haboon in lagu rido biyo diiran, laguna daayo ilaa 12 saac, si diirka saaran u jilco dhakhsana ugu baxaan marka la beero.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Habab kale duwan ayaa geedka maraaga loo kobcin karaa.

a) Mararka qaarkood iniinyaha si toos ah ayaa loogu beeraa dhulka, ama qeyb ka mid ah geedka ayaa inta la gooyo lagu tallaala meel kale.

b) Soomaaliya, sida badan geedaha waxaa lagu kobciyaa beerta dhirkobcinta, intaan lagu tallaalin meeshii loogu talo galay. Geedka iniinyahiisa waxaa lagu beeraa bac, waxayna sida badan ku soo baxaan 7 maalmood, boqolkiina 60-90 ayaa soo baxa.

Xidido dhaadheer ayuu geedkan la soo baxaa mudadda uu beerta dhirkobcinta ku jiro, sidaad daraadeed waa in la gaagaabiyaa. Waxaa geedaha yaryar lagu xanaaneeyaa beerta dhirkobcinta ilaa muddo 4 bilood ah.

Maraaga waxaa haboon in lagu tallaalo meelaha u dhaw webiyadda oo leh ciid aad ugu wanaagsan geedkani bixitaankiisa. Marka la tallaalayo waxaa haboon in leysu jirsiiyo labo talaabo ama saddex talaabo ( 2*2m / 3*3m).

Hadday dhacdo in iniinyaha si toos ah dhulka looga rido waa in 3 xabbo mid walba lagu ridaa. Si uu dhakhso ugu baxaan geedahu waa in dhirta kale ee biyaha iyo macdanaha kula tartameysa laga jaraa, gaar ahaan labada sanno ee u horeysa. Meeshii ay suurogal tahay waxaa haboon in la dhiiri galiyo sidii geedkani si dabiici ah ugu soo bixi lahaa, madaama uu ka mid yahay geedaha iskood u baxa. Geeduhu waa iney helaan ileyska qorraxda Ilesyka qorraxdana siiba inta uu geedku yaryahay.

Magaca: Mareer ( Cordia sinensis)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh, magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Madheedh.

Geedkani waxaa uu ka baxaa gobolada koonfureed ee Soomaaliya, sidaa Baay, Shabeellada Hoose, Jubbada Hoose, Jubbada Dhexe iyo meelo kale oo ka tirsan Soomaaliya.

Waddamada uu geedkani sida dabiiciga uga baxo, waxaa ka mid ah, Itoobiya, Gaana, Hindiya, Kiiniya, Maali, Yemen, Nijer, Kameruun, Sacuudi Caraabiya, Senegaal, Siirilanka, Suudan, iyo Toogo.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Mareertu waa geed aan sidaas u weyneyn, dhererkiisuna marmar ayuu gaadhaa 5 mitir, laakiin sida badan wuu ka gaaban yahay. Caleemaha geedkani wey iska soo hor jeedaan.
Ubax aad u udgoon ayaa geedkani bixiyaa.

Miraha geedkani qaab wareegsan yihiin, waxayna miruhu leeyihiin dheecan is jiijiita. Qori aad u adag ayuu geedka mareertu leedahay.

MAREER CORDIA SINENSIS

Miraha (mariin-huruud)




Qaabka Geedka


Ubaxa (cadaan)



Laamaha



Caleenta (cawlaan-doog)



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Geedka mareertu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, isla markaan u adkeysta abaaraha.
Roobka uu u baahan yahay geedkani si uu baxo waxaa lagu qiyaasaa 300mm sannadkii iyo meelaha kale ee uu ka da'o roob intaas ka badan.

Mareertu waxaa ay ka baxdaa Soomaaliya meelaha ugu kulul, isla markaan ugu roobka yar, sida Waqooyi Bari, iyo gobolada Dhexe.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedkani waxyaabo badan ayaa loo isticmaala, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo. Geedkani** laamahiisa iyo qorigiisa waxaa laga dhigtaa xaabo.

**Dhismo:** Waxaa dadka qaarkood ka sameyaan qoriga mareerta, qalab ay ka midka yihiin daababka la galiyo guduntaa iyo kuwo kale.

**Daaqa:** Caleenta geedka waxaa daaqa xoolaha, gaar ahaan xilliga roob la'aanta jirto ayaa Geelu daaqaan.

Miro la cunno oo ay aad u jecelyihiin carruurta iyo dadka waaweynba ayuu geedkani leeyahay. Meydhax ayaa laga sameeyaa jirridiisa qolofta saran. Daawooyin ayaa dadka qaarkood ka sameeyan.

**5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):**

Geedkani iniinyahiisa waxaa haboon in la soo ururiyo bisha Diisambar, gobolada laga soo guri karaa waxaa ka mid Baay, Shabeellada Hoose, Jubbada Dhexe, iyo Jubbada Hoose.

Muddo ku dhaw ilaa dhawr bilood ayaa la keydin karaa iniinyaha ama abuurka geedkani.

**5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:**

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha sida dabiiciga ah u baxa marka ay helaan cimilo ku haboon. Mareertu dib ayuu u soo baxaa haddii la gooyo. Sida badan, shimbiraha ayaa fidiya iniiyaha geedkani.

Waxaa iniinyaha geedkani si toos ah loogu beeri karaa dhulka.

Magaca: Miraa-Miri ( Schinus molle)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Miraa-miridu waa geed lagu beerey qeybo ka mid ah gobollada waqooyi ee dalka, gaar ahaan degmooyinka ayka midka yihiin Hargeysa, Boorama, Burco, Sheekh, iyo meelo kale oo u dhaw dhulka buuraleyda ah.

Waddamada uu geedkani sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid ah Beeru, Arjantiina, iyo qaar kale. Waxaa kale oo lagu tallaaley oo uu hadda si dabiici ah uga baxaa koonfurta Ameerika, iyo Megsiko.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Guud ahaan, miraa-miridu waa geed gaaban oo leh caleemo qoyan sannadkii oo dhan. Ma laha wax qoddax ah, dhererkiisuna waa uu ka gaaban yahay 10 mitir, udubkiisuna sidaas oo kale ayuu u gaaban yahay. Xididadiisuna ma dhaadheera.

Cayayaanka uu aboorku ka midka yahay ayaa dhaawac u geysta qoriga geedkan.


MIRAA_MIRI — SCHINUS MOLLE

Miraha



Qaabka Geedka

Ubaxa



Caleenta



Iniinyo

Laamaha



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Miraa-miridu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, isla markaana wuu u adkeystaa abaaraha. Muddo ku dhaw ilaa 4-8 bilood ayuu roob la'aanta u adkeysan karaa geedkani. Waxaana lagu qiyaasaa roobka uu u baahan yahay geedkani 300-6509 mm sannadkii.

Heerkul gaadhaya 12-20c ayuu geedkani ku baxaa. Si gaar ah, waxaa uu uga baxaa dhulalka sare ee gaadhaya ilaa 1000-3500 mitir.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedkani waxyaabo fara badan ayaa loo isticmaala Soomaaliya iyo waddamada kaleba waxaa ka mid ah:

**Xaabo:** Geedkani dad ayaa xaabo ka dhigta laamihiisa ay

**Dhuxul:** Soomaaliya dhuxusha laga sameeyo galoolka, cadaada, iyo qaar kale ayaa laga isticmaalaa, laakiin waddamada qaarkood ayaa dhuxul ka sameeya qoriga geedk miraa-mirada.

Geedkani beeraleyda qaarkood waxay kuy tallaalaan agagaarka guryahooda, si uu ugu noqdo gabadaan ka celiya dabaylaha iyo kulka.

Ujeedada ugu weyn ee geedkani loogu tallaaley magaalooyinka aynu soo sheegney waxaa ka mid ah in dadku ka hadhsadaan kulka qorraxda, isla markaana kordhiya bilicda magaalooyinka.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha geedkani waxaa laga soo ururin karaa magaalooyinka uu geedkani ka baxo, haatana leh geedo qaan gaadhay oo waaweyn, gaar ahaan agagaarka degmada Sheekh.
Halkii (1kg) ee iniinyaha geedka waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan ilaa 35000-65000 xabbo.

Geedka miraa-mirida iniinyahiisa waxaa ku dahaaran qalfoofka, haddaba si qolofta saaran looga saro waa in dusha sare laga cadaadiyaa.

Waxaa la keydin karaa iniinyaha geedkan muddo dhan ilaa saddex bilood. Ka hor intaan iniinyaha la beerin waxaa haboon in la jilciyo diirka dusha kaga dahaaran iniinyaha, iyada oo lagu dhex ridayo biyo muddo dhan 24 saac, hase ahaatee waxaa muddan in la xasuusnaado in iniinyaha la beeri karo iyada oo aan hawsha aan kor ku sheegeny la marin

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Geedkani iniinyahiisa waxaa wanaagsan in lagu beero Bac, ka dibna waa in lagu xanaaneeyo beerta dhirkobcinta muddo ku dhaw 6 bilood.

Marka iniinyaha lagu beerayo bacda, waa in ciid aad u yar dusha laga saaro iniinyaha. Muddo 2-3 todobaad ka dib ayey iniinyaha badankoodu soo baxaan. Iniinyaha la beero boqolkiiba 50 ayaa soo baxa.

Dhulka lagu tallaalayo geedkani waa in uu yeesha ciid gudbin karta biyaha. marka la beerayo geedaha waa in la kala fogeeyaa, isla mrakaana la jaraa dhirta kale ee kula tartameysa biyaha iyo nafaqadda kale.

Magaca: ( Prosopis cineraria)

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:

Inkasta oo geedkani lagu tallaaley waddamo badan oo ku yaal kuleylayaasha, Soomaaliya dhawaan ayaa la soo galiyey, gaar ahaan bilowgii 1980. Waxaa si gaar ah uu uga baxaa bacaadka Shallambood iyo Jalalaqsi.

Waddamada uu geedkani sida dabiiciga ah uga baxo waxaa ka mid Afgaanistaan, Hindiya, Iiraan, Cumaan, Yemen, Sacuudi Caraabiya, Isu-tagga Imaaraadka Carabta iyo kuwo kale.

## 2. ASTAAMAHA GEEDKA:


Geedkani Waxaa uu ka mid yahay geedaha sida dhakhsaha ah u baxa marka la beero, calaamihiisuna sannadkii oo dhan waa qoyan yihiin. Dhererka geedkani waxaa lagu qiyaasaa inuu gaadho 5-9 mitir. Udub qalqaloocan ayuu leeyahay geedkani.

Geedkani miro dhaadheer oo dhuudhuuban ayaa ka mid astaamaha lagu aqoosan karo. Dadka qaarkood ayaana mirahaas cuna. Xidido aad u dhaadheer ayuu geedkani leeyahay oo meelaha qaarkod gaadha ilaa 3 mitir.

Cayayaanku si fudud dhaawac uguma geysan karaan geedkani waayo adkeysi ayuu leeyahay.


# FROSOPIS CINERARIA

Miraha (mariin)



Qaabka Geedka

Ubaxa (huruud-doog)



Laamaha



Caleenta (doog-cawlaan)



Iniinyo

### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Geedkani waxaa u ka mid yahay geedaha u adkeysata roobka la'aanta iyo roobka yarba. Waxaa uu geedkani roob la'aan u adkeysan karaa muddo 6-8 bilood. Roobka uu u baahan yahay si uu u baxo waxaa lagu qiyaasaa ilaa 400-800 mm sannadkii.

Dhulka cimilada kulul ayuu geedkani si gaar ah uga baxaa,, gaar ahaan ilaa 21-28C ayaa ah heerkulka ku haboon bixitaanka geedkani. Waxaa muhiim ah in geedkani lagu tallaalo dhulka biyuhu ku jiraan.

### 2. ISTICMAALKA GEEDKA

Waxyaabaha loo isticmaalo gedkani wey badan yihiin, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Waxyaabaha geedkani loo isticmaalo xaabada ayaa ka mid ah, taas oo ka mid faa'idoyink ugu waaweyn ee loo sticmaalo.

**Dhuxul:** Waddamada qaarkood ayaa dhuxul ka sameeya laamaha iyo udubka geedkani.

**Dhismo:** Meelaha qaarkood ayaa udubka geedka loo isticmaalaa dhismayaasha, gaar ahaan kuwa aan aadka u waaweyneyn.

**Daaqa:** Caleemaha geedkani waxaa daaqa xoolaha.

Waxaa kale oo geedkani lagu dhex dhafaa dalagyadda beeraha, waayo marka caleentiisu qalasho ey dhulka ku dhacdo waxay kor u qaadaa nafaqadda ciida ku jirta.

Gaar ahaan waxaa la sheegey in geedkani Netrogiinta ciida ka nuugo. Waxaa geedkani leeyahay Xabbag taas oo dadku cunaan. Daawooyin ayaa dadka qaarkood ka sameeyaan. Beeraleyda ku dhaqan Soomaaliya iyo waddamada kaleba waxaa ay ku beeraan agagaarka beerahooda si uu geedkan ugu celiyo kulka iyo dabaylaha.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Geedkani iniiyaha waxaa haboon in laga soo ururiyo meelaha ay sida dabiiciga ah uga baxaan, gaar ahaan Hindiya, Bakistaan iyo meeshii kale ee leh geedo ku haboon in iniinyahooda laga guro.

Soomaaliya, waxaa iniinyaha geedkani laga soo ururin karaa Jalalaqsi ama Baraawe oo leh geedo qaar gaarey.
Halkii (1kg)'ee iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan ugu yaraan 25000- 27000 oo xabbo.

Muddo dhawr sanno ah ayaa la keydin karaa iniinyaha geedkani. Intaan la beerin ka hor waxaa haboon in diirka saaran iniinyaha la jilciyo. Biyo diiran ayaa lagu ridi iniinyaha, ka dibna waxaa loo daayaa ilaa 24 saac.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo kale duwan ayaa geedkani loo kobcin karaa, waxaana ka mid ah,

a) Mararka qaarkood iniinyaha waxaa lagu beeraa xero, ka dibna inta la gooyo ayaa toos loogu tallaalaa meeshii loogu talo galay.

b) Waxaa kale oo suurogal ah in iniinyaha dhulka lagu beero, gaar ahaan meeshii la rabay in geeduhu ka baxaan.

Labo todobaad ayey iniinyuhu ku soo baxaan badankoodu, Boqolkiiba 60-90 ayaa iniinyahu la beero soo baxa.
Waxaa lagu xanaaneeyaa geedaha beerta dhirkobcinta ilaa muddo gaadheysa 2 bilood. Mudadda geeduhu ku jiraan beerta dhikrobcinta waxaa haboon in xididida la gaagaabiyo.

Cayayaanka uu ka mid yahay ayaxu ayaa la sheegey in uu dhibaato u geysto geedkani, taas oo keenta in qaabka geedku xumaado. Mudadda uu geedku yaryahay waxaa haboon in laga jaro geedaha kale ee kula tartamaya biyaha iyo nafaqadda.

Magaca:( <u>Prosopis chilensis</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Waxaa geedkan uu ka mid yahay geedaha waddanka la soo galiyey, 10kii sanno ee ugu dembeeyey. Waxaa lagu tallaaley meelo ka mid Soomaaliya, kuwaas oo ay ka midka yihiin Degmooyinka Beledweyne, Luuq, Shallambood, Jilib, iyo meelo ka tirsan gobolka Bari, iyo buuraleydda waqooyiga Soomaaliya.


Waddamadda uu geedkani sida dabiiciga ah uga baxo waxaa ka mid ah Arjantiina, Boliifiiya, Jili, iyo Beeru.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedkani waa geed aan sidaas u sii weyneyn, waxaana uu ka mid yahay geedaha ay caleemuhu ka daataan, xilliga roob la'aantu jirto. Geedkani dhererkiisu waxaa lagu qiyaasaa inuu gaadho ilaa 8-10 mitir. Udubkiisu waa gaaban yahay, laamo dhawrka jiho u kala baxa ayuu leeyahay.

Miraha geedkan waa dheeryihiin,isla markaana qaloocan yihiin. Ubax wuxuu bixiyaa cagaar ah, hase ahaatee huruudin ku jirto. Xiddido dhaadheer malaha geedkani, intooda badana dhulka xaggiisa sare ayey ku baahaan.

PROSOPIS CHILENSIS



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedkani xilli abaareedka wuu u adkeystaa, roobka u u bahan yahay si uu ugu baxo waxaa lagu qiyaasey inta u dhaxeysa 200-400 mm sannadkii dhulka hela. Kulka qorrada uu u baahan yahay waa ila 27c. Buuraha dhererkoodu gaadhayo ilaa 2900 mitir ayaa la sheegey inuu geedkanika bixi karo.

## 2. ISTICMAALKA GEEDKA

Waxyaabaha loo isticmaalo geedkani wey badan yihin, kuwan hoos ku qoran ayaana ka mid ah.

**Xaabada:** Waxaa laamaha iyo udubka laga dhigtaa xaabo ay dadku shitaan.

**Daaqsa:** Caleenta geedkani waxaa daaqa xoolaha.

Waxaa geedkani leeyahay hoos ama hadh ay dadka iyo xooluhuba ka dugsadan kulka qorraxda, arrintan oo ka mid sobobaha geedkan loogu beero badhtamaha magaalooyinka. Waxaa kale oo ka mid ah sobobaha logu talaalo agagaarka degmooyinka in lagu qurxiyo bilicda magaalooyinka .
Geedkariska dadka ahi waxay ka sameeyaan geedkani daawooyin ay ku daaweeyann cuduraada ku dhaca dadka qaarkood.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyahay geedkani waxaa haboon in laga soo ururiyo, geedaha u muuqda iney caafimaad qabaan, iyada oo laga eegayo dhererkooda iyo dhumucda jirridooda.

Marka la doonayo in iniinyaha geedkan la keydiyo waa in iyagoo ku dhex jira qalfoofka la keydiyaa. Waa la keydin karaa iniinyaha marka laga saaro qalfoofka saaran.

Intaan iniinyaha la beerin ka hor waa in diirka saaran la jilciyaa, si marka la beero ay dhakhso ugu so baxaan.
Si arrintan loo fuliyo waa in biyo karkaraya lagu ridaa iniinyaha, ka dibna la qaboojiyaa.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Sida kaliya ee geedkani loo kobcin karo waa in bac iniiyaha marka hora lagu beeraa, isla markaana lagu xanaaneeyaa beerta dhirkobcinta, muddo dhan saddex bilood.
Marka iniinyaha la beero boqolkiiba 40-80 ayaa soo baxa. Waxaa suurogal ah in xididada geeduhu ka dhex baxaan bacda, mudadda ay ku dhex jiraan bacda, sidad daraadeed waa in la gaagaabiyaa.

Magaca: (Prosopis juliflora)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**


Geedkani waxaa la soo galiyey Soomaaliya 10-20kii sanno ee u dembeeyey, waxaana si gaar ah loogu beerey bacaadka Shallambood, agagaarka Jalalaqsi, Arabsiyo, Luuq, Baraawe, iyo meelo kale oo dalka ka tirsan.

Waddamada uu geedkani sida dabiiciga uga baxo, waxaa ka mid ah kuwa ku yaal badhtamaha qaarada Amerika, iyo waqooyiga Ameerika.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Sida geedo badan oo kale ayaa caleemu ka daataan geedkani, gaar ahaan xilliga roob jiilaalka ah ee la'aantu jirto. Geedkani dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 3-12 mitir. Udub gaaban ayuu leeyahay, kaas oo dhumucdiisu gaadho ilaa 1mitir. Miro dhaadher oo dhuudhuuban ayuu, xididadiisuna aad ayey u dhaadheer yihiin, mararka qaarkood ilaa 20 mitir ayaa dhererkoodu gaadhaa. Qoriga geedkan waa adag yahay.

# PROSOPIS JULIFLORA



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Dalalka ku yaal kuleylayaasha, isla markaana uu roob ku yar yahay ayuu geedkani ka baxaa. Roobka uu u baahan yahay waxaa lagu qiyaasaa 150÷750 mm sannadkii.

Geedkani si fiican ugama bixi karo meelaha ay cimildu aadka u qabowdahay.

Dhulka banaanada ah iyo buuraha dhererkoodu gaadho 1500 mitirba wuu ka bixi karaa geeekani. Xeebaha Kiiniya ayaa aad loogu tallaaley sannadihii ugu dembeeyey.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Soomaaliya iyo waddamada kale waxyaabo fara badan ayaa looga isticmalaa, waxaana ka mid ah kuwan aan hoos ku sheegney.

**Xaabo:** Dadka ku dhaqan miyiga iyo magaaladaba, waxaa ay ka helaan geedkani xaabo ay ku karsadan cuntada ama ka shitaan dhaxanta.

**Dhuxul:** Waddamada qaarkood ayaa dhuxul ka sameeya qoriga geedkani, hase ahaatee Soomaaliya dhuxul lagama sameeyo.

**Daaqa:** Caleemaha geedkani waxaa daaqa xoolaha.

Dadka qaarkood ayaa aqaladda ku dhista qoriga ay ka helaan geedkani, waxaa kale oo dadka iyo xooluhuba ka hadhsadaan geedkani kulka qorraxda.

Daawoooyin ayaa dadka qaarkood ka sameeyaan geedkani. Bilicda magaalada ayuu geedkani kor u qaadaa, gaar ahaan marka lagu tallaalo agagaarka jidadka.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Ururinta iniinyaha geedkani way fududahay, waayo iniinyaha si toos ah ayaa dhulka looga soo ururin karaa.

Si loo keydiyo iniiyaha geedkani waa in la dhigaa meel qalalan oo qabow. Intaan iniinyaha la beerin ka hor waa diirka saaran la jilciyaa, taas oo lagu jilcin karo iyada oo biyo kulul lagu rido iniinyaha, ka dibna lagu daboolo, ilaa 24 saac waa iney ku jiraan biyaha. Waxaa kale oo lagu jilcin karaa iyada oo diirka la xoqo.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabaha geedkani loo kobcin karo wey badan yihiin, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran:

a) Mararka qaarkood iniinyaha si toos ah ayaa loogu beero dhulkii la rabay inuu ggedkani ka baxo.
Waxaa la sheegey in iniinyuhu hore u baxaan marka ay soo dhex maraan, dheef-shiidka xooluhu.

b) Soomaaliya waxaa iniinyaha lagu beeraa bac, si furasada iniinyahu ku soo baxayaano kor loogu qaado waa in 2 -3 xabbo oo iniinyo ah lagu ridaa bac waliba.

Boqolkiiba ilaa 80-90 ayaa iniinyaha la beero soo baxa. Mudadda geedahu yaryar yihiin, waxaa haboon in lagu xanaaneeyo loo lagu kobciyo beerta dhirtakobcinta muddo 10-12 todobaad ah. Xididada geedaha waa in la gaagaabiyaa intey beerta dhircobcinta ku jiraan.

Marka la tallaalayo geedkani waa in ciida qalalsan ee bataaxa ah lagu tallaalaa. Marka uu geedkani jiro 10-15 sanno ayaa xaabo laga dhigan karaa..

Magaca: Baar ( Hyphaene compressa)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani Magacyada kale ee looga yaqaan Soomaaliya Waxaa ka mid ah Qoon. Geedkani waxaa uu si gaar ah uga baxaa koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan agagaarka labada webi, Shabeelle iyo Jubba. Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh, dadkuna aad ayey u jecel yihiin mirahiisa macaan.

Dhulka uu sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid ah qaarada Afrika oo dhan guud ahaan, laga bilaabo Musambiig, ilaa Soomaaliya. Sida badan wuxuu ka bilaabmaa xeebaha ka dibna wuxuu ku fidaa dhulka intiisa kale.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Geedkani waa geed weyn, astaamahiisa ugu muhiimsan ee geedkani waxay tahay isaga oo bixitaankiisu ku kooban yahay dhulka u dhaw webiyada, gaar ahaan dhulka loo baneeyey beeraha. Geedkani dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 16 mitir. Tiir aad u dheer, una toosan ayuu ayuu leeyahay geedkani.
Laamaha geedkani ma badna, waxaana u caado ah inuu bixiyo 4 laamood oo kaliya.

Ubaxa dheddig iyo kan lab waxay ku kala yaalaan labo geed oo kala gaar ah. Miraha Qoonku waa mariin, aadna wey u waaweyn yihin.


# QOON

# HYPHAENE COMPRESSA

Miraha (mariin)




Qaabka Geedka





Ubaxa


Lab




dhedig




Laamaha






Caleenta



Iniinyo



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Baarku waxaa u si gaar uga baxaa baxaa agagaarka labada webi Jubba iyo Shabeelle.

Cimilada kulul ayuu ka baxaa. Roobka uu u baahan yahay waxaa lagu qiyaasaa ilaa 100- 600 mm sannadkii.

Dhulka banaan iyo dhulka badda ka sareeya 1400mitirba wuu ka bixi karaa geedkan. Meelaha lagu tallaalayo geedkani waa iney biyo leeyihiin.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Faa'idooyinka geedkani wey badan yihiin, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Xaabada ay shitaan dadka qaarkodd ayaa waxay ka soo urursadaan geedkani.

**Dhismo:** Tiirarka laga helo geedkani waxaa ay dadku u isticmaalan dhismaha aqaladooda.

**Cunto:** Baarku wuxuuu leeyahay miro la cunno oo ay dadku aad u jecelyihiin . Waxaa kale oo dadka qaarkood cunaan caleenta geedkan.

Qoonka dadka qaarkood ayaa ka sameeya daawo ay ku daweeyaan cudurada ku dhaca dadka qaarkood.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha la doonayo in la beero, waxaa loo baahan yahay in laga soo ururiyo geedaha dhererka iyo dhumucdaba leh. Halkii (1kg) oo iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney 5 xabbo ku jiraan. Muddo aad u dheer lama keydin karo iniinyaha geedkani.

Madaama diirka saaran iniinyuhu adag yihiin, intaan la beerin ka hor waa in la jilciyaa , waxaa lagu ridaa haydroklorik asid ilaa 20 daqiiqo. Waxaa muhiim ah in dadka khibrada kaliya leh ay sameeyan=an hawshani.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Baarku waxaa uu ka mid yahay geedaha iniinyahooda sida tooska ah loogu beero dhulka, mudadda ay geedahu yar yihiin waxaa muhiim ah in laga ilaaliyo in xaabada laga gurto.

Magaca: Qurac (Acacia tortilis)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Geedkani magacyada kale ee looga yaqaan Soomaaliya waxaa ka mid ah Aqab, iyo Qudhac. Quracu waa geed caan ku ah Soomaaliya, kana baxa gobolada iyo degmooyinka Soomaaliya badankooda.

Waxaa kale oo Quracu ka baxaa badhtamaha magaalooyinka badan oo ay ka mid yihiin Hargeysa, Burco, Muqdisho iyo kuwo kale. Geedkani wuxuu si dabiici ah uga baxaa waddamada ku yaal bariga dhexe sida Sacuudi Caraabiya, iyo guud ahaan waddamada ku yaal Afrika.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Quracu waa geed weyn, qaab dalad furan oo kale ayuuna u baxaa. Dushiisa sarena wey weyntahay, geedka quraca dhererkiisu wuxuuu sida badan u dhexeysa 1.5-18 mitir. Geedkani dhumucda udubkiisu mararka qaarkood waxaa lagu qiyaasaa ilaa 20cm.

Sida badan hal jirrid oo kaliya ayuu leyahay,laakiin dhawr udub ayuu marmar lyeeshaa. Jirridiisa midabkeedu waa cawlaan, laamihiisuna dhinacyada ayay u kala baxaan.


Quracu ubaxa midabkiisu yahay cadaan ayuu leeyahay. Qodaxda geedkani labolabo ayey isaga soo horjeedaa, dhererka iyo qaabka qodaxda geedkani wey kala duwantahay. Mararka qaarkood wey gaagaaban tahay, qaloocsan tahayna. Quracu wuxuu leeyahay xidido badan oo dhawr jiho u kala baaha.


QUDHUC ACACIA TORTILIS

Miraha (huruud-cawlaan)



Qaabka Geedka






Ubaxa (cadaan-huruud)




Caleenta



Iniinyo



Laamaha



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Qudhaca waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar lehm, ama roobku ku yar yahay.
Geedkani waxaa uu ka baxa dhulka cimiladiisu kulushahay.

Waxaa lagu qiyaasaa in qudhacu ka baxo dhulalka hela roob gaadhaya 100-800 mm sannadkii. Waxaase uu si wacan ugu baxaa marka uu helo roob ka sareeya 500 mm sannadkii.

Qorraxda kulul wuu u adkeystaa geedkani, siiba heerkulka ah 20-28C. Dhulalka qabowna wuu ka bixi karaa quracu.
Dhulka banaanada ah iyo buurahaba ka sareeya badda ilaa 600-1000mitirba geedkani waa ka baxaa.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Waxyaabaha loo isticmaalo geedkani Soomaaliya iyo waddamada kale wey fara badan yihiin. Waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

**Xaabo:** Dad badan oo ku dhaqan magaalooyinka iyo miyigaba ayaa ayaa xaabaday shitaan ka soo urursada geedkan.

**Dhuxul:** Inkasta oo aan Soomaaliya geedkani dhuxul laga sameyn, haddana waddamada kale ayaa dhuxul qudhaca ka sameeya.

**Daaqa:** Xoolahu caleenta geedkani aad ayey u daaqaan, madaama cawsku ku yaryahay Soomaaliya, qudhaca iyo geedaha kale ee la mid ka ah waa lagama maarman.

**Bacaad Celinta:** Qudhacu wuxuu ka mid yahay, geedaha sida dabiiciga waddanka uga baxa, isla markaana qeyb weyn ka qaata celinyta bacaadka. Waxaa dhawrkii sanno ee u dembeeyey lagu tallaaley bacaadka Shallambood, iyo meelo kale.

Bacaad celinta ka sakow, waxaa geedaha lagu beerey bacaadka lage heli karaa xaabo iyo daaqsin, marka ay lagama maarmaanka noqoto. Quracu waxaa uu siiyaa dadka iyo Xoolahaba hoos ay ka galaan kulka qorraxda. Qorriga qudhaca waxaa lagu dhistaa gurayaha sida aqal Soomaaliga oo kale. Waxaa kale oo la aqoonsaday in Qudhacu ka mid ka yahay geedaha caleentiisu markey daadato ay kor u qaado nafaqada ciida. Ooda ay xerooyionka ugu sameeyan xoolaha dadka reer guuraaga ah waxay ka soo ururiyaan geedaha ay ka midka yihiin qudhaca.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha waxaa laga soo ururiyaa geedaha waaweyn hoostooda, si iniinaha qafoofka saaran uga baxaan, waxaa lagu keydiyaa meel qalalsan waana la daboolaa ilaa iniinyaha badankoodu dibeda soo baxaan.

Qudhaca iniinyihiisa waxaa la keydin karaa muddo dhawr sanno ah, gaar ahaan haddii lagu keydiyo meel aan qoyaneyn, isla markaana qabow, hawaduna aaney si fudud u soo gali karin.

Ka hor intaan iniinyaha la beerin waa in biyo yara diiran lagu ridaa muddo dhan 24 saac, si qoloftu u jilicdo, uguna soo baxaan si dhakhso ah marka la abuuro.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo kale duwan ayaa geedkani loo kobciyaa, waxaana ka mid ah kuwan hoos ku qoran.

a) Soomaaliya geedkani iniinyahiisa waxaa lagu beeraa bac, iniinyahaas waxay soo baxaan afar maalmood ka dib..
Inta geeduhu yar-yar yihiin waxaa lagama maarmaan ah in laga ilaaliyo kuleyka xadi dhaafka ah ee qorraxda.
Sidaas daraadeed waa in hadh loo sameeyaa.

Waxaa geedaha lagu xanaaneeyaa geedaha beerta dhirkobcinta ilaa 3 bilood. Meesha lagu tallaalayo geedkani waa iney yeelataa ciid fudud. Waxaa kale oo la aqoonsaday in ciida u dhaw nawaaxciga webiyadu tahay mid uu ka bixi karo qudhacu.

Marka la beerayo geedkani Waxaa habon in leysu jirsiiyo saddex (3 * 3 )mitir haddi lagu tallaalayo meel aan weli dhir hore jirin. Muddooyinka hore waa in dhirta kale ee dhibaatada u geysan karta geedaha intey yar-yar yihiin laga jaraa.

Qudhacu wuxuu ka mid yahay geedaha u adkeysta daaqida xadi dhaafka ah sidaas daraadeed waa in daaqida xoolaha laga ilaaliyaa, haddii kale geed hoosaad ayuu isu badalaa.

Magaca: Qumbe ( <u>Cocos nucifera</u>)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Soomaaliya meelo badan ayuu geedkani ka baxaa, dhulka balaaran ayaa lagu tallaalay, gaar ahaan agagaarka labada webi Shabeelle iyo Jubba. Waxaa uu ka baxaa magaaloyinka ay ka midka yihiin Qoryooley, Janaale, Jilib, iyo Kismaayo. Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh.


Qumbahu waxaa uu si dabiici ah uga baxaa waddamada ku yaal koonfurta bari Aasiya, galbeedka jasiiradaha ku yaal badweynta baasifiga. Waxaa qaarada Afrika la soo galiyey kun sanno ka hor.

**4. ASTAAMAHA GEEDKA**


Qumbahu waa geed leh hal udub oo kaliya, caleemo qoyana sannadkii oo dhan waa laga helaa. Dhererka geedkani waxaa uu u dhexeeyaa 20-25 mitir. Dhumucda udubkiisu waxay gaadhaa ilaa 25cm. Qolofta saaran jirrida geedku waxay leedahay midab cawlaan iyo mariin isu dhafan. Ubaxa uu geedkani bixiyo waxaa uu u kala baxaa lab iyo dheddig, waxaana lagu kala sooci karaa, ubaxa lab ayaa yar oo ka dheddig ayaa aad u weyn.
Dhawr xidid oo aan kala qeybqeybsamin ayuu geedkani leeyahay midabkooduna uu isugu jiro casaan iyo mariin. Ilaa 4-5 mitir ayey hoos dhulka u galaan, wuxuuna hareeraha u fidaa ilaa 6-7 mitir. Biyuhu waxyeelo ma gaadhsiin karaan qoriga geedkani. Miraha si joogto aha ayuu u soo saaraa sannad walba.

QUMBE — COCOS NUCIFERA

Miraha (mariin-doog)




Qaabka Geedka





Ubaxa



Laamaha



Caleenta



Iniinyo



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedkani waxaa uu u baahan yahay biyo badan, roobka uu dhulka uu ku badan yahay ayaa qumbahu si gaar ah uga baxaa.
Waxaa lagu qiyaasaa roobka uu ku baxo ilaa 1000-2500 mm sannadkii.

Waddamada cimiladoodu kulushahay ayuu si gaar ah uga baxaa geedkani, ilaa 20-27C ayuu ku baxaa geedkani. Waraabin ayuu u baahan yahay haddii roobku yaraado.

## 2. ISTICMAALKA GEEDKA

Qumbahu waxaa uu kaga duwan yahay geedaha kale oo laga helaa miro ay dadku cunaan. Xaabo ay dadku shitaan ayaa geedkani qumbaha laga helaa.

Waxaa kale oo uu leeyahay qori ay dadku ku dhistaan guryaha. Waxaa kale oo geedkan lagu beeraa bacaad celinta, si uu u joojiyo bacaadka socda. Waxaa kale oo uu leeyahay geedkani hadh kaas oo dadka iyo xoolahaba u ah faa'ido weyn, gaar ahaan marka qorraxdu aadka u kulushahay. Waxaa kale oo Qumbahu kor u qaadaa bilicda magaalooyinka. Daawo ayeyn dadka qaarna ka sameeyaan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha geedkan waxaa laga soo ururin karaa, geedaha loo arko iney yihiin kuwo caafimaad qaba. Geedaha hoostooda ama dushooda ayaa iniinyaha laga soo ururin karaa.

Muddo 2 sanno ku dhaw ayaa iniinyaha qumbaha la keydin karaa, iyaga ooo aaney wax dhibaato ahi soo gaadhin, gaar ahaan haddii la dhigo haddii la dhigo meel qabow oo qalalan, isla markaana hawadu gali karto ama ka bixi karto.
Si diirka saaran iniinyaha loo jilciyo intaan la beerin ka hor, biyo ayaa lagu ridi karaa muddo dhan 1- 2 todobaad.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

a) Waxaa iniinyaha geedkani lagu beeri karaa meel xero oo kale ah, hase ahaatee ay ku jiraan ciid nafaqeysan. Waxaa ka dib markey soo baxaa ka dib oo in muddo ah jiraan waxaa lagu wareejin karaa meeshii la rabay iney ka baxaan, iyadoo geeduhu xididadoodu muuqdaan. Waxaa haboon in dhererkoodu gaadho 60-80 cm intaan la wareejin ka hor.

b) Sida badan bac ayaa inta lagu abuuro iniinyaha, muddo lagu xanaaneeyaa beerta dhirkobcinta, ka dibna waxaa lagu tallaalaa meeshii loogu talo galay. Ciida bacda lagu lagu beerayo iniinyaha ku jirtaa waa iney qoyanaataa. Waxaa lagu xanaaneeyaa geedaha beerta dhirkobcinta ilaa 4-5 sanno. Mudaddaas uu geedku ku jiro halkan aad ayuu u baxa oo dherer iyo dhumuc u yeeshaa.

c) Iniinyaha waxaa kale oo si toos ah loogu beeri karaa dhulka. Marka hore waxaa la jeexaa dhulka , ka dibna waxaa lagu ridaa iniinyaha, waxaana lesku jirsiiyaa 30 * 30 cm?.
waxaa muhiim ah in iniiyaha aan dhulka si aad ah hoos loogu ridin, ugu badnaan 15cm ayaa haboon.
Waa in geedaha la kala fogeeyaa marka la beerayo, laguan talaalaa ciidagudbin karta biyaha?missing

Magaca: QUUD <u>Balanites aegyptiana</u>

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Magacyada kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Kulan, Shillan, iyo qaar kale. Quudku waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh.

Quudku wuxuu si dabiici ah uga baxaa guud ahaan Soomaaliya oo dhan, waqooyiga Soomaaliya, gobolad dhexe iyo Kuwa Koonfureedba. Waxaa uu si gaar ah uga baxaa nawaxiga Afgooye, iyo Baydhabo.


Waddamada uu sida dabiiciga uga baxo geedkani waxaa ka mid ah Jabuuti, Gini-Bissaw, Kiiniya, Muritaaniya, Nijer, Senegaal, Suudan, Saambiya, iyo Joordan.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Quudku wuxuu ka mid yahay geedaha sida dhakhsaha u baxa, marka la tallaalo. Caleemo cagaar ah ayuu sannadkii oo dhan leeyahay, ama ha ahaato xilliga roobka ama wakhtiga aan robku jirin. Caleemuhu way ka daatan marka abaar aad u xuni dhacdo. Dhererkiisu wuxuu gaadhaa ilaa 12 mitir, dhumucda udubkiisuna mararka qaarkood 40 cm ayey gaadhaa. Jirrida saaran qolofta waxy leedahay midab cawlaan iyo cagar su dhafan.

Laamo midabkoodu yahay doog lehna qoddax dhaadheer ayaa astaamaha lagu aqoonsado ka mid geedkani. Dhererka qoddaxda geedkani ku yaal marmar bey gaartaa 8 cm. caleenta geedkani labo labo ayey isga soo hor jeedaa. Ubax ma bixiyo geeedkani.
Mirahisu waa sida ukunta oo kale . Xidadada geedkani dhulka ayey aad hoos ugu galan, waxayse ku kooban yihiin dhulka intiis a sare, si ay nafaqada xagga sare ee dhulka taala u nuugaan.
Qori aad u adag una culus ayuu leeyahay geedkani. Xasharaadka dhaawaca u geysta qorhahu si fudud uma waxyeeleyb karaan geedkani qorigiisa.

# QUUD — BALANITES AEGYPTIACA



### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Quudku waa geed u adkeysta abaaraha. Geedkani roobka uu u baahan yahay waxaa lagu qiyaasaa 150-800 mm sannadkii dhulka hela ayuuna ka ka baxaa. Inkasta oo la sheegey in roob u dhexeya 350-500 mm sannadkii.

Qabow xadi dhaaf ahna Quudku wuu u adkeysan karaa. Dhulka hoose iyo kuwa ku yaal xagga sareba waa uu ka bixi karaa.

### 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxyaabaha dalka gudihiis a iyo dibediisa looga isticamalo waxaa ka mid ah, kuwan an hoos ku sheegney.

**Xaabo:** Xaabada la shitaa waxay ka mid tahay waxyaabaha ugu muhiimsan ee geedkan loo isticmaalo. Xaabada geedkani ma laha qiiq badan oo dadka dhiba markay isticmaalyaan.

**Dhuxusha:** Dadka qaarkii ayaa dhuxusha ay shitaan ka sameysta quudka. Hase ahaatee Soomaaliya lagama Sameeyo dhuxusha geedkani.

**Cunto:** Geedaha miraha la cunno dadka siiya ayuu quudku ka mid yahay, kuwa ugu muhimsan. Waxaa kale oo dadka qaarkood cunaan caleenta geedkani.

**Dhismo:** Qorigani quudka waxaa loo isticmaalaa waxyaabo badan. Waxaa laga sameeyaa daababka la galiyo alaabta ay aka midka yihiin Guduntaiyo wixii la midka ah. Aqalada ayey dadka qaarkood ku dhistaan Qoriga laga helo geedkan.

Daawooyin ayey dadka qaarkiis ka sameeyaan, kuwo kalana waxay ku tallaalaan agagaarka guryahooda, si uu uga celiyo dabeylaha ama intey gooyaan ayey xerooyin xoolaha uga sameeyaan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha geedka waxay ku jiraan miraha la cuno dhexdooda, sidaas daraadeed marka la cuno miraha iniinyaha waa in meel hagaagsan la dhigaa. Halkii (1kg) ee iniinyaha geedkani ah waxaa lagu qiyaasaa iney 1000 xabbo ku jiraan.
Si dahaarka saaran loo saaaro biro ayaa lagu ridaa.

Waxaa ininyaha quudka la keydin karaa ilaa sannad, hadii iniinyuhu yihiin khafiif, qalalan yihiin.

Xasharaadka waa in laga ilaaliyaa mudadda ay bakhaarada ku jiraan. Si diirka iniinyaha saaran lo jilciyo intaan la beerin ka hor waxaa la rabaa in lagu rido biyo, loona daayo muddo dhan 24 saac.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Siyaaabo badan ayaa geedkan loo beeri karaa.

A) Waxaa iniinyaha loogu beeri karaa si toos meeshii logu talogalay, ama qeyb ka mid ah geedk ayaa la goyaa laguna tallaalaa meeshii loogu talo galay.

b) Bac ayaa sida badan geedkani lagu kobciyaa. marka iniiyha bacda lagu beerayo waxaa muhiim ah in bac walba lagu rido ilaa 2 iniinyo.

Waxaa iniinyaha badankoodu ku soo baxaan 1-4 todobaad.
Waxaa quudku si wacan uga baxaa ciida u badan Bataaxa, dhulka daadadku ku soo fatahaan mararka qaarkood ayuu si gaar uga baxaa. Marka la tallaalo waxaa muhiim ah in geedaha kale ee kula tartamaya biyaha iyo macdanaba laga jaro.
Waxaana muhiim ah in saddexda sanno ee ugu horeeya marka la tallaalo lagala dagaalmo geedaha aanu kor ku soo sheegney. quudku ma jecla meelaha biyuhu fadhiistaan wakhtiyada dheer. Daaqsta xoolaha waa in laga ilaaliyaa inta dhirtu yaryar tahay siiba dhawrka sanno ee ugu horeeya.
Waddamada lagu tallaalay qaarkood bixitaankiisu inuu gaabiyo ayaa la wariyey. Waxaa kale oo geedkani u adkeystaa dabka, iyo haddii gooyona dib buu soo baxo.

Magaca: Raqay ( *Tamarindus indica*)

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:

Magacyadda kale ee dalka looga yaqaan waxaa ka mid ah Xamar, Timir-Hindi, iyo Rakhay. Waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh.

Meelaha uu Raqaygu ka baxo Soomaaliya waxaa ka mid ah Jubbada Dhexe, iyo beeraha u dhaw nawaaxiga Afgooye. Hase ahaatee waxa lagu tallaalay tuulooyin iyo degmooyin badan oo ku yaal Soommaaliya , sida Gaalkacayo, Dhuuso-Mareeb, Qoryooley iyo kuwo kale.

Waddamada uu sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid Senegaal, Niijer, Gini-bisaw, Suudaan, Jaad, Ugaandha, Kiiniya, Tansaaniya, Benin, iyo waddamo kale oo ku yaal Afrika.


## 2. ASTAAMAHA GEEDKA:

Geedkani astaamaha lagu garan karo waxaa ka mid ah, isaga oo caleemuhu ka daataan marka uu ka baxayo meelaha uu roobku ku yaryahay. Haddii uu ka baxayo meel roob ku filan leh caleemo doog ah ayuu sannadkii oo dhan leeyahay. Dhererka geedakan waxaa uu gaadhaa ilaa 25 (mitir).

Dhawr udub ayuu la baxaa, waxaa dhumucda jirridiidu le'eg tahay 1 mitir marmar. Qolofta jirrida saaran midabkeedu waa cawlaan ama maariin. Laamo isu xigxiga oo kala sareeya ayuu geedkani leeyahay.Caleent Raqaygu waxaty ka farcanta laamaha yaryary oo kuwa waaweyn ka soo fida.

Ubaxa midabkiisu yahay huruud ayuu geedkani bixiyaa. mirahiisu wey wareegsan yihiin, isla markaana dheeryihiin. waxaa la moodaa iney dhinac u yara qaloocsan yihiin.
Xidido dhulka aad hoos ugu gala ayuu geedkani leeyahay. Qoriga Raqaygu waa adag yahay, aadna u culus yahay.

Xasharaadka dhibaatooyinka u geysta alwaaxda sida aboorku si fudud uma waxyeeleyn karaan Raqayga.


RAQAY
TAMARINDUS INDICA
Miraha (cadaan-cawlaan)
Qaabka Geedka
(cawlaan
Ubaxa (huruud)
Laamaha
Caleenta
Iniinyo (mariin)

## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Raqaygu wuxuu ka baxaa dhulka kuleylayaasha ah, isla markaana roob ku yar yahay. Geedkani roobka uu u baahan yahay waxaa lagu qiyaasaa ilaa 600-1000mm sannadkii. Heerkulka uu ku baxo waxaa lagu qiyaasaae 20C.

Gunburada iyo buuraha dhaadheer kama helo geedkani, wuxuun si wacan uga baxaa dhulka ka hooseeya 1000 mitir.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Geedka Raqayga waxyaabo kale duwan ayaa looga isticmaalaa Soomaaliya iyo waddamada kaleba, waxaana ka mid ah kuwan soo socda.

**Xaabo:** Laamaha geedkani dadka ayaa ka dhigta xaabo, ay shitaan.

**Dhuxul:** Inkasta oo aaney Soomaaliya ku aheyn caadi, waddamada qaarkood ayaa dhuxul ka sameysta geedkani.

Qoriga Raqayga waxaa laga sameeyaa Doonyaha, iyo alaabada kale ee ay ka mid ka yihiin, Kuraasta, armaajooyinka, iyo qaar kale. Waxaa caado ah in qoriga geedkan si fudud u laabmo, isaga oo aan jabin, taasi waxay keentey in laga sameeyo daababka la galiyo dubaha iyo qalabka kale ee la mid ka ah. Guryaha ayey dadka qaarkood ku dhistaan alwaaxda laga sameeyo geedkani.

Caleenta geedkani xoolaha ayaa daaqa. Miro la cunno aadna ay dadku u jecelyihiin ayuu Raqygu leeyahay. Dadka qaarkood ayaa iniinyaha geedka intey dubaan cuna, qarna isagoo ceyriin ayey cunaan. Miraha geedkani bixiyo aad ayey u nuxur badan yihiin, waxaan laga helaa fiitamiinadda ay ka midka yihiin C, kaas oo ku jira fiitamiindad lagama maarmaanka ah. Waxaa kale oo la wariyey dadka qaarkood cunan caleenta geedkani.
Sababta Raqayga loogu beerey badhtamaha magaalooyin qaarkood waa hadhkiisa oo dadka iyo duunyaduba uga gabadaan kulka qorraxada. Waxaa kale oo Raqaygu kor u qaadaa bilicda magaalooyinka. Daawooyin ayey geedkariska dadka ahi ka sameeyaan. Beeraley badan ayaa ku tallaalay geedkan agagaarka guryahooda, si uu dabaylaha uaga celiyo , kuwaas oo dhibaato u geysan kara aqaladooda. Madaama uu leeyahay hoos aad u weyn waxaa muhim ah in Raqayga lagu dhex beerin dalagyadda beeraha , waayo waxaa uu ka celinayaa ileyska qorraxda oo lagama maarmaan u ah bixitanka geedha. Caleentiisan aysiiddh ayaa ku badan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Miraha la doonayo in hadhow dib loo beero, waa in laga soo ururiyaa geedaha leh dhererka iyo dhumucda. Iniinyaha waxay ku dhex jiraan miraha waxaana soo guri karaa geedaha hoostooda. Halkii (1kg) ee miraha geedkan waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan 100-3000 oo xabbo. Biyo waa in lagu ridaa miraha si iniinyaha ku dhawr jiraa uga so baxaan.

Markey iniinyaha badankodau ka soo baxaan waa in la qalajiyaa. Waxaa la keydin karaa iniinyaha Raqayga muddo dhan 2 sanno , waa in laga ilaaliyo xasharaadka dhibaatooyinka u geysan kara geedkani.

Iniinyaha si toos ayaa loogu beeri karaa dhulka haddii la damco, ama waxaa lagu ridi karaa biyo muddo 24 sac si diirka ku dahaaran loo jilciyo.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo kala duwan ayaa geedkani loo kobcin karaa. Waxaa la goyn karaa qeyb ka mid ah geedka dibna waxaa lagu tallaali karaa meeshii la damco. Waxaa sida badan Soomaaliya geedku inta uu yaryahay lagu xanaaneeyaa bac intaan meeshii loogu talo galay lagu beerin. Marka bacdii ku habooneyd lagu beero, waxay ku soo baxaan iniinyuhu muddo u dhaxeysa 10- 60 maalmood. Waxaa lagu qiyaasaa in iniinyaha la beero boqolkiiba 30-70 soo baxaan.

Waxaa lagu xanaaneeyaa geedkani 18-24 todobaad beerta dhirkobcinta.

Waa in lagu tallaala geedkani meelaha leh ciida qalalan, isla markaana gudbisa biyaha. Meelaha godan ee biyuhu fadhistaan waa in laga ilaaliyaa oo aan lagu tallaalin Raqayga.
Waa in geedaha kale ee kula tartama biyaha iyo macdanaha kale laga jaraa meeshii lagu tallaalo. Inta uu yaryahay waa in xoolahu iney daaqaan laga ilaaliyaa. Miraha ugu horeeya waxay geedahan soo saaraan marka uu geedku jiro 8-12 sanno.

Magaca: (*Sesbania grandiflora*)

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:


Sannadihii ugu dambeeyey waxaa geedkani lagu tallaalay Soomaaliya aqalada agtooda. Madaama geedkani yahay mid u baahan waraabinta joogtada ah, waxaa lagu beerey dhulka biyaha badan leh oo kaliya.

Waddamada uu sida dabiiciga ah uga baxo geedkani waxaa ka mid ah koonfurta bari ee qaarada Aasiya, sida waddamada Hindiya, Malaysiya, iyo Filibiin.

## 2. ASTAAMAHA GEEDKA:

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha waddanka dibeda laga soo galiyey, dhakhsaha ayuu baxa marka la beero. Caleemo qoyan ayuu geedkani leeyahay sannadkii oo dhan. Qoddax ma laha geedkani, dhererkiisuna wuxuu gaadhaa ilaa 8-10 mitir. Udub toosan oo dhumucdiisu gaadho 30 cm ayuu leeyahay, laamuhuna xagga sare ayey u baxaan.

SESBANIA GRANDIFLORA



### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Geedkani waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka roobka badani ka da'o, muddo gaadheysa 3 bilood ayuu geedkani roob la'aanta u adkeysan karaa. Waxaa lagu qiyaasaa roobka uu u baahan yahay inta u dhaxeysa 1000-2000 mm sannadkii dhulka hela.

Geedkani cimilada kulul wuu u adkeysan karaa ee gaadheysa ilaa 23-30C. Dhulka lagu tallaalayo geedkani waa in biyaha ku jiraa dhulka xaggisa sare dhow yihiin, oo xididada geedkani u gaadhi karaan.

### 4 . ISTICMAALKA GEEDKA:

Waxyaabaha looga isticmaalo waddanka gudihiisa iyo dibediisaba waxaa ka mid ah kuwa aan hoos ku qoray.

**Daaqa:** Caleemaha geekani xoolaha ayaa daaqa.

**Nafaqeynta Ciida:** Si nafaqadda ciida kor loogu qaado, waxaa geedkani lagu dhafi karaa dalagyadda beeraha. Marka caleemaha geedkani dhulka ku dhacaan waxay ku dhafmaan ciida, taas oo kor u qaada nafaqada ciida.

Geedkani dad badan ayaa ku tallaala agagaara Beeraha iyo guryaha si uu gabaad ugu noqdo oo ka celiyo dabeylaha.
Waxaa la wariyey in dunida kale dadka ku dhaqan qaarkood cunaan caleenta geedkani. Waxaa kale oo ka mid ah sababaha geedkani loogu tallaalo aqalada agtooda in laga hadhsado kulka qorraxda oo aad u dhiba dadka iyo xoolahaba.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Marka iniinyaha geedkani la ururinayo, waa in laga soo guraa geedaha leh dhererka iyo dhumucdaba. Halkii (1kg) ee iniinyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ku jiraan inta u dhaxaysa 17000- 20000 oo xabbo.

Geedkani iniinyahiisa waxaa la keydin karaa muddo gaadheysa 1-2 sanno, mudaddaas wax dhaawac ah ma gaadhaan iniinyaha.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

Siyaabo kala duwan ayaa geedkani loo kobcin karaa, waxaana ka mid ah kuwan soo socda:

a) Iniinyaha geedkan si toos ayaa loogu abuuri karaa meeshii la rabay inuu geedkani ka baxo.

b) Waxaa kale oo suurogal in geedkani isaga oo yar la gooyo oo haddana dib loogu beero meeshii la rabay inuu ka baxo.

c) Soomaaliya sida qaalibka ah bac ayaa iniinyaha lagu abuuraa, muddana waxaa lagu xanaaneeyaa beerta dhirkobcinta.

Boqolkiiba 85-90 ayaa iniinyaha la beero soo baxa. Mudadda ay dhirtu ku jirto beerta dhirkobcinta waxaa haboon in xididada la gaagaabiyo hadday bacda ka dhex baxaan. Waa in leysu dhaweeyaa dhirta marka la beerayo.

Magaca: Seytuun (_Psidium guajava_)

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Seytuunku waxaa uu ka mid yahay geedaha miraha la cunno leh, dadkuna aad ayey u jecel yhiin mirahiisa macaa.

Geedkani waxaa uu ka baxaa qeybo badan oo dalka ka tirsan, gaar ahaan beeraha u dhaw webiyadda Shabeelle iyo Jubba. Waxaa kale oo geedo badani ka baxaan aqaladda dhexdoodda. Seytuunku waxaa uu ka baxaa degmooyinka ay ka midka yihiin Arabsiyo, Jalalaqsi, Jilib, Qoryooley, Baraawe, iyo kuwo kale.

Waddamada uu sida dabiiciga ah uga baxo seytuunku waxaa ka mid ah, waddamada ku yaal Kuleylayaasha Ameerika, sida Braasiil, iyo qaar kale.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Seytuunku waa geed yar, oo caleemo qoyan leh xilli kasta. Calaamadaha lagu aqoonsan karo waxaa ka mid ah isaga oo laamo badan ka bixiya geedka xaggiisa hoose. Dhererka geedkani waxaa uu u dhexeeyaa 3-10 mitir. Dhumucda udubkiisuna wey ka yar tahay 20cm. Midabka qolofta saaran jirrida geedku waa madow khafiif ah iyo mariin isu dhafan.

Caleemaha geedkani aad cagaar uma ah, mar walbana waxaa ay leeyihiin ubax iyo miro. Miruhu laamaha guntooda ayey ka soo baxaan Iniinyaha geedkan waxay ku dhex jiraan miraha la cuno.

Xididada geedkani waxay soo saaran laamo, kuwaas oo dhulka oogadiisa socda, xididadaas dhulka hoos uma galaan.


SEYTUUN PSIDIUS GUAJAVA

Miraha (doog-huruud)




Qaabka Geedka


Ubaxa (cadaan)



Caleenta (doog-huruud)



Iniinyo (huruud)



Laamaha



## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Seytuunku waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha bdan leh, ama roobka badani ka da'o. Waxaa uu geedkani ka bixi karaa dhulka abaarhu ka dhacaan, amase roobku ka di'in muddo gaadheysa 7 bilood. Roobka ku haboon bixitaanka geedka seytuunku waxaa lagu qiyaasaa Ilaa 1000 -3000mm sannadkii.

Cimilada Soomaaliya wey ku haboontahay bixitaanka geedkan, inkasta oo roob ka da'aa ka yar yahay inta aanu kor ku soo sheegney, haddana waa la waraabin karaa. Heerkul gaadhaya 20C-35C ayuu Seytuunku ka helaa. Dhul hoosaadka u dhaw labada webi, Shabeelle iyo Jubba ayaa seytuunku aad uga baxaa.

Buuraha dhererkoodu gaadho 1500 mitirna Seytuunku waa geed ka bixi kara. Hase yeeshee uma adkeysto qabowga keena dhadada. Meelaha godan ee biyo fadhiisadyadda ah, iyo dhulalka daadadku ku soo fatahaanba seytuunku wuu ka bixi karaa.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Faa'idooyinka ugu weyn ee geedkani waa isaga oo mirahiis dadku quutaan. Waddamada lagu beerey qaarkood ayaa xaabada iyo dhuxusha ay shitaan ka hela geedkani. Intaas waxaa raaca iyada oo dadka qaarkood qoriga geedkani ku dhistaan aqalada.
waxaa kale oo laga sameeyaa daababka la galiyo, gudunta, iyo kuwo kale. Daawooyin ayey dadka qaarkood ka sameystaan geedkani.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Iniinyaha la rabo in la beero, waa in laga soo ururiyaa geedaha leh miraha waweyn, caafimaad qabana. Marka laga cunno miraha waa in iniinyaha lagu qalajiyaa qorraxda.

Iniinyaha seytuunka waxaa la keydin karaa ilaa 1 sanno, haddii lagu keydiyo meel qabow oo qalalan. Marka la abuurayo iniinyaha geedkan uma baahana sida geedaha kale qaarkood in diirka saaran la jilciyo.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKCOBCINTA UU KU JIRO.

a) Marka iniinyaha geedkani la abuuro natiijo wanaagsan ayaa laga helaa,

b) Waxaa suurogal ah in xubin ka mid ah geedkan inta la gooyo lagu kabo xubin kale oo geed kale ke timid, ujeedadda oo ah in tirada iyo tayada miraha ay soo bixinayaan loo kordhiyo.

Marka la abuurayo iniinyaha geedkaniwaxaa haboon, in ciid isu dhafan lagu guro bacda lagu abuurayo. Halk (1cm) dherer gaadhaya ayaa iniinyaha geedkani la dhigaa, ciid fududna dusha sare ayaa laga saaraa. Saddex 3 todobaad gudahood ayaa iniinyahu ku soo baxaan. Hadday dhacdo in dhawr geed bac kaliya ka soo wadda baxaan waa in geedaha lagu wareejiyaa bac madhan oo geedo kale ku jirrin. Gaar ahaan waxaa haboon in la wareejiyo marka dhererka geeduhu gaadhaan 30cm, taas oo muddo 5-7 bilood u baahan.

Geedkani waxaa dhaawac u geysta cayayaanka, iyo cudurrada ay keenaan nooleyda ishu qaban sida funguska. Waa in geedka lagala dagaalama cuduradaas. Marka la tallaalayo geedaha waa in la kala fogeeyaa, sida badan todoba talaabo ayaa leysku jirsiiyaa (7 * 7 mitir). Madaama uu seytuunku yahay geed ku haboon cimilada Soomaaliya isla markaana lagu beeri karo aqalada dhexdooda waxaa haboon in lagu dhiiri galiyo bulshadda.

Magaca: Shawri ( Casuarina equisetifolia):

## 1. IFAFAALAHA GEEDKA:

Geedka Shawrigu wuxuu ka baxaa meelo badan oo gobolada Soomaaliya ka mid ah, gaar ahaan goboladda koonfurta, waxaa aad logu tallaalay agagaarka degamada Shallambood iyo Marka si uu u joojiyo bacaadka ku durkaya dhulka beeraleyda ah, iyo tuulooyinka u dhaw.

Bilowgii 1970kii ayaa geedaha haatan ka baxaya bacaadka la tallaalay taas oo ku timid bulshadda Soomaaliyeed oo si wadajir dhibaatada iskugu dayday iney wax uga qabtaan. Ilaa imminkana shawriga iyo geedaha kalaba waxaa lagu tallaalaa meelaha hawlaha bacaad celintu ka socoto.

Dhul lagu qiyaasey ilaa 1800 oo hectare ayaa guud ahaan bacaadkii socdey la joojiyey iyada oo shawrigu geedkan ugu badan.

meelaha uu geedkan sida dabiiciga uga baxo waxaa ka mid qaarada Uwstraaliya, iyo jasiradaha ku yaal badweynta Baasifiga.

## 2. ASTAAMAHA GEEDKA:


Shawrigu wuxuu leeyahay caleemo cagaar ah sannadkii oo dhan. Geedka dushiisa sare waa dhuuban tahay, dhererkiisuna ilaa 20 mitir ayuu meelaha qaarkood ku dhawaadaa. Udub toosan ayuu leeyahay, dhumudda udubkiisu ilaa 40 cm ayey le'eg tahay, ama wey ka weyn tahay. Geedkani jirridiisa Qolofta saaran midabkeedu waa madow iyo cawlaan isku dhafan. Laamaha geedkani dhinacyada ayey u fidaan, caleemihiisuna aad ayey u yar yihiin.

Labo geed ayey ubaxa dheddig iyo kan lab ku kala yaalaan, waxayna leeyihiin qaab kala duwan. Ubaxa lab wuxuu leeyahay wax qoddax oo kale u eg. Miro aad u adag ayey leeyihiin, xididada geedkani wey badan yhiiin oo neytrogiinta ayey dhulka uga soo nuugaan.

Qorigiisu sidaas uma adka, si fudud ayuuna u kala jabaa. ama u qaloocsamaa. Xasharaadka iyo nooleyda aan ishu qabanba dhaawac ayey u geystaan geedkani.

SHAWRI

CASUARINA EQUISETIFOLIA



### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Shawrigu waa geed abaareed u adkeysata roob la'aanta muddo gaadheysa ilaa 4 bilood. Geedkani roobka uu u baahan yahay si uu u baxo waxaa lagu qiyaasaa 750-2500mm sannadkii.

Heerkulka uu ka bixi karo waxaa lagu qiyaasaa 18C-25C. Banaanada iyo gunburada ama buuraha dhulka ka sareeye 1400 mitirba wuu ka baxaa.

### 2. ISTICMAALKA GEEDKA

Waxyaabaha loo isticmaalo wey badan yihiin, waxaana ka mid ah, kwan hoos ku qoran:

**Xaabo:** Shawrigu si degdeg ah ayuu u baxaa, sidaad daraadeed waddamo badan ayaa ku tallaalay dhulkooda, si uu daboolo baahida loo qabo xaabada. Soomaaliya maadama geedaha lagu tallaalay ilaa imminka ku kooban yihiin, meelaha laga hawlaha bacaad celintu ka socoto, geedaha loo isticmaalo xaabo ahaan wey yar yihin.

**Dhuxul:** Shawriga dad ayaa dhuxul ka sameysata qorigiisa.

**Dhismo:** Inkasta oo qorigiisu aad u adkeyn haddana aqalada ayey tiirarka geedka lagu dhisaa.

**Bacaad Celinta:** Waddamo badan oo ku yaal Afrika iyo Aasiya yaa Shawriga u isticmaala iney kula dagaalamaan bacaadka oo dhibaato u geysan kara jidadka, isgaarsiinta, iyo beeraha. Shawrigu waxaa aan si shaki ku jirin u tusey dadka inuu yahay geed ah lagama maarmaan marka, dhibatada bacaadku jirto.

Waxaa kale oo geedkani nafaqeeyaa ciida, isla markaana beeraley badan ayaa ku ag tallaala guryaha iyo beeraha si uu uga celiyaan dabaylaha oo dhibaatooyin geysan kara. Buundooyinka yaryar waxaa laga dhisi karaa qoriga shawriga. Daawooyin ayaa ka mid aha waxayaabaha kale ee geedkani laga sameeyo. Bilicda degmooyinka iyo tuulooyinka geedkani kor ayuu u qaadaa.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniyaha waxaa laga soo ururiyaa geedaha waaweyn ee sida toosan u baxa, isla markaana leh dhumucba.
Iniiyaha waxaa haboon in la soo guro intey weli yihiin cagaarka. Si qolofta saaran iniiyahay looga saaro, waxaa lagu qalajiyaa cadceeda. Marka la qalajiyo ayaa iniiyuhu si fudud uga soo baxaan daboolka saaran.

Waxaa la keydin karaa geedka shawriga iniinyahiisa muddo dhan sannad ilaa 6 bilood. Halkii (1kg) ee iniiyaha geedkani waxaa lagu qiyaasaa iney ilaa 700,000-800,000 oo xabbo ku jiraan.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Siyaabaha loo kobcin karo waxaa ka mid ah,

A) Geedkani isaga oo yar ayaa la goyn karaa ka dibna lagu tallaali karaa meeshii loo baahdo.

b) Sida badan Soomaaliya, bac ayaa lagu abuuraa iniiyaha, ka dibna waxaa lagu xanaaneeyaa beerta dhirkobcinta muddo 4-8 bilood.

Iniiyuhu waxay ku soo baxaan muddo dhan 20-40 maalmood. Iniinyaha la beero boqolkiba 60-70 ayaa soo baxa. Hoos ayey geeduhu u baahan yihiin mudadda uu ku jiro beerta dhirkobcinta. Meelaha leh ciida qalalan ee bataxa u badan ayaa Shawrigu si gaar ugu baxaa.

Marka la tallaalayo geedaha waxaa leysku jirssin karaa saddex tallabo (3 * 3 mitir) ayaa leysu jirsiiyaa geedaha. Cawska ayaa ka mid aha dhirta kula tartanta biyaha, sidaad daraadeed waa in looga jaraa si joogto ah. Ileyska qorraxada ayey geeduhu u baahan yihiin inta ay yar yihiin.

Magaca: Tiin ( <u>Opuntia vulgaria</u>):

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Tiinku waxaa uu ka baxaa dhamaan Soomaaliya, inkasta oo uu u badan yahay Koonfurta, gaar ahaan dhulka bacaadku dhibaatada ku hayo sida Baraawe, Marka, Shallambood iyo meelo kale.

Tiinku waxaa uu dabiici ahaan uga baxaa, qaarada Laatiin Ameerika, oo ah meesha uu tiinku asalkiisii hore ka yimid,

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Tiinku waxaa uu leeyahay jirrid balaaran oo cagaar ah, isla markaan aad u jilicsan. Jirrida geedkani si fudud ayey u kala jabeysaa. Geedka tiinka dhererkiisu ugu badnaan 5 mitir ayuu gaadhaa.

Ubax qurrux badan ayuu geedkani leeyahay, midabkiisuna yahay casaan, waxaan ubaxa geedkani ku yaal jirrida geedkani xaggisa sare. Ubaxa geedkani waxaa uu soo baxaa dhamaadka xilliga roobku la'aantu jirto. Miro u eg ukunta oo kale ayuu leeyahay, midabkiisuna yahay cagaar ama doog.

TIIN | OPUNTIA VULGARI

Miraha

Qaabka Geedka

Ubaxa

Laamaha

Caleenta

Iniinyo

### 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:

Tiinku waxaa uu ka mid yahay geedha lama degaanadd ka baxa, waana geed u adkeysata abaaraha, waxaana u si gaar ah uga baxaa dhulka leh ciida bacaadka ah (Bataaxa). Roob aad u yar ayuu u baahan yahay si uu u baxo geekani. Tiinku si fiican ugama bixi karo uma geedaha waaweyn hoostooda.

Sida dhirta kale qaarkood Tiinku, si fiican ugulama tartami karo biyaha iyo macdanta dhirta kale.

Guud ahaan cimiladda Soomaaliya aad ayey ugu haboon tahay bixitaanka geedkani.

### 2. ISTICMAALKA GEEDKA:

Tiinka waxyaabo badan ayaa loo isticmaalaa, kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku qoran:

**Gabaad:** Tiinka waxaa ilaa muddo aad u fogba loo isticmaali jirey gabaad ahaan, dad badan ayaana ku tallaali jirey agagaarka guryahooda si dabeylahana uga celiyaan, isla markaana xoolahu uga soo gubin.

**Bacaad Celinta:** Tiinku waxaa uu ka mid yahay geedaha qeybta weyn ka qaata hakilta bacaadka, sidaas daraadeed muddoyinkan dambe waxaa aad loogu tallaaley Dhulka bacaadku dhibaatooyinka ku hayo. Sababtao uu tiinku uga mid noqdey, dhirta qeyb weyn ka ciyaara bacaad celinta waxaa ka mid ah isaga oo muddo gaaban oo gaadheysa 6 bilood gaadheysa ka dib u suura galiya dhirta kale ee cawsku ka mid yahay iney soo baxaan, Waayo wuxuu siinayaa gabaad ay dhirtaas xididada dhirta ku soo bixi karaan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Badanaa, geedka tiinku iskiis ayuu u baxaa marka uu helo dhul ku haboon bixitaankiisa.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Geedkani waxaa uu ka baxaa dhulka aad u kala duwan oo Soomaaliya ka tirsan. Habka ugu fudud ee geedo badan loo tallaali karo, waa iyada oo qeyb ka mid ah geedka inta la gooyo dib loogu tallaalo meeshii la doonayey, sida Bacaadka oo kale.

Haddii la maamuli waayo tiinka, waxaa suurogal aha inuu qabsado dhul aad u balaaran, marka dambena ay adkaato sidii loo goyn lahaa. Waayo qoddaxdiisa ayaa dadka dhibaato gaadhsiin karta.

Magaca: Timir ( <u>Phoenix dactylifera</u>):

**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Timitu waxaa uu ka mid yahay geedaha mitraha la cunno leh, Soomaaliduna aad ayey u jecel yihiin miraha geedkani.

Geedka timirtu waxaa uu ka baxaa meelo badan oo ka tirsan dalka, waqooyiga iyo koonfurtaba. Waxaase la wariyey in geedkani uu aslkiisii hore ka soo galay Soomaaliya gacanka Carabta, muddo haatan laga joogo 1000 sanno.

Waddamada uu sida dabiiciga uga baxdo waxaa ka mid ah Iiraan, Israa'iil, Sacuudi Carabiya, Ciraaq, Suuriya, iyo Qubrus. Afrika waddamo ku yaana wuu ka baxaa geedkani.


**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Geedka timirta astaamaha lagu aqoonsan karo waxaa ka mid ah, waxaa uu leedahay laamo badan oo geedka xaggiisa hoose ka soo farcama.

Xididada geedkani qaar ayaa muuqda oo dhulka xaggisa sare u soo baxa. Timirtu caleemo aad u waaweyn oo balaaran ayuu leeyahay.. Dhererkiisu waxaa uu gaadhaa inta u dhaxeysa 15-20 mitir. Dhumuda udubkiisuna ilaa 60-100cm ayuu mararka qaarkood gaadhaa.

Tiirka geedkani waa toosan yahay, sidaad kor ku sheegenyna xagiisa hoosana xidido ayaa ku wareegsan.

Miraha geedkani waa cawlaan, ama mariin. Waxaa lagu qiyaasaa in xididada geedkan gaadhaan ilaa 6 mitir, sidaas daraadeed aad ayey dabeylaha ugu adkeystaan. Tiirka geedkani xasharaadku si fudud uma waxyeeleyn karaan.


TIMIR
PHOENIX DACTYLIFER
Miraha (cagaar-marin)
(miro qayan)
(miro qalan)
Qaabka Geedka.
Ubaxa (cadaan-mariin)
Lab
dheddig
Laamaha.
ubax dheddig
Caleenta
Iniinyo (cawlaan)
jirrida

**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA:**

Geedka timirtu waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka aad biyahu ugu yar yihiin, isla markaan leh cimilo aad u kulul.

Heerkul ku dhaw ilaa 48C ayaa geedkani u adkeysan karaa. Si uu u baxo waxaa haboon in geedkani lagu beerodhulka biyahu ku jiraan. Geedka tiinku waa uu ka bixi karaa dhulka cusbada ku jirtaa aadka u sareyso.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Faa'idooyinka ugu weyn ee geedkani waxaa ka mid ah, kuwan hoos ku qoran.

**Cunto:** Timirta oo magaca loo yaqaan geedka iyo miraha la cunno labadaba ee uu bixiyo, waa cunto nafaqo leh, isla markaana may jirto sonkor badani oo tamar siisa dadka. Soomaaliya timirta laga isticmalo waxaa badankeedu ka soo gashaa waddanka dibediisa, gaar ahaan waddamada Carabta.

**Xaabo:** Qoriyaha laga soo ururiyo dad baa shita, oo xaabo ka dhigta.

**Dhismo:** Qoryaha timirta guryaha ayaa lagu dhisaa, caleemihiisuna waxaa laga sameeyaa danbiilo, kuwaas oo dakhli soo galiya dadka sameeya markey iibiyaan. Xadhkahana waa laga sameeyaa.

**Hadhka:** Timirtu waxay sida badan ka baxdaa lama degaanlada qorraxduna aadka u kulushay, markaas dadka iyo xayawaanka kaleba waxay ka hoos galaan kulka qorraxda.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Wararka ku saabsan sida ugu wanaagsan ee iniinyaha geedkani loo soo guro, sida loo keydiyo, iyo xanaanadda ay u baahan yihiin waxaan lagu darayaa buuggana marka ay suuragal noqoto.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Sidaan kor ku soo sheegney marka ay suurgal noqoto, waxaa lagu darayaa buuggani siyaabaha kale duwan ee geedkani loo kobcin karo.

Magaca: Xarar ( Terminalia spinosa):


**1. IFAFAALAHA GEEDKA:**

Xararku waxaa uu ka baxaa koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan nawaaxigga degmooyinka Shallamabood, iyo Marka. Waxaa kale oo geedkani ka baxaa goboladda Dhexe ee Soomaaliya.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA**

Xararku waxaa uu ka mid yahay geedaha ay caleemuhu ka daataan xilliga roob la'aantu jirto. Waxaa uu leeyahay qoddax. Dhererka geedkani waxaa uu gaadhaa ilaa 15 mitir, udub toosan ayuuna leeyahay.

XARAR — TERMINALIA SPINOSA



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Geedka xorarku waxaa uu ka mid yahay geedaha ka baxa dhulka biyaha yar leh, isla markaana roobka ka da'aa uu yar yahay. Geedkani waxaa la wariyey inuu u adkeysan karo cimiladda kulul.

**2. ISTICMAALKA GEEDKA**

Waxyaabaha looga isticmaalo geedkani waddanka gudihiis iyo dibediisaba weli si fiican looma soo wadda ururin. Isticmaalka ugu weyn ee geedkani ee ilaa hadda la ogyahay waa isaga oo qoriggisa la sameeyo dhuxul, ama xaabada la shito laga helo. Aqladda ayaa udubkiis dadka qaarkood ku dhistaan.

Faa'idooyinkas ugu weyn ee geedkani waa isaga oo aaney daaqin xooluhu sidaas daraadeed aaney dhibaato ka imaneyn haddii lagu beero beerah hareerahooda.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA):

Wararka ku saabsan ururinta, keydinta, iyo xanaaneynta iniinyaha geeekani weli lama soo wadda ururin, sidaas daraadeed Marka la soo ururiyo wararkaas waxaa lagu darayaa buuggani.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Waxaa la wariyey in iniinyaha geedkani lagu beeri karo bac, hase ahaatee iniinyaha la beero tiro aan badneyn ayaa soo baxda.

Magaca: Yaaq ( Adansonia digitata):

**1. IFAFAALHA GEEDKA:**

Yaaqu waxaa uu ka baxaa goobo badan oo Soomaaliya ka tirsan, gaar ahaan koonfurta dalka. Geedkani waxaa sida badan lagu arkaa agagaarka tuulooyinka, taas oo cadeyneysa in dadku ku tallaali jireen degaankooda si aya uga faa'ideystaan geedkani.

Qaarada Afrika oo dhan waa uu ka baxaa geedkani, marka laga reebo Waqooyiga, khaasatan, nawaaxiga lama degaanka Saxaaraha.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**

Yaaqu waa geed weyn, jirana wakhti dheer oo lagu qiyaaso ilaa dhawr kun oo sanno. Dhererka geedkani, waxaa uu gaadhaa ilaa 30 mitir, dhumucda jirridiisuna ilaa 6 mitir ayey mararka qaarkood gaadhaa. Muuqaalka caleemaha geedkani leeyahay marka uu yar yahay, iyo marka uu weynaado wey kala duwan yihiin. Jirrida qolofta saaran midabkeedu waa cawlaan.

Iniiyaha geedkani midabkoodu waa cawlaan iyo madow isu dhafan, iniinyahaas waxay u eg yihiin sida digirta oo kale. Qoriga yaaqu waa uu fudud tahay, mana adka sababta oo ah biyaha ku jira daraadood.

YAAQ

ADANSONIA DIGITATA

Miraha

Qaabka Geedka

Ubaxa

Laamaha

Caleenta

Iniinyo

198,

## 3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA

Yaaqu waxaa uu ka baxaa dhulka biyaha yar leh, isla markaana leh ciido kala duwan. Yaaqu waxaa uu ka baxaa dhulka uu ka da'o roob gaadhaya 250mm sannadkii.

Waxyaabaha ayka midka yihiin dabka uma adkeysto geedkani, gaar ahaan marka uu yaryahay. Dhulka ciidiisu tahay dhoobeyda ayuu si wanaagsam uga baxaa geedkani. Xilliyada Abaaraha ah ee roobku jirrin ama yaryahay, haddii dhaawac loo geysto geedkan, si fudud ugama soo kabto.

## 4. ISTICMAALKA GEEDKA:

Faa'idooyinka geedkani leeyahay wey tiro badan yihiin, waxaana ka mid ah , kuwan hoos ku qoran:

**Hoos:** Sababaha ugu weyn ee waayadii hore dadku ugu tallaali jireen geedkani agagaarka meelaha ay degan yihiin, waxay aheyd iney ka helaan hadh ay ka galaan kulka qorraxda, isla markaana ay ku kulmaan dadku markey shirayaan, ama ay nasanayaan.

**Daaqa:** **Geedkani**Caleenta geedkani aad ayey u nafaqo badan tahay, sidaas daradeed, caleenta geedkani waxaa jecel oo daaqa xoolaha. Caanaha ayey dadka qaarkood ku daraan, si ay u yeeshaan dhadhan, kaas oo dadka qaarkood ka helaan.

**Cunto:** Iniinyaha geedkani waxaa cuna dadka intey dubaan, inkasta oo dadka qaarkoodna cunaan isagoo caydhiin ah.

**Meydhax:**Jirrida geedkani waxaa laga helaa meydhax, taas oo dadku ka sameeyaan, waxyaabo badan oo aya ka mid yihiin darinta, xadhkaha, shabaqa kalluunka,yo kuwo kale.

Waxyaabaha kale ee loo isticmaalo waxaa ka mid aa isaga oo dadka qaarkood ku urursadaan biyaha, taas oo dadka siin karta biyo ay ku oon baxaan markey haraadaan.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniiyaha la rabo in dib loo beero, waa in marka hore laga soo ururiyaa geedaha waaweyn hoostooda. Sida geedaha kale qaarkood, waxaa muhiim ah in diirka saaran iniinyaha la jilciyo, si ay fududaato so bixitaanka iniinyahu marka la beero. Si lo jilciyo iniinyaha waxaa lagu ridaa biyo kulul, waxaana loo daayaa in muddo aan badneyn.

### 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

a) Iniinyaha geedkani waxaa si toos ah loogu beeri karaa dhulka, gaar ahaan, agagaarka tuulooyinka iyo degmooyinka. Muddo dheer ayey qaadataa, si iniinyuhu u soo baxaa, Waxaa lagu qiyaasaa inta u dhaxeysa 6 todobaad ilaa 6 bilood.

Yaaqa waa in lagu tallaalaa, ama lagu beeraa dhulka aaney xooluhu soo gali karin, haddii kale waxay dhaawac u geysanayaan geedka.

missing pages 201 + 202

3. **CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Yegcarku waxaa uu ka baxaa buuraha, gaar ahaan kuwa ku dhereran waqooyiga Soomaaliya. Waxaa uu si gaar ah uga baxaa meelaha hela roobka xilliyada Jiilaalka ah (Janaayo- Febraayo).

4. **ISTICMAALKA GEEDKA:**

Sida geedo badan oo dalka ku ah dabiici, isticmaalka geedkan ilaa hadda waa xadadan yahay. Isticmaalka ugu weyn ee geedkan waxay iyada oo xabagtiisa laga dhigto Foox la shito, taas oo aad looga istcmaalo meelaha lagu wacdiyo ama lagu alla baryo.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Wherarka ku saabsan habka ugu wanaasan ee iniinyaha geedkani loo soo ururiyo, mudadda la keydin karo, iyo habaka ugu haboon ee loo beero , waxay ka mid yihiin wərarka ilaa maanta aan la soo ururin , sidaas daraadeed, waxaan jecel nahay inaan buuggani ku qoro marka ay suurogal noqoto.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.:

Siyaabaha kala duwan ee buuggani loo kobcin karo waxay lagu darayaa buuggani marka ay suurgal noqoto.

Magaca: Yicib ( Cordeauxia edulis)

**1. IFIFAALAHA GEEDKA**

Gud ayaa ka mid ka mid ah magacyada looga yaqan dalka. Yicibtu waxay ka baxadaa goboladda dhexe ee Soomaaliya, gaar ahaan waqooyiga Beledweyne, iyo agagaarka Matabaan, Gaalkacayo, iyo Hobyo. Dhulka Yicibtu ka baxdo waxaa astaan u ah ciida cas.


Soomaaliya iyo Itoobiya oo kaliya ayaa geedkan si dabiici ah uga baxaa.

**2. ASTAAMAHA GEEDKA:**


Yicibtu caleemo doog ah ayuu sannadkii oo dhan leedahay. Dhawr udub ayuu la baxaa iyo laamo tiro badan. Dhererkiisu ilaa 3 mitir ayuu gaadhaa, hase ahaatee sida badan 1.6 mitir dherer ah ayuu leeyahay. Jiridiisa qolofta saaran midabkeedu waa huruudiyo cawlaan isu dhafan.
Miro la cunno oo dadku aad u jecelyihiin ayuu geedkani leeyahay, midabka miruhu waa casaan ama mariin.
Xididadiisu aad ayay dhulka hoos ugu galaan, meelaha qaarkood ilaa 3 mitir ayey dhulka hoos u galaan.

## YICIB — CORDEAUXIA EDULIS

Miraha (casaan-mariin)



Qaabka Geedka




Ubaxa (huruud)




Laamaha (qoddax ma laha)



Caleenta (doog)



Iniinyo



**3. CIMILADA KU HABOON BIXITAANKA GEEDKA**

Yicibtu waa geed ku caan ah inuu ka baxo meelaha uu aadka roobku ugu yar-yahay, wuuna u adkeystaa abaaraha. Roobka uu ku bixi karo waxaa lagu qiyaasaa inta u dhaxaysa 150-400mm sannadkii. Geedkani waxaa kale oo uu aad ugu adkeystaa dhulka aadka u kulul, leh heerkul gaaraya 30C.

Dhulka sare ayaa geedkani si gaar ah uga baxaa, gaar ahaan, dhulka dhererkiisu gaadhayo 300-1000 mitir. Meelaha biyuhu fadhiistaan yicibtu si fiican ugama baxdo.

**4. ISTICMAALKA GEEDKA:**

Yicibtu waxay leedahay miro dadku cunaan, oo aad u nuxur badan. Waxaa kale oo Yicibtu laga helaa qoryo la shito. Caleenta geedkani xoolaha ayaa daaqa, maadaama geedku leeyahay caleen Cagaaran sannadkii oo dhan marka cawsku yar ayahay.

## 5. URURINTA IYO KEYDINTA INIINYAHA (MIRAHA)

Iniinyaha geedkan waxaa laga ururiyaa geedaha soo bixiya miraha farabadan. Waxaa haboon in iniinyaha lagu keydiyo jawaano, lana dhigo meel qalalan.

Iniinyaha geedkani waxaa la keydin karaa muddo ah 1 sanno iyada oo aan wax dhibaato ahi gaadhin.
Uma baahna in la jilciyo dahaarka saaran marka la damco in la beero.

## 5.1 BEERIDA IYO XANAANADDA GEEDKA MUDADDA BEERTA DHIRKOBCINTA UU KU JIRO.

a) Iniiyaha si toos ah ayaa dhulka logu beeri karaa, ama qeyb ka mid ah geedkan ayaa inyta la gooyo lagu talaali karaa meeshii la damco.

Waa in lagu tallaala kaliya meeshii loogu talo galay, haddii kale mar haduu xidido la baxo aad ayey u dhib badan tahay in la geeyo meel kale.
Iniinyaha geedkan waxay ku soo baxaan muddo dhawr maalmood gudahood. Waxaa lagu qiyaasaa in boqolkiiba 80 iniinyaha la beero soo baxaan.

Meelaha ugu haboon in lagu tallaalo geedkan waxaa ka mid ah, dhulka leh ciida cas ee bataaxa ah.
Waa in laga ilaaliyaa xoolaha inta geedku yar yahay. Miraha ugu horeeya wuxuu geedkan soo saaraa 4 sanno ka dib. Guud ahaan bixitaanka geed kan wuu gaabiyaa.

# CUTUBKA 4aad;

**Erey-Bixin:Sharaxa Qaar Ka Mid ah Ereyadda Buuggan Ku Qoran**

| | |
|---|---|
| Abuurid (da): | Marka iniinyaha geedaha ama dalagyada beerahaba lagu beerayo dhulka, ama bac. |
| Bacda Dhircobcinta: | Iniinyaha geedaha qaarkood ayaa lagu abuuraa bac, bacdaas oo lagu xanaaneeyo in muddo ah, ka hor intaan geedaha lagu talaalin dhulkii loogu talo galay. |
| Beerid (da): | Abuurid iniinyo, ama talaalid geed. |
| Beerta Dhirkobcinta: | Beerta lagu xanaaneeyo dhirta markey yaryar yihiin, si marka lagu talaalo meeshii logu talo galay ay ugu baxaan si dhakhso ah. |
| Bilic (da): | Qurruxda, aragti ay indhaha dadku jecleystaan, hadday tahay degaan, iyo haddii kalaba. |
| Degaan (ka): | Cimiladda, meelaha ay dadku ku dhaqan yihiin sida tuulooyinka, degmooyinka iyo wixii la mid ah. |
| Diirka: | Xuubka dusha sare ka saaran iniinyaha. Dahaar, Qolof. |
| Geed Abaareed : | Dhirta xilliga roob la'aantu jirto aan dhiman, una adkeysta abaaraha. |
| Geed karis (ka): | Dadka aqoonta geedaha yaqaan, kuwaas oo awooda iney daawooyin cuduradda lagu bogsiiyo ka sameeyaan, iyagoo isticmaalaya Qeybaha kala duwan ee dhirta. |
| Harame (ha): | Waa dhirta ay cawska iyo geed hoosaadka kale ka mid yihiin, kuwaas oo laga jarro marka dalagyada beerahu baxayaan , iyo geeduhuba. |
| Heerkul (ka): | Kulka Qorraxdu inta uu gaadhsiisan yahay, xaddiga kulka. |
| Iniinyo (ha): | Xubin ka mid ah geedaha oo loo isticmaalo taranka, ama ay ka soo biqlaan geeduhu. Firrida. |
| Kuleylayaasha: | Dhulalka la dariska ah badhtamaha dunida, kul badan ayaa ah astaan u gaar ah dhulkaas. |

Miro (ha) : Qeyba geedka ee ay ku dhex jiraan, iniinyuhu Geedaha qaarkood miraha ay soo saaraan waa l cunaa, sida Babaayga, iyo Cambaha.

Nafaqeyta ciida: Marka lagu darro ciida , waxyaabaha ko u qaada nafaqadda ku jirta. Waxaa ka mid Saalada Xoolaha, caleenta, jirrida, iyo laamaha geedaha marka ay dhintaan.

Qalfoofka: Waa diirka adag ee ku dahaaran, iniinyaha, ar miraha geedaha, kaas oo ka ilaaliya in dhaawa uu gaadho.

Talaalid (da): Beerida. Marka dhirta laga qaado beerta dhirkobcinta laguna beero dhulkii loogu talo galay.

Udub (ka): Xubinta ku taal geedka, taas oo sare u haysa geedka, isla markaana ay u maraan geedka waxyaabaha ay ka midka yihiin biyaha, iyo macdanaha kale.